WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeeynayaa in Jaalle Faaduma Abuukar Cali ay soo qoratay arji waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta Xamar, maalintii taariikhdu ahayd 12.8.78 ay ku weydiisatay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Wardhiigley Qaabkiisuna waa Quadrulatera Addimihiisuna yihiin (30X30)X50X22) kuna fadhiya 1,000 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga : Dhul. Dad leeyahay
Koonfur waxaa ka xiga : Waddo
Galbeed waxaa ka xiga : Dhul Dad leeyahay
Bari waxaa ka xiga : Dhul Dad leeyahay

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Dhismaha iyo Dhulka ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood laga bilaabo maalinaa lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah:

Muqdisho, 24 Oktoobar 1978

Agaasimaha Waaxda Sah. iyo Deg. Magaalaynta
Inj. Cabdikariin Cige Guuleed

L. 103

Societa' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE—S. I. P. A:-
Saldhigga Shalambood Raasumaal Sh.so. 8.112.000 :-

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH.

Sahmi qabayaasha Sharikadda Societa Incremento Produzioni Agricole S.I.P.A waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qab doono Muqdisho—Xafiiska Rag. Arturo Salvi, maalinta 18ka Maarso 1979 saacaddu markay tahay 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 19ka Maarso 1979 isla saacadda kor ku xusan, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA SHIRKA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
2) Hor dhig Miisaaniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaa 31da Diseembar 1978 iyo go'aannada la xirriira;
3) Wax alla wixii falanqays u baahdo.

Waxaa xaq u leh in ay shirka ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga Shariikadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE - S.I.P.A.

Società per Azioni - Sede sociale in Scialambot
Capitale sociale versato Sh. So. 8.112.000,00

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDRINARIA

I Signori Azionisti della Società Incremento Porduzioni Agricole - S.I.P.A. - S.p.A., sono convocati in Assemblea Ordinaria in Mogadiscio presso lo Studio Commerciale Rag. Arturo Salvi, per il giorno 18 Marzo 1979, alle ore 9,00 in prima convocazione, ed, occorrendo, in seconda convocazione per il giorno 19 Marzo 1979, alla stsessa ora e nello stessa luogo, per discutere e deliberare sul seguente :

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amminstrazione e Rapporto del Collegio Sindacale ;
2) Presentazione Bilancio e conto Perdite & Profitti chiusi al 31 dicembre 1978 e deliberazioni relative ;
3) Varie ed eventuali.

Avranno diritto di intervenire all'Assemblea gli Azionsti inscritti nel Libro Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho, 25 Feb. 1979 L. 1R2

Laanta Faafinta Rasmiga ah oo Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya **gudaheeda — dibaddedana waa** Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba **Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa** lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOWAAD

S H A R C I

SHARCI L. 2 ee 14 Jen. 79, Wax ka beddelid Sharciga Dhismaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha Bogga 109

SHARCI L. 3 ee 4 Feb. 79, Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa:- » 114

Law N. 3 4th feb. 79 Decrees this act as range development and management. » 123

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 12 ee 26 Dis. 78, Dallacaad Shaqaale » 132

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 13 ee 9 Jen. 79, ku maamuusid Billad lacag ah oo Kacaannimo Jaalle Takhtar Daahir Nuur Raafi » 139

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 14 ee 20 Jen. 79, Guddoonsiin Jaallayaasha Billado lacag ah oo Kacaannimo » 140

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 15 ee 23 Jen. 79, ku maamuusid Billad lacag ah Jaalle Xuseen Cabdulle Deerow » 141

QAYBTA SADEXAAD
TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, ee 22.2.79, lumid Jeeg. L. 23198 ku qoran tahay Sh. So. 1.350 uu leeyahay Ciise Nuur Yuusuf L. 108 » 142

Ogeysiis Shir Saamiley Warshadda Kiimikadda Soomaaliyeed (BAYL) L. 109 » 143

Ogeysiis Shir Saamiley Warshadda Saabuunta qubeyska iyo Mariska L. 110

Q A L A D — B I X I N

FAAFINTA RASMIGA AH ee Lam. yahay 2 ee 1dii Febraayo 1979 Bog. 106 Qaybta labaad ku qoran yahay Go'aanka Maxkamadda Gobolka Banaadir Jeeg. Lamb. War. 357766; waa in loo akhriyaa sidatan Jeeg. Wareega L. 257766.

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 2 ee 14 Jen. 1979 wax ka beddelid Sahrciga Dhismaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tii 3aad ee Kacaanka 21 Otkoobar 1969

ISAGOO ARKAY: Sharciyada L. 17, 18, iyo 19 ee 1 Luulyo 1976 ee Maamulka Guud ee Dowladda oo loo wareejiyey Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed:-

ISAGOO ARKAY: Sharciga L. 19 ee 6 Abriil 1978 oo lagu dhisay Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha

ISAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in sharciga Dhismaha Guddiga wax laga beddelaa laguna kordhiyaa si uu maamulkiisa iyo awoodiisa uu noqdo mid lagu fulinayo himilooyinka loo dhisay Guddigaa;

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo kaa Golaha Wasiiradda

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Guddiga Iibka Qaranka iyo Horudhigidda Dhaqaalaha oo lagu dhisay sharciga 1. 19 ee 19 Abriil waxaa la oran doonaa «GUDDIGA IIBKA QARANKA & QANDARAASYADA DOWLADDA» hadda ka dibna waxaa loo aqoonsan doona «GUDDIGA»

Qodobka 2aad

Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dowladda waa Hay'ada sare oo raacsan Madaxtooyada

Qodobka 3aad

Guddiga Xaruntiisa waa magaala madaxda Muqdishu.

Guddiga wuxuu yeelan karaa Xafiisyo ama laamo Gobolladda iyo Degmooyinka uu ka kooban yahay Dalka haddii loo baahdo.

Qodobka 4aad

'ada Rugta Ganacsiga ee la xiriira howlo sharciga u xilsaaraayo waxaa loo beddelay mid la talin u ah Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-
Guddiyada kor ku xusan waxay kala yihiin:

i - Guddiga Oggolaanshaha Lacagta Qalaad (Commissio ne valuta estera) oo lagu dhisay Sharciga L. 12 ee sett embr 1964 ;
ii - Guddiga Bixinta Ruqsadaha Beecmushtarka (licensing Commity) oo lagu dhisay Keerka L. 264 ee 25 nofembre 1964 ;
iii - Guddiyada Qandaraasyada oo ka dhisan Hay'adaha Dawladda.-

2) Habka ku dhaqanka xubinta seddexaad ee qodobkan waxaa amarro iyo talooyin ka bixin kara Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

Qodobka 5aad

Hashiisyada Hayadaha Dawladda dhinac ka ah iyo Qandaraasyada ee oggolaanshahooda aan ka soo fulin Hayadaha Sare Golaha Dhexe ee X.H.K.S., Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. Golaha Wasiiradda iyo Guddiga Sare ee Dhaqaalaha lama diiwaan gelin karo haddii aan laga helin oggolaansho Hay'ada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

Qodobka 6aad

1 Guddoomiyaha Guddiga iyo Guddoomiya ku-Xigeenka waxay ka tirsan yihiin Golaha Dhexe ee X.H.K.S. waxaana lagu magacaabi doonaa Xeerka Madaxweynaha J.D.S.

2 Guddiga wuxuu yeelanayaa laba aqoonyahan oo waayo aragnimo leh oo kala ah:
i - Aqoonyahan xagga Bangiyada, Dhaqaalaha iyo Iibka;

ii - Aqoonyahan xagga sharciyada

Aqoonyahannadaas ama «La-taliyayaashaas» heerkooda iyo dhaqaalahooduba waxaa lagu soo habeyn doonaa Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahinayaao Sharciga Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda:-

3 - Guddiga wuxuu kaloo yeelanayaa Xoghaye Guud oo qaban doono Howlaha la xiriira Guddiga, habeynta iyo keydinta go'aanadooda iyo kaa maamulka shaqaalaha raacsan Guddiyada.

Qodobka 7aad

Havadda Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda waxay ka kooban tahay:

1) — Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda

3) — Guddoomiyaha Guddiga

Qodobka 8aad

1) — Xubinaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qanadaraasyada Dawladda

Guddigaa wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Guddiga, Guddoomiye ku-Xigeenka, xubnaha kalana waxay kala yihiin:

— Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda Xubin

— Wasiirka Wasaaradda Ganacsigr Xubin

— Guddoomiyaha Bankiga Dhexe Xubin

— Aqoonyahanka Xagga Bankiyada, Dhaq. & Iibka Xubin

— Aqoonyahanka Xagga Sharciyada Xubin

— Xoghaayaha Guud ee Guddiga Xubin (Xoghaye)

2) - Howsha iyo Xilka Guddiga :

i - Guud ahaan waxay ka mas'uul yihiin dejinta siyaasadda guud ee la xiriira Iibka Qalaba kasta oo u baahdaan Hay'adaha Dawladda iyo maamulka la xiriira Qandaraasyada Hay'adaha Dawladda ;

ii - Gaar ahaan waxay ka mas'uul yihiin fulinta howlaha lagu faahfaahiyay qod. 4aad ee Sharciga 1. 19 ee 4 Abriile 1978 iyo go'aan ka gaaridda la xiriira :

a) - Oggolaanshah Lacagta Qalaad ;

b) - Bixinta Rugsadaha Beecmashtarka

c) - Oggolaanshaha Ruqsadaha Ganacsiga ee la siiyo shishisheeyaha ee Rugta Ganacsiga ;

d) - Oggolaanshaha kama dambaysta ee Qandaraasyada Dawladda.

3) - Awoodda Guddiga :

Guddiga waxay awood u leeyihiin :

i) - In ay buriyaan Heshiis kasta ama Qandaraas kasta - inta aan la fulin haddii ay ka soo ifbaxaan xaalado lid ku ah dhaqaalaha iyo danaha guud ee Dawladda:-

ii) - Howlaha fudud ee la xiriira Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda u wakiishaan Guddiga Fu-

4) - Fadhiyada Guddiga :

Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda waxay yeelanayaan fadhiyo joogto ah oo isugu yeero Guddoomiyaha Guddiga mar alaale oo ay jiraan howlaha oo sharcigan u xilsaaray Guddiga :

1) - Xubnaha Guddiga Fulinta :

Qodobka 9aad

Xubnaha Guddiga Fulinta wuxuu ka kooban yahay Guddoomiyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda, Guddoomiye ku-Xigeenka, labada aqoonyahan iyo Xoghayaha Gudiga oo lagu xusay qod. 6aad ee Sharcigan:-

2) - Howsha iyo xilka Guddiga Fulinta :

i) - Guud ahaan waxay ka masuul yihiin diyaarinta, baaritaanka howsha Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda oo lagu xusay qod. 4aad ee Sharciga Dhismaha Guddiga 1. 19 ee 4 abriile 1978;

ii) - Gaar ahaan :

- Fulinta go'aanada ka soo baxa Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda;
- ku dhaqanka sharciyada la xiriira oggolaanshaha Lacagta Qalaad, bixinta ruqsadaha iyo kaa Qandaraasyada Dawladda;
- Hirgelinta Siyaasadda ganacsiga iyo kaa dhaqaalaha ee ka soo fula Golaha Dhexe ee X.H.K.S., Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S., Golaha Wasiirradda iyo Golaha Sare ee Dhaqaalaha
- Go'aan ka gaaridda howlaha loo wakiishay :

3) - Awoodda Guddiga Fulinta :
Guddiga Fulinta waxay bixin karaan amarro iyo talooyin guud ee la xiriira xilka sharciga oo ay Maamusho Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda :

4) - Fadhiyada Guddiga Fulinta :
Guddiga Fulinta waxay yeelanayaan fadhiyo joogto ah oo isagu yeeraayo Gudoomiyaha Guddiga, haddii uu maqanyahayna Guddoomiye ku-Xigeenka Guddiga si ay u fuliyaan howshooda joogtada ah :-

Qodobka 10aad

Guddoomiyaha Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda wuxuu matilayaa Hayada Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada Dawladda :-

Guddoomiyuhu wuxuu ka masuul yahay maamulka guud

...owsha Hay'ada iyo go'aannada saameeya
...dxa Hayadah...dare isagoo mar waliba u ho-
...iyaasadda ...acsiga iyo ka dhaqaalaha ee Dal-

...vuxuu ...ghayaha ...ka bixinta magacaabidda Aqoon ya-
...naqharcigan iyo saraakiisha Hayada :-
...qoonyahannada iyo Xaghayaha Guddiga waxaa lagu ma-
...aah: doonaa Xeer u soo saaro Madaxweynaha isagoo dhe-
...stay tala soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga :-

Guddoomiyaha wuxuu awood u leeyahay inuu magacaabo khubaro oo Hayada kala Taliya wax alaale wixii u baahan yihiin oo aqoon ama farsamo gaar ah u baahan. Magacaabidda khubaradaas waxaa lala raacayaa habka sharciyada madaniga ay qoraayaan, waxayna xaq u leeyihiin marka howshooda dhaqeyaan in la siiyaa gunno howleed :- (indennita' della perizia condotta). Khubaradaas kama tirsanaan karaan shaqaalaha Hayada :-

Qodobka 11aad

Xuquuqda shaqaalaha Hayada waxaa xukumaaya sharciga Shaqaalaha Dowladda 1. 29 ee 1 Abriile 1970 iyo beddelaadii kadambeeyay:-

Qodobka 12aad

Hayada waxay yeelanaysaa qaab u gaar ah oo lagu soo saari doono Xeer u saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S. isaga dhegeystay talada Gudiga Iibka Qaranka iyo Qanadraasyada Dowladda :-

Qodobka 13aad

Maamulka lacagta ee Hayada waxaa xukumaaya lagu maamulaaya habka ay tilmaamayaan Sharciyada Maamulka Lacagta ee Dawladda :-

Qodobka 14aad

Hayada waxay yeelanaysaa Xeer Nidaamiye lagu faahfaahin doono Sharcigan oo soo saari doono Madaxweynaha iyo dhegeystay talada Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Raasmiga ah ee

Qodobka 15aad

...harci kasta ee ...ka soo horjeeda ...ahaan waxaa la ...lagu dhis

SHARCI L. 3 ee 14 Jen. 1979 Sharciga Horumarinta Dhulka
Daaqa.-

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aa[illegible]ka-
caanka ;

SAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkoodu yahay 17, 18 iyo
19 ee soo baxay 1 Luulyo 1976 ;

AGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 15 soona baxay 25kii
Janaayo 1969 iyo Sharcigii ka dambeeyey ee lamb. ahaa
68 socna baxay 20kii Oktoobar 1970 kuma saabsan Dhirta,
Daaqa & Ugaarta ;

GOO ARKAY : Sharciga Dhismaha Wakaaladda Daaqa
Qaranka ee lambarkiisu yahay 23 soona baxay 16.8.76 ;

O TIXGELINAYA : Barnaamijka X.H.K.S. oo ku saab-
n daryeelidda dhaqaalaha iyo horumarinta Daaqa ee
oluhu ku nool yihiin ;

O AQOONSAN : Inay lagama maarmaan tahay in la
habeeyo sharci lagu fulinaayo Maaraynta, Maamulka
Hagaajinta iyo waliba ka hortagga Dhulka Nabaad-guu.

TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyay Wasiirka
ha, Dhirta iyo Daaqa;

TIXGELINAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo
a Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAYAA

socda :-


Qodobka 1aad

CADDEYN

ir : Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda
ha, Dhirta iyo Daaqa.

aladda : Waxaa loola jeedaa Wa[illegible]
a.

yaha C[illegible]



jeedaa
deggan

Hay'ada, socodsiinta howsha Hay'ada iyo go'aannada saameeya Hayada ee ka soo baxa Hayadaha Sare isagoo mar waliba u hogaan samaaya Siyaasadda ganacsiga iyo ka dhaqaalaha ee Dalka.

Wuxuu leeyahay talo ka bixinta magacaabidda Aqoon yahannada, Xoghayaha Guud ee Guddiga oo lagu xusay Qod 6aad ee sharcigan iyo saraakiisha Hayada :-

Aqoonyahannada iyo Xaghayaha Guddiga waxaa lagu magacaabi doonaa Xeer u soo saaro Madaxweynaha isagoo dhegeystay tala soo jeedinta Guddoomiyaha Guddiga :-

Guddoomiyaha wuxuu awood u leeyahay inuu magacaabo khubaro oo Hayada kala Taliya wax alaale wixii u baahan yihiin oo aqoon ama farsamo gaar ah u baahan. Magacaabidda khubaradaas waxaa lala raacayaa habka sharciyada madaniga ay qeyaan, waxayna xaq u leeyihiin marka howshooda dhameeyaan in la siiyaa gunno howleed :-
(indennita' della perizia condotta). Khubaradaas kama tirsanaan karaan shaqaalaha Hayada :-

Qodobka 11aad

Xuquuqda shaqaalaha Hayada waxaa xukumaaya sharciga Shaqaalaha Dowladda 1. 29 ee 1 Abriile 1970 iyo beddelaadii ka dambeeyay:-

Qodobka 12aad

Hayada waxay yeelanaysaa qaab u gaar ah oo lagu soo saari doono Xeer u saxiixo Jaalle Madaxweynaha J.D.S. isaga dhegeystay talada Gudiga Iibka Qaranka iyo Qanadraasyada Dowladda :-

Qodobka 13aad

Maamulka lacagta ee Hayada waxaa xukumaaya laguna maamulaaya habka ay tilmaamayaan Sharciyada Maamulka Lacagta ee Dawladda :-

Qodobka 14aad

Hayada waxay yeelanaysaa Xeer-Nidaamiye lagu faahfaahin doono Sharcigan oo soo saari doono Madaxweynaha isagoo dhegeystay talada Guddiga Iibka Qaranka iyo Qandaraasyada, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda :-

Qodobka 15aad

Waxaa la buriyay sharci kasta ee ka soo horjeeda sharcigan ama aan la socon karin. Gaar ahaan waxaa la buriyay [illegible] 6aad ee Sharciga 1. 19 ee 4 abriile 1978 oo lagu dhisay Guddiga:-

Qodobka 16aad

1) - Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda:-

2) - Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa sharciyada Jamhuriyada Dimuqraadiga ee Soomaaliya :-

[illegible] 79

SHARCI L. 3 ee 14 Jen. 1979 Sharciga Horumarinta Dhulka Daaqa.-

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka ;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada lambarkoodu yahay 17, 18 iyo 19 ee soo baxay 1 Luulyo 1976 ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga lamb. yahay 15 soona baxay 25kii Janaayo 1969 iyo Sharcigii ka dambeeyey ee lamb. ahaa 68 soona baxay 20kii Oktoobar 1970 kuma saabsan Dhirta, Daaqa & Ugaarta ;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Dhismaha Wakaaladda Daaqa Qaranka ee lambarkiisu yahay 23 soona baxay 16.8.76 ;

ISAGOO TIXGELINAYA : Barnaamijka X.H.K.S. oo ku saabsan daryeelidda dhaqaalaha iyo horumarinta Daaqa ee Xooluhu ku nool yihiin ;

ISAGOO AQOONSAN : Inay lagama maarmaan tahay in la soo habeeyo sharci lagu fulinaayo Maaraynta, Maamulka iyo Hagaajinta iyo waliba ka hortagga Dhulka Nabaad-guuraya;

ISAGOO TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyay Wasiirka Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa;

ISAGOO TIXGELINAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada;

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda : -

Qodobka 1aad

CADDEYN

b) Wasiir : Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa.

t) Wakaaladda : Waxaa loola jeedaa Wakaaladda Daaqa Qaranka.

j) Maareeyaha Guud : Waxaa loola jeedaa Maareeyaha Guud ee Wakaaladda Daaqa Qaranka.

x) Iskaashatada : Waxaa loola jeedaa Iskaashatada Xoolaha iyo Daaqa.

kh) Ururka Daaqa iyo Xoolaha : Waxaa loola jeedaa Urur ay doortaan Xoolayda iyo dadweyna[illegible]

d) Xoolo : Waxaa looal jeedaa lo', Dameer, Geel, Ido, Riyo, Fardo iyo Ugaar.

Qodobka 2aad

AWOODDA WASIIRKA

1. Wasiirka asagoo kala tashanaya Maareeyaha Guud ee Wakaaladda iyo Madaxda Daaqa ee Gobollada, wuxuu awood u leeyahay inuu ka dhigo meel kasta oo ka mid ah J.D.S. goob laga hirgelinayo horumarinta Daaqa.

2. Wasiirku isagoo dhegeystay talada Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, wuxuu awood u leeyahay beddelaadda xuduudka goob daaqeed ee horay loo calaameeyey.

Qodobka 3aad

SEEREYAASHA

1. Wasiirku isagoo dhegeystay talada Maareeyaha Guud ee Wakaaaladda iyo soo jeedinta G.X.H.K.S. ee Gobollada, waxaa uu awood u leeyahay inuu ka dhigo meeshuu garto gobol kasta seero:

2. Seeroyaashu waxay noqon karaan noocyada soo socda:

b) Seere Xilli (Seasonal Reservo) oo ah mid waqti go'an la furo, waqti go'ana la xiro sannadkii:

t) Seere Talantaali (Rotational Reserve) oo ah seere loo daaqo si talantaali ah:

j) Seere abaareed (Famine Reserve) oo ah dhul la seeray waqti dheer oo aan la furi karin ilaa ay baahi weyn jirto;

x) Seere joogta ah (Absolute Reserve) oo ah seere si joogta ahaan u xiran looguna tala galay baaris cilmiyeed.

3. Dhulka la xirmeeyo ama la seero waa inuu yeeshaa xuduudo la caddeynaayo lana calaameynaayo.

4. Xiritaanka ama furitaanka seerayaasha: goob kasta waxaa lagu furi karaa oo keliya oggolaansho qoran oo uu bixinaayo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, isagoo la tashanaaya Madaxda Daaqa iyo Xoghayaha X.H.K.S. ee Gobolka.

5. b. Maareeyaha Guud isagoo la tashanaaya Xoghayaha Xisbiga ee Gobolka iyo Xoghayaha Xisbiga ee Degmada wuxuu seere walba ka abuuri karaa Ururro xoolo iyo daaq (Range & Livesstock Association).

t. Maareeyaha Guud waxaa awood loo siiyay in haddii urur la sameeyey uu hirgelin waayo hawshii loo abuuray uu baabi'ir karo ururkaas.

Qodobka 4aad

Badbaadada dhulka (Rangeland conservation)

1. Wakaaladda mar alaale markii ay la noqoto iney tahay lagama maarmaan iyadoo ujeeddadu tahay dhagaalamta ciid

da ama ka hortagga carro guurka ama la doonaayo in lagu soo celiyo carradii iyo daaqii iyadoo la tashaysa Wasiirka waxay awood uleedahay Xaaraameynta iyo kontoroolka.

b) Dhulka loo isticmaalayo beeridda ama daaqa.
t) Dhulka la qodo, ama la geeda qaado.
j) Dhulka la gubo ama la jaro geedahiisa.
x) Dhulka loo isticmaalo biyo xireeno, ceelal, waro iyo wabiyada.

kh) Dhulka shubka ah iyo dhulka la xirmeeyey.

2. Marka ay la noqoto Wakaaladda, meel kasta oo dhulka daaqa ka mid ah, oo aan ahayn meel ay ku yaaliin guryo, dukaamo, guryo la seexdo, ama dhul macdan laga baarayo, waxay soo saari kartaa Xeer hoose (Decree) oo ay dhulkaas ku seeri kartaa iyadoo la tashaneysa X.H.K.S. ee Gobolka.

3. Wakaaladdu si ay u kontoroosho dhulkka daaqa lagana faa'iideysto biyaha waxay qaadi kartaa talaabooyinka soo socda

b) Ilaalinta qararka, dooxyada, waadiyada, jeex-jeexa,
t) Joojinta iyo kontoroolka carro-guurka (Soil Erosion). ceelasha, biyo-xireenada, barkadaha iyo waraha (Reservoira).

j) Horumarinta daaqa ku yaal dhulka J.D.S., lana keeno baad cusub oo faa'iido u leh xoolaha.

x) Sameynta beero iyo xerooyin lagu abuuro daaq cusub meelaha ku habboon.

kh) Sameynta keyd daaq (Fodder bank).

d) Abuurista Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha (Cooperative Ranch).

r) Sahaminta dhulka

s) Qaadista tiro koob xooladhaqatada iyo Xoolaha

4. Madax kasta oo Wakaaladda ka tirsan awood ayuu u leeyahay inuu geli karo dhul kasta oo ku yaal goobta daaqa mar ka laga saaro dhulka la deggan yahay :

b) Si uu u hubiyo talaabooyinka loo baahan yahay in la qaado kuna saabsan hagaajinta daaqa iyo keydka.

t) Si uu u hubiyo in dhulka loo isticmaalaayo sidii qorshuhu ahaa, waafaqsan qodobbada sharcigan.

Qodobka 5aad

Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha
(Cooperative Ranch)

(Cooperative Ranch)

1. Wakaaladdu iyadoo tixgelineysa baahida loo qabo, dhiiri gelineysa Iskaashatooyinka waxay abuuraysa Iskaashsatooyin Xoolo iyo Daaq, ka dib markey oggolaato Guddiga X.H.K.S. ee Gobolka iyo Degmada, waxayna qaadaysaa tilaabooyin lagu hirgelinaayo Iskaashatooyinkaas.

2. Wakaaladdu markay dhammeyso talaabooyinka kor lagu sheegay waa inay sahankii dhulka, qorshihii, iyo habkii lagu maamuli lahaa Iskaashatada ay ku dhaqaaqdaa.

3. Wakaaladdu markay dhammeyso qorshaha Iskaashatada, oggolaatana abuuriddeeda waxay sihr isugu yeereysaa xubnaha doonaya inay abuuraan Iskaashatada, waxaana laga doodayaa arrimaha soo socda :-

b) Tilmaanta dhulka beesha iyo xuduudkeeda.

t) Tilmaanta biyaha loogu tala galay beeshaas.

j) Tilmaanta shaqada, dejinta, horumarinta, dhaqaaleynta iyo wanaajinta beeshaas.

x) Qiyaasta Xoolaha loo oggol yahay inay daaqaan daaqa loogu tala galay.

kh) Dadka ka mid noqon doona beesha iyo xoolohooda.

4. Shirka gudihiisa waxaa lagu dooranayaa Guddi maamul oo ka kooban 5 Xubnood oo uu ka mid yahay Wakiil ka soo da Wakaaladda.

5. Go'aannada shirka waxaa lagu gaarayaa aqlabiyadda xubnaha intooda badan (Majority decision).

6. Wakiilka u jooga Wakaaladda meesha laga abuuray Iskaashatada wuxuu awood u leeyahay goynta tirada xoolaha lagu dhigi karo beeshaas isagoo eegaya dhulka intuu qaadi karo.

7. Markay arrimahaasu dhammaadaan waxay Wakaaladdu diiwaan gelineysaa Iskaashatada.

8. Iskaashatada kasta oo la diiwaan geliyay waxay sameysaa xeer u gaar ah iyadoo raacaysa tilmaanta ay bixisa Wakaaladda.

9. Wixii dhul ah oo sharcigan lagu siiyay Iskaashatada waa inaan loo isticmaalin si kale. Hase yeeshee haddii xubnaha Iskaashatadu ay kala tagaan dowladda ayaa la wareegeysa dhulkaas waxayna ka dhigeysaa beerta daaqa iyo xoolaha oo Dowladda (State Ranch).

10. Guddiga maamulka oo la soo doortay wuxuu Iskaashatada ku maamuli doonaa qorshihii iyo siyaasadda ay Wakaaladdu u soo dejisay, waana inuu ku dadaalaa sidii uu horay ugu dhigi lahaa khayraadka iyo ka faa'iideysiga Iskaashatada.

11. Guddiga Iskaashatadu wuxuu kaloo awood u yeelanayaa :-

1. Dejinta xoola-dhaqatada iyo xoolohooda.

2. Inay gadaan ama soo gataan xoolo, qalab, iyo wax alaale wixii kale oo ay u baahan tahay Iskaashatadu.

12. Guddiga maamulka Iskaashatada isagoo tixgelinaya duruufta jirta oggolaanshana ka haysta Wakaaladda iyo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada: wuxuu awood u leeyahay :

1. Wuxuu israacin karaa dhowr Iskaashato si ay u noqdaan Iskaashato keliya oo weyn.

2. Wuxuu Iskaashatada u kala jabin karaan dhowr Iskaashatooyin.

13. Iskaashatooyinka Daaqa iyo Xoolaha waxay u kala qaybsan yihiin noocyada soo socda :

1. Iskaashatooyin reer guuraaga.

2. Iskaashatooyinka magaalooyinka ama tuulooyinka.

3. Iskaashatooyinka dadka ka baayac-mushtarka Xoolalaha.

14 Iskaashato waliba waa inay ugu yaraan ka koobnaataa 25 Qoys. Qoyskuna wuxuu ka kooban yahay nin aafadiisa iyo caruurtiisa ama aan qaar gaarin.

Qodobka 7aad

Abuuridda Beeraha Daaqa iyo Xoolaha ee Dawladda (State Ranch) iyo kuwa Keydinta Cawska beeraha daaqa (Fodder Bank)

1. Wasiirku isagoo dhegeystay ra'yiga Maareeyaha Guud, ayuu oggolaan karaa abuuridda beero daaq iyo Xoolaha ee Dawladda iyo kuwa keydka cawska meelaha hoos ku tilmaaman :

b) Dhulka aan la deganeyn gaar ahaan goobaha dhulka leh duqsiga qaniinka leh (Tse-tse fly).

t) Meel kasta oo aan qof lahayn ama Iskaashato lahayn ama aan macdan laga baareyn.

j) Meel kasta oo dib loo soo barwaaqaynaayo (Rehabilitation).

2. Wasiirku markuu qaato ra'yiga Wakaaladda wuxuu kaloo oggolaan karaa :-

b) Meel laga beero daaq xooleed iyo beeraha kobcinta (Nurseries) meel kasta oo aan qofna lahayn ama aan Iskaashato la siin ama macdan laga qodeyn.

t) Meel laga sameeyo tijaabooyin iyo tababar (Research and Demonstration).

3. Go'aannada kor ku tilmaaman waxaa lala socodsiinayaa Xoghayaha X.H.K.S.

Qodobka 8aad

Horumarinta Biyaha

1. Xilka Wakaaladdu wuxuu yahay ilaalinta iyo qorsheynta biyaha loogu tala galay horumarinta Xoolaha iyo daaqa.

2. Wakaaladda Horumarinta Biyaha waxay talo weydiisan doontaa Wakaaladdan si ay u siiso meelaha loo oggol yahay ceelal, barkado iyo biyo xireen. Sharcigaanu wuxuu saameeynayaa oo keliya miyiga mana khuseeyo Biyaha Magaalooyinka.

3. Waa in ruqsad loo helaa Barkadaha, Balliyada iyo Waraha. Haddii la ogaado in Barkadaha, Balliyada, Ceelasha ay nabad-guurinayaan dhulka ku dhow, Wakaaladdu waxay awood u leedahay iney baabi'iso Barkadahaasi ka dib markey oggolaato Guddida ee X.H.K.S. ee Degmada iyo Gobolka.

4. Ruqsad bixinta waa in la waafajiyaa goobta barkadda, warta, ama ceelka laga sameynaayo, waana iney Barkad kasta u jirtaa tan kale masaafad aan ka yarayn 30 Km., marka laga reebo dhulka daaqa xoolaha laga hirgelinaayo.

5. Barkadaha meel ku wada yaalla waa in aanay ka badnaa 20 ilaa 25 Barkadood.

6. Wsiirka marka uu la tashado Xafiiska Daaqa Gobolka, Madaxda Gobolka iyo Maareeyaha Guud ee Wakaaladda, wuxuu baabi'in karaa barkad kasta, war kasta, ceel walba iyo biyo xireen kasta, haddii uu ogaado in aanay khusen danta Ummadda iyo Dalka Dhaqaalihiisa.

7. Wakaaladda Horumarinta Biyaha markay ceelasha dhulka Miyiga ah waa inay marka hore Wakaaladda ka heshaa oggolaansho inta aanay bilaabin qoditaanka.

Qodobka 9aad

Diiwaan gelinta meelaha biyaha

1. Dhamaan Barkadaha, Waraha, Ceelasha waa in la diiwaan geliyaa iyadoo la siinaayo lambar u gaar ah gobolkiiba.

2. Habka diiwaan gelinta waxaa tilmaami doonta Wakaaladda .

3. Canshuurta diiwaan gelinta waxay noqon doontaa Sh. So. 10/= waxaana la siin doonaa Wakaaladda.

Qodobka 10aad

Abuuridda Sanduuqa lacagta ee Wakaaladda (Range Fund)

1. Si loo dhaqaaleeyo, maamulo loona hirgeliyo horumarinta dhulka daaqa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, Wakaaladda waxay u baahan tahay dhaqaale.

2. Dhaqaalahaas wuxuu ka imaan karaa canshuurta ay Wakaaladdu ka heleyso hawla kasta ay qabato oo ah cawska, dhirta iyo wixii ka soo baxa ugaarta iyo ganaaxa amaba lacagta ay ka hesho bankiyada ama deeq shisheeye. Lacagtaa Wakaaladda soo gasha waxaa la waafajinayaa sharciga Xisaabaadka ee u degsan Wakaaladaha madax-banaan.

Qodobka 11aad

Canshuurta

1. Wakaaladdu waxay canshuur ka qaaadaneysaa waxyaalaha hoos ku qoran :-

b) Ruqsadda Cawska (Grass Permit) waxaa laga qaadanayaa

1. Sh.So. 10/= Xamuul baabuur oo ah 3 ilaa 7 tan
2. Sh.So. 20/= Xamuul baabuur oo ah 20 tan iyo wixii ka badan.
3. Sh.So. 00/50 Dameeraha iyo fardaha ama Awrta.

t) Xoolaha ruqsad la'aan ku gala seeayaasha iyo meelaha ujeedada iyo cilmi baarista, waxaana laga qaadayaa sida soo socota :-

1. Geela	Sh. So.	5/—	neefkiiba
2. Lò	»	3/5	»
3. Ido iyo Riyo	»	1/50	»
4. Dameer iyo Fardo	»	3/50	»

j) Dhammaan Iskaashatooyinka daaqa iyo Xoolaha marka la diiwaan geliyo waxay bixin doonaan Sh.So. 50/ waxaana lagu soo qori doonaa arji ah Sh.So. 5/=

x) Ruqsadda barkaduhu waa Sh.So. 50/= marka la dhisaayo, sannad walbana waxaa laga qaadayaa Sh.So. 5/=; hase yeeshee kuwa aan loogu tala gelin ganacsi waa lacag la'aan.

2. Wakaaladdu ayaa iibin doonta wixii geedo ka baxa beeraha ama daaqa oo lagula wareego Xukun Maxkamadeed ama uu ka cararo qofkii lahaa, waxaana lagu gedi doonaa qandaraas dadweynaha loo soo bandhigo. Wixii lacag ka soo gala waxaa lagu shubaayaa xisaabta Wakaaladda.

3. Wasiirka waxaa awood loo siiyey inuu sicir u goyn karo biyaha waraha iyo ceelasha ee hoos yimaada Wakaaladda.

Qodobka 12aad

Bixinta Rukhsadda

1. Wasiirka ama qof kasta oo ka wakiil ah ayaa bixin kara Ruqsadda isagoo cuskanaaya shuruudaha ku qoran sharcigan.

2. Wasiirka ama qofka isaga ka wakiil ah, waa baabi'in karaa rukhsadda ama wixii shaki galo, ama ka soo bixi waayo shuruuradaha ku qoran sharcigan ee rukhsadda lagu bixiyey.

3. Qof kasta oo ruqsad la'aan beddela, durkiya ama baabi'iya Calaamadda, ama xuduudka beeraha, ama seereyaasha, dambi ayuu galayaa.

Qodobka 13aad

Awoodda baarista iyo qabashada

Askarta dhiman ee Wakaaladda, seere iyo dhir ilaaliyayaasha, waxa loo xilsaaray ama booliska waxay awood u leeyihiin inay baaraan ama qabtaan qofkii ku xadgudba sharcigan iyagoo isla markiiba horgeeynaya Maxkamadda ku shuqul leh.

Qodobka 14aad

Ciqaab

1. Qof kasta oo ku xadgudba sharcigan wuxuu muteysanayaa in lagu ciqaabo xarig 6 ilaa 9 bilood ah ama ganaax gaaraya Sh.So. 600 ilaa Sh.So. 1200/=

2. Xadgudubkaasu haddii uu ku saabsan yahay meel cilmi baaris loogu tala galay ciqaabtu waxay noqoneysaa xarig ah 6 ilaa hal sano ama ganaax gaarayaa Sh.So. 1000 ilaa Sh.So. 5000/=

3. Qofkii caado ka dhigto inuu ku xadgudbo sharcigan ruqsadda ama oggolaanshaha uu heysto waa laga joojinayaa

4. Qof kasta oo qaadan waaya alaabta dembiga lagu galay muddo saddex bilood ah, alaabtaas Dawladdda ayaa la wareegeysa.

Qodobka 15aad

Ruqsaddihii iyo oggolaanshihii horey loo bixiyey

Dhammaan rukhsadaha, liisannada, oggolaanshaha, ama dokumentigii ku saabsan Seeraha, Cawska Xoolaha, Geedaha, Beelaha iyo kuwii la bixiyey sharcigan hortii, ee aan sharcigan waafaqsaneyn, qofka ruqsadaha haysta, waa inuu weydiistaa Wakaaladda in ruqsadihiisa loo waafijiyo sida ku qoran Sharcigan muddo iix bilood dhexdiisa.

Qodobka 16aad

Xeer Nidaamiye

Madaxweynaha J.D.S. isagoo tixgelinayo talada Wasiirka wuxuu soo saari karaa Xeer nidaamiye lagu faahfaahinayo laguna fulinaayo sharcigan.

Qodobka 17aad

Dhaqan gelid

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda wuxuuna dhaqan gelayaa 15 maalmood ka dib markii lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 4 Febraayo, 1979

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Sax. S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Law No. 3 4th Feb. 79 Decrees this act as range Devlopment and Management act

President of S.D.R.

HAVING SEEN : The 1, 2 and 3 Decree of the Rvolutin.

HAVING SEEN : Law No. 17, 18 and 19 of 1 July 1976.

HAVING SEEN : Law No. 15 of 25 January 1969 and Law No. 68 of 20 October 1970 concerning Forestry and Wildlife.

HAVING SEEN : the Law No. 23 of 16 August 1976 concerning the creation of the National Range Agency.

CONSIDERING : the Policy and Programme of the Party concerning the conservation and development of the range-land.

REALIZING : that it is indispensable to provide an Act the conservation, development and management of the range-land and fight against desertification.

CONSIDERING : the opinion of the Minister of Livestock. Forestry and Range.

CONSIDERING : the decision of the Political Bureau and the Council of Ministers.

Article 1

Interpretation

MINISTER : Means the Minister of Ministry of Livestock, Forestry and Range.

AGENCY : Means the National Range Agency.

GENERAL MANAGER : Means the General Manager of National Range Agency.

COOPERATIVES : Means Range and Livestock Cooperatives

RANGE & LIVESTOCK ASSOCIATION : Means the Assiation chosen from the community to deal with the conservation and development of the range and livestock.

ANIMALS : Means cattle, sheep, goats, camels, donkeys, horses and wildgame.

Article 2

1. The Minister, in consultation with the General Manager,

the Regional and district staff, could declare any area. in the Somali Democratic Republic as Range Development Area.

2. The Minister may on the advice of the General Manager or his representative alter the boundary of the development area.

Article 3

Reserves

1. The Minister on the advice of the General Manager and in consultation with Regional Authority can declare any area in the Country as a grazing reserve.

2. The Reserve so declared could be:

a) Seasonal Grazing Reserve - which is a reserve that closed and opened for specific periods each year.

b) Rotational Grazing Reserves - this arca grazed on rotation basis.

c) Famine Reserve - which is reserve any area for s long period and opened only in time of hardship.

d) Absilute Reserve - which is an area clossed permanently for flora and fauna study.

3. All reserves or exclosures shall have all its boundaries properly identified and demarcated.

4. Closing and opening of any such area shall only be on the written permission of the General Manager or his delegate on the advice of the Regional Range Director and the Regional authority.

5. a) The General Manager or his representative, in consultation with the Regional Secretary of the Party or district Secretary of the Party, may create Range and Livestock Association for cach reserve.

b) The General Manager is satisfied that an association so established is not performing its function or duty conferred on it by this act may give an order to remove such association.

Article 4

RANGELAND CONSERVATION

1. At any time the Agency considers the Management of a certain Land with the intention of soil conservation, erosion co-

ntrol or revegetation has the power to abolish and control with the consultation of Ministry of Livestock, forestry and Range.

a) Agricultural Sites.

b) Cultivated or bush cleared areas.

c) Areas where fire is used for management or areas where vegetation is cut.

d) Areas used dams, wells and Reservoirs and Rivers.

e) Watershed and Reserved areas.

2. When ever there is necessity for any area to be reserved except areas with buildings, houses and shops. The Agency with the consultation of the district and regional Party Committe can establish a decree.

3. For the sound management of the Rangelands and proper utilization of water the Agency can take the following steps

a) Protection and control of : River banks, valleys, Rivers, Wells, Dams, Barkads, and Reservoirs.

b) Prevention and control of soil erosion.

c) Development of indigenous forage growing in Democratic Republic of Somalia and to bring exotic fodder beneficial to Livestock.

d) Establishment of fodder production Farms where suitable.

e) Formation of fodder Bank.

f) Establishment of livestock and cooperative Ranchs.

g) Land Survey.

h) Conduct Census of Nomads and livestock.

4. Every Range officer has the right to enter any range site except settlements;

a) In order to ascertain the necessary steps required, concerning improvement of forage and Fodder Bank.

b) To ascertain that the land is used according to the Management plan and in conformity with the Articles of this Law.

Article 5

COOPERATIVE RANCHES

1. The Agency considering the need for cooperative ranches is empowered to stablish Cooperative ranches wherever

possible after the acceptance of Regional and District Party Committee.

2. The Agency after Para 1 should carry the necessary survey work and management of the cooperative to ensure it has proper management plan.

3. The Agency having completed the survey and accepted the suitability of the area for ranch development should summon a meeting for all members to consider and approve ;

Article 4 (Contd)

a) Description of the ranch and boundaries ;

b) Resumption of proposed water rights ;

c) Description of any works for rehabilitation, development, conservation and improvement.

d An estimate of authorized livestock units for proposed rangeland ;

e) An estimate of the number of prospective members and of existing stock units of the members.

4. At the meeting the member should elect the Ruling Committee of the Cooperaiive comprising of five membres to include the representative of the Agency.

5. All proposals submitted to the meeting shall be approved by not less 60% of the members.

6. The Representative of the Agency has the Authority to specify the livestock numbers to be used in the Cooperative based on the carrying capacity of the ranch.

7. The Agency thereafter should register the Cooperative Ranch officially.

8. All Registered Cooperative Ranch shall then make its by - law as proposed by the Agency.

9. Allocation of land uder this act shall be used for sole use of the purpose it has created and shall not be revoked save on the ground that the members disintegrate completely after whic the area is taken over by the Government and turned into State - owned ranch.

10. The elected body for the Cooperative ranch shall manage, and control its land for its benefit and shall develop the natural resources of the ranch area in accordance with the plan and policy set for it by the Agency.

11. In addition to the functions mentioned above, the elected body of the Cooperative sall have the power to :

a) The establishment of the members and their animals in the area;

b) To sell, buy animals, agricultural equipments and other requirements as it may consider desirable for the benefit of its members.

12. The elected members may with the approval of the Agency and Regional authorities;

a) Amalgamate one cooperative with another or others to form a larger one;

b) Divide into two or more smaller cooperatives.

13. Cooperative ranches comprise the following types :

a) Cooperative for the nomadic people;

b) Cooperative for town and village communities;

c) Cooperative for livestock traders.

14. A cooperative ranch shall be 25 families minimum. A Family comprises the father, mother and eight children under the age of 18 years.

Article 6

GOVERNMENT ASSISTANCE

1. The Government shall provide to the Cooperative ranchers all assistance as specified under the General Cooperative Law No. 4 of October 4, 1973.

Article 7

ESTABLISHMENT OF STATE OWNED RANCHES AND FODDER CROP FARMS

1. Having heard the opinion of the Agency, the Minister may authorize the establishment of this ranch in :

a) Any area not in use at present particularly the tsetse fly areas of the country;

b) Any area without entitlement or right to individual, or cooperative ranch, or mining rights;

c) Any area which is rehabilitated through soil and water conservation measures and grown with fodder crops.

2. Having heard the opinion of the Agency, the Minister may authorize the establishment :

a) Fodder crop and nurseries where ever possible not owned by individuals cooperative ranch or Mining rights.

b) Areas for research and training purposes.

3. The above decisions will be consulted with the Regional Party Secretary.

Article 8
WATER DEVELOPMENT

1. It has been seen that uncontrolled development of water could seriously cause damage to the rangeland through encouragement of livestock. It has deemed necessary for the Agency to control the development of water harvesting system known as «Berkads» Balliyo, Waro and Wells.

2. On coming into force the water development Agency shall seek advice from the Agency as to the location of the water points of wells, reservoirs, etc. This only applies to the rural water development and on no account affects the urban water supply.

3. All water harvesting system (Berkas, Balli and War, etc.) must receive a licence to that effect. The Agency has the power to dissolve any berkas system, which is causing the destruction of the rangeland, after the acceptance of the Regional and district party Committes.

4. The issuing of any permit should depend on the location of water harvesting system, the distance of one water point from the next which should not be less than 30 Kms. otherwise it would be within range development areas.

5. Berka cluster in one area should not exceed 20-25 Kms.

The Minister having heard the opinion of the regional Range Office and Regional authorities and with consultation of the General Manager of the Agency abolish, transfer or close any water harvesting system (Barkad, Reservoir, dams, well) if it is found not to be of interest to the natoin.

Any well to be drilled by the Water Agency in rural areas or any private organ shall obtain the advice and consent of the Agency priror to its action.

Article 9

REGISTRATION OF WATER POINTS

1. All water systems such as Berkada, Reservoirs, wells

shall be registered giving known registration number for each region.

2. Standard systems of registration will be established by the Agency.

3. Registration fees shall be 10/= per water system.

Article 10

ESTABLISHMENT OF RANGE FUND

1. In order to promote the conservation and management and development of the Range resources of the Somali Democratic Republic the Agency must have means to seek funds.

a) This fund may receive contributions from the Government or foreign grants or funds derived from levies and taxes; forest, forest products fodder, game, fines etc.

2. Funds so collected must be kept in accordance with the Financial Law of Government autonomous Agencies.

Article 11

TAXES

1. All water systems such as Berkada, Reservoirs, Wellr,

a) Permit shall be issued to all fodder whether grass or any other fodder plant collected for the ssake of selling of local animals or those for export exemption made to the agriculture crops, charge of permit shall be :

1. 10/= per3 ton . 7 ton lorry.
2. 20/= per 20 ton lorry and above.
3. 00/50 per donkey, horse or camel load.

b) Animals that enter any grazing reserve and whether seasonal, permanent, bi-annual shall be subject to fines at the following rate -:

1.	Camels	—	5/=
2.	Cattle	—	3/50
3.	Sheep/Goats	—	1/50
4.	Donkey/Horses	—	3/50

c) All cooperative ranches registered with the Agency shall pay for registration 50/= and an application should made on Carta di Bollo of Som. Sh. 5/=.

d) License for building cistern tanks (berked) and shall be 50/= every year for its use.

2. The Agency shall sell or dispose of any fodder crop or grasses counterfeited by the court or left behind by the offender and that will be disposed of through public tender. Any amount collected should be deposited in the Agency's Range Fund account.

3. The Minister is authorized to set reasonable fees for restrvoirs, wells, etc. that comes directly under the Agency.

Article 12

1. The Minister or any person authorized by him may grant licence for all or any of the purpose in this law.

2. The Ministser or General Manager or their representative officer may at any time cancel or suspend any licence granted which has reasonable grounds of suspicion infringed or any of the conditions to which the said licence has been granted.

3. Anybody who may alter, extend or cancel any licence, or boundary of ranch has committed an offence under this law.

Article 13

POWER TO SEARCH, SEIZURE.

1. Wardens of forestry, wildlife, police officers or any other authorized officer have the power to inspect, search or arrest any person who committed an offence under this law and must immediately be brought in front of the court.

Article 14

PENALTIES AND FORFEITURES

1. Any person who commits an offence under this law shall be liable to conviction to a prison term of 6 9 months or a fine of 600/ - to 1200.

2. If the offence is made against the research center the penalty shall be 1000/ - to 5000 or an imprisonment of 6 months to one year.

3. Any person who may try to alter or cancel any licence or permit or seek permission to do so, shall be disqualified from holding any licence issued under this law for a period of 4 months or the whole licence withdrawn.

4. If any person falls to remove his property, it then becomes the property of the Government and will be sold a public auction.

Article 15

1. All permits, licences, permissions or other documents of all grazing reserves, fodder crop areas, or cooperatives issued before this Act shall be declared legal but shall be given licence or permits. Any person who so wishes may do within a period of 6 months.

Article 16

1. The President in consultation with the Minister can produce decrees based on this law to implement the objective of the law.

Article 17

1. This Law shall come into force 15 days after its publication in the official bulletin and shall be included in the official compilation of law and decrees.

Mogadisho 4th Fef. 1979

Major-General Mohamed Siyad Barre

President of Somali D. Republic

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 12 ee 26 Dis. 78, Dallacaad Shaqaale..

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969ka.

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lam. yahay 28 biis ee 21.2.76 iyo beddelaadda ka dambaysay.

ISAGOO ARAKAY : Talada uu soo jeediyey Duqa Magaalada Muqdisho kuna soo sheegay warqadda Lam. yahay DH/MG/XQ/590/78 ee 14.12.78, kuna saabsaneyd siin dallacaad shaqaale darajadoodu isugu jirto «A» iyo «B» ee Jagooyin ka haya qaybaha Maamulka D/Hoose ee Xamar, kaddib markii ay la yimaadeen hawlkarnimo iyo dadaal siyaaso ah.

ISAGOO TIXGELINAYA : Talada uu soo jeediyey Duqa Magaalada ee ku saabsaneyd Dallacsiin min hal darajo Jaallayaasha magacyadooda hoos ku qoran yihiin :

WUXUU SOO SAAREY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

In Jaallayaasha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin la siiyo qof kasta dallacaad hal darajo ah, marka laga billaabo 1.1.1979 iyadoo la tixgelinayo hawlkarnimadooda iyo dadaalkooda siyaadada ah.

Qodobka 2aad

Xeerkaan wuxuu dhaqan gelayaa marka laga billaabo 1da Jannaayo 1979ka, waxaana lagu soo saarayaa faafinta rasmiga ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

Muqdisho, 26 Dis. 1978

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA J.D.S.

DUQA MAGAALADA MUQDISHO
Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka lamb. 1 bogga 12
Muqdisho, 11 Jen. 1979
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

MAGAC SADDEXAN MAGAC SADDEXAN	Darajada, Jagada & Mushaharka hore			Jagada & Musha- harka cusub	
1. Xasan Maxamed Sabriye	Garyaqaan	A6	1000/=	A5-1	1120/=
2. Ciise Gacal Cumar	Madax Laan	A6	1060/=	A5	1090/=
3. Xirsi Kheyre Isaaq	» »	A6	1060/=	A5	1090/=
4. Maryan Xasan Khalaf	» Farac	A6	1060/=	A5	1090/=
5. Yuusuf Macallin Abuukar	» Xubin	A5	1120/=	A4	1160/=
6. Yuusuf Ciise Aadan	Madax Laan	A6	1000/=	A5	1090/=
7. Maxamed Axmed Faarax	» »	A6	1060/=	A5	1090/=
8. Ibraahim Jumcaale Janaqow	» Xubin	A7	920/=	A6-2	1060/=
9. Axmed Maxamed Macow	» »	A7	920/=	A6	1000/=
10. Maxamuud Maxamed Cusmaan	» Farac	A8	720/=	A7	800/=
11. Sheekhdoon Sheeqow Geedi	Agaasime KMG	A7	800/=	A6-2	1060/=
12. Cali Maxamuud Barkhadle	» »	A7	800/=	A6-2	1060/=
13. Aamina Cabdi Maxaad	» Farac	A7	800/=	A6	1000/=
14. Ciise Kiriish Tifow	» Xubin	F2	860/=	F1-1	1030/=
15. Axmed Maxamed Maxamuud	» »	B2	800/=	B1	1000/=

16. Sheekh Shariif Maxamed	»	Laan	F2	800/=	F1	1000/=
17. Maxamed Abuukar Maxamed	»	Farac	F2	800/=	F1-2	1060/=
18. Xaashi Maxamed Ayaanle	»	Laan	B2	860/=	B1-2	1060/=
19. Cumar Cusmaan Aadan	»	»	F2	800/=	F1	1000/=
20. Cabdullaahi Maxamed Cumar	»	»	B2	690/=	B1-1	1030/=
21. Nuur Maxamed Cumar	»	Xubin	B3	600/=	B2-1	830/=
22. Axmed Sheekh Cali	»	»	B3	720/=	B2-1	830/=
23. Maxamed Muumin Xasan	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
24. Xuseen Cali Xayle	»	Laan	B3	720/=	B2-1	830/=
25. Cabdi Axmed Siyaad	»	»	B3	600/=	B2	800/=
26. Saalax Axmed Cawad	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
27. Maxamuud Cabdi Cusmaan	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
28. Axmed Cali Warsame	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
29. Daahir Faarax Xirsi	»	»	B3	690/=	B2	800/=
30. Cabdulqaadir Cali Caddow	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
31. Aadan Maxamed Xaaji	»	»	B3	720/=	B2-1	830/=
32. Cali Kulmiye Siyaad	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
33. Aadan Sheekh Cali	»	»	B3	720/=	B2-1	830/=

34. Cabdulqaadir Abshir Maxamed	»	»	B3	660/=	B2-1	830/=
35. Cali Xasan Qaboobe	»	»	B3	600/=	B2-1	830/=
36. Shariif Axmed Maxamed	»	»	B3	660/=	B2-1	830/=
37. Maxamed Cali Nuur	»	Farac	B3	600/=	B2	830/=
38. Maxamed Axmed Cali	»	»	B3	660/=	B2-1	830/=
39. Saciida Cali Barre	Sarkaal		B3	600/=	B2-1	830/=
40. Maxamed Xuseen Yalax	»		F3	600/=	F2-1	800/=
41. Cabdi Maxamed Faarax	»		B4	450/=	B2-3	690/=
42. Xasan Cali Cusmaan	Madax	Farac	B4	510/=	B3-3	690/=
43. Cabdi Sheekh Maxamuud	»	Xubin	B3	660/=	B2-3	890/=
44. Maxamed Cabdi Maxamed	»	»	B4	450/=	B3	600/=
45. Cusmaan Xasan Diirshe	»	»	B4	510/=	B3-1	630/=
46. Maxamed Sheegow Maxamed	»	Laan	B4	510/=	B3-3	690/=
47. Bashiir Xaashi Barre	»	»	B4	510/=	B3-1	630/=
48. Cali Cusmaan Maxamed	»	»	B4	450/=	B3-2	660/=
49. Ibraahim Cali Qaasim	»	Farac	B3	660/=	B2	800/=
50. Cali Cabdullaahi Sheekh	»	»	B4	510/=	B3-2	660/=
51. Maxamed Cumar Maxaad	Madax	Farac	B4	450/=	B3-3	690/=

52. Faaduma Maxamed Cabdi	»	»	B4	450/=	B3.2	660/=
53. Qaasim Maxamed Xaaji Cumar	»	»	B4	510/=	B3-1	630/=
54. Cabdullaahi Max'ed Maxamuud	»	»	B4	450/=	B3-1	630/=
55. Maxamuud Xasan Ibraahim	»	»	B4	450/=	B3.1	630/=
56. Yuusuf Xaaji Cali Maxamed	»	»	B4	450/=	B3	600/=
57. Cabdulqaadir Ibraahim Gacal	Sarkaal Fuliye		B4	510/=	B3	600/=
58. Raxme Mardaadi Sh. Abuukar	»	»	B4	450/=	B3	600/=
59. Faaduma Maxamed Macallin	Kayd Gade		B4	450/=	B3	600/=
60. Maxamuud Xasan Maxamed	Xisaabiye		B3	660/=	B2	800/=
61. Maxamuud Yuusuf Xasan	»	»	B4	450/=	B3	600/=
62. Maxamed Siid Cali	»	»	B4	450/=	B3	600/=
63. Jawaahir Cali Nuur	Kayd Gade		B4	450/=	B3-1	630/=
64. Nadiifo Cali Cabdullaahi	»	»	B4	450/=	B3-1	630/=
65. Cabdullaahi Maxamed Maye	Xisaabiye		B4	450/=	B3	600/=
66. Mursal Maxamed Cabdullaahi	Khasnaji		B4	450/=	B3	600/=
67. Xaliimo Hiloowle Maxamed	Sarkaal Fuliye		B4	450/=	B3	600/=
68. Muqtaar Xasan Cabdi	Xisaabiye		B4	450/=	B3	600/=

69. Cabdullaahi Bashiir Sheekh	Khasnaji	B4	450/=	B3	600/=
70. Sheekh Aadan Max'ed Cusmaan	Sarkaal Fuliye	B4	450/=	B3	600/=
71. Xaawo Cabdulqaadir Cali	Sarkaal Fuliye	B4	450/=	B3	600/=
HADII uu arkay qod. 69 sharciga lmb. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammartamento) (Buugga dhigashada), lamb. 1776 oo ku qoran magaca Xasan Faarax Axmed ayna ku jirto Shs. So. 9.400/=

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Laanta 4aad ee H. u beddelo Xasan Faarax Axmed (buugga kaydka), ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kaddib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood, maalinta go'aankan lagu daabaco faafinta rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Demoqraadiga Soomaalida, haddii inta ka horeysa aan is-hortaag laga keenin.

Muqdisho, 28.2.1979

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax.

L. 143 Bis

SHIRKADDA BEER-TACABKA LUUL S.P.A.

SALHDIGGEEDU YAHAY MUQDISHO, HANTIDEEDUNA TAHAY SH. SO. 1.100.000

OGEEYSIIS ISUGU IMAATIN SHIR CAADI AH

Waxaa dhammaan sahmileyda ka tirsan Shirkadda Beer Tacabka Luul S.P.A. la ogeeysiinayaa in maalinta 4ta Juun 1979, saacaddu markii ay tahay 10ka ee gelinka hore, xafiiska Notaayaha Dr. Muuse Xuseen Sadiiq, oo ku yaalla Muqdisho, luuqa waddada Cabdulqaadir Shiikh Sahkaawoddiin, lagu qaban doono fadhiga shirka caadiga ah ee isla shirkaddaas kor ku magacaaban; amase haddii maalintaas ay suuroobi weydo, in shirkaas mar kale loo fadhiisan doono maalinta 11ka Juun 1979, isla meeshaas iyo isla saacaddaas kor lagu soo sheegay. Arrimaha shirkaas laga doodi doono, waa kuwa hoos ku kala tilmaaman.

1) Miisaaniyadda ee sannadka 1978,
2) Magacaabidda Guddoomiyaha cusub ee Guddiga Baarista Xisaabaadka Shirkaddaas;
3) Gunnada la siinayo Maamulaha kali ah ee shirkadda;
4) Arrin kasta ee kale oo fadhiga la keeno.

Shirkaas waxaa ka qayb gali karaan sahmileyda oo muddo ugu yeraan shan maalmood ka hor maalinta shirka loo cayinay; ay sahmiyaddoodu soo dhigeen Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed — Saldhigga Dhexe ee Muqdisho.

Sahmileyda waxaa la baryahayaa in ay yimaaddaan shirkaas; ayna dhowraan saacadda fadhiga loo qabtay.

MAAMULAHA KELI AH EE SHIRKADDA

PICCO VITTORE

SOCIETA' ROMANA IN SOMALI — S. P. A.

Saldhigga: Kismaayo (Jamhuuriyadda D. Soomaaliya)

Raasumaal Shs. So. 2.000.000.

OGEEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Romana in Somalia S. P. A. — waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano (Svizzera) waddada Elvetia, Lamb 10, maalinta 20ka Juunyo 1979 saacadda 11ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 27ka Juunyo 1979 isla saacadda iyo isla moosha sida kor ku qoran, sii go'aan looga gaaro arrimaha soo socda:

BARNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;
2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31/12/78 iyo go,aannada la xarriira.

Waxa xaq u leh in ay shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubnaha shirkadda ilaa shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigan sahmiyaashooda Saldhigga Shirkadda oo Kismaayo, amase Xafiiska Societa Agricola Somala, ku yaal Itaaliya, Piazza degli Affari, 3, Milano, amase :

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetie, 10, Lugano;

— Credito Italiano, Sede di Milano, Italia.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA, ROMANA IN SOMALIA — S. P. A. —

Sede sociale : Kisimaio — Repubblica Democr. Somala Capitale socaile Shs. so. 2.000.000,

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Societa Romana in Somalia, S.P.A, sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Svizzera, Corso Elvetia no 10, il giprno 20 Giugno 1979, alle ore 11, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 27 Giugno 1979, nello stesso luogo ed alla stessa ora, per discutere e deliberare sul seguente :

ORDIND DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e conto Perdite e Profitti dell' esercizio chiuso al 31 dicembre 1978 e deliberazioni relative.

AVRANNO diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l'Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la sede sociale in Kisimaio o presso gli Uffici di Recapito della Società Agricola Italo Somala in Italia, Piazza degli Affari 3, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, corso Elvetia n 10, Lugano;

— Credito Italiano, sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 146

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALA — S. A. I. S. — S. P. A

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya)

Raasumaal Shs. So 1.200.000, 00

OGEEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH

Sahmiqabayaasha Sharikadda Società Agricola Italo Somamala — S. A. I. S. — S. P. A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano (Svizzera) waddada Elvetia, lamb. 10, maalinta 20ka Juunyo 1979 saacadda 9ka subaxnimo fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura geliwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doonaa maalinta 27ka Juunyo 1979 isla saacadda kor ku qoran, si go'aan looga gaaro arrimaha soo socda.

BARNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Miisaanniyadda iyo Kharajka iyo Dakhliga ilaa 31da Diseembar 1978 iyo go'aannada la xarriira.

Waxaa xaq uu leh in ay shirkadda ka soo qayb galaan, sahmi qabayaasha ku qoran buugga xubaaha Sharikadda shan maalmood ka hor maalinta fadhiga la qaban doono, oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda Saldhigga Sharikadda oo Muqdisho, amase Xafiiska Sahrikadda ku taal Itaaliya, Piazza degli Affari, Lamb. 3, Milano, amase:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetia, Lamb. 10 (Lugano;

— Credito Italiano, Sede di Milano, Italia.

GUDDIGA MAAMULKA

SOCIETA' AGRICOLA ITALO SOMALI — S. A. I. S. — S. P. A.
Sede sociale: MOGADISCIO — Republica Democr. Somala Capitale sociale inter. versato Shs. So. 1.200.000.

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Agricola Italo Somala S.A.I.S. — S.P.A. —, sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Svizzera, Corso Elvetia n° 10, il giorno 20 giugno 1979, alle ore 9, in prima convocazione ed, occorrendo, in seconda convocazione il giorno 27 Guiugno 1979 nello stesso luogo ed alla stessa ora per discuteré e deliberare sul seguente;

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e conto Perdite e Profitti dele' esercizio chiuso al 31 dicembre 1978 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli azionisti inscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assembea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società in Italia, Milano, Piazza degli Affari n 3 oppure presso le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetia n° 10; Lugano;

— Credito Italiano, Sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINSTRATIONE

SOCITA' COMMERCIALE ITALO SOMALA — S. C. I. S. —S.P.A

Saldhigga: Muqdisho (J. D. Soomaaliya)

Raasumaal Shs. So 5.000.000.00

Sahmi qabayaasha Sharikadda Società Commerciale Italo Somala — S. C. I. — S. P. A. waxaa la isu yeeray shirka caadiga ah oo lagu qaban doono Lugano, Svizzera, waddada Elvetia, Lamb. 10, maalinta 20ka Juunyo 1979 saacaddu markeey tahay 14, fadhiga ugu horreeya, haddii taas suura galiwaayo, waxaa mar labaad la isu imaan doona maalinta 27ka Juunyo 1979 isla saacadda kor ku qoran, si go'aan looga gaaroarrimaha soo socda:

BARNNAAMIJKA DOODA

1) Warbixinta Guddiga Maamulka iyo Guddiga Baarista;

2) Miisaaniyadda iyo Dheef-Deynta la xiray 31.12.1978 iyo go'aannada la xarriira.

Waxaa xaq uu leh in ay shirkadda ka soo qayb galaan sahmi qabayaaska ku qoran buugga xubnaha Sharikadda ilaa shan maalmood ka kor maalinta fadhiga la qaban doono oo na ilaa waqtigaas dhigaan sahmiyaashooda saldhigga Sharikadda ee Muqdisho, amase Xafiiska Sharikadda Società Agricola Italo Somala ay ku leedahay Milano, Miazza degli Affari, 3 amase:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetia, Lamb. 10, Lugano;

— Credito Italiano, Sede di Milano.

GUDDIGA MAAMULKA

L. 149

SOCIET'A COMMERCIALE ITALO SOMALA — S.C.I.S. —S.P.A. Sede legale: Mogadiscio (Repubblic Democr. Somala) Capitale sociale inter. versato Shs. So. 5.000.000.

AVVISO DI CONVOCAZIONE DI ASSEMBLEA ORDINARIA

Gli Azionisti della Società Commerciale Italo Somala — S. C. I. S. —S. P. A. sono convocati in Assemblea Ordinaria in Lugano, Corso Elvetia n 10 il giorno 20 Giugno 1979, alle ore 14 in prima convocazione ed, in seconda convocazione il giorno 27 Giugno 1979 alla stessa ora e nello stesso luogo per discutere e deliberare sul seguente:

ORDINE DEL GIORNO

1) Relazione del Consiglio di Amministrazione e Rapporto del Collegio Sindacale;

2) Bilancio e conto Perdite e Profitti dell' esercizio chiuso al 31 dicembre 1978 e deliberazioni relative.

Avranno diritto di partecipare all' Assemblea gli Azionisti iscritti nel Libro dei Soci almeno cinque giorni prima di quello fissato per l' Assemblea o che entro tale termine abbiano effettuato il deposito delle azioni presso la Sede sociale in Mogadiscio o presso gli Uffici di Recapito della Società Agricola Italo Somala in Italia, Piazza degli affari n 3, Milano, oppure presso le seguenti casse:

— Banco di Roma per la Svizzera Italiana, Lugano;

— Lemanik, Corso Elvetia n 10. Lugano;

— Credito Italiano, Sede di Milano.

IL CONSIGLIO DI AMMINISTRAZIONE

L. 150

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho, 1 Maarso 1979 L. 3

Laamta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudaheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaye. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 5 ee 19 Feb. 19, Mashruuca Harumarinta Beeraha :- Boga 180

SHARCI L. 6 ee 19 Feb. 79, Dhismaha Machadka Teknolojiyada Soomaaliyeed :- » 187

SHARCI L. 7 ee 19 Feb. 79, Billadaha Maamuuska Milleteriga :- » 194

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER WASAARADDA H. GUUD L. 17 ee 1 Feb. 79, Qaadid Guryo Dan Guud awgeed ee waqti hore u lahaa Shariif Saalax Xasan Cumar oo ay la wareegtay Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed kuna yaal Muqdisho Degmada Shingaani :- » 200

XEER WASAARADDA B. IYO IS. L. 18 ee 5 Feb. 79, Xeer Nidaamiye Farsama yaqaannada Isgaarsiinta loo carbinaayo dhammaan Waaxyaha » 202

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

MAXKAMADDA GOBOLKA HARGEYSA, 29.1.79, Lumid Jeeg W. L. 116453 ku qoran Shs. 41.000 uu leeyahay L/Xiddigle Maxamed Cilmi Faarax L. 151

» 227

Shineemo «Hodon S.P.A. 28.2.79, Ogeeysiis Isuimaatin Caadi ah

» 228

SOMALI BOTTLING COMPANY DIGNIIN ISKU YEERID AH L.152 BIS

SAXID QALAD

FAAFINTA RASMIGA AH ee Lamb. yahay 1r 10 ee 25 Oktoober 78, Bog. 674 ku qoran Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Yuusuf L. 576, waa in loo akhriyaa sida hoos ku qoran;

WASAARADDA HAWLAHA GUUD, 9 Luulyo 78, Naado Dhul Jaalle Cabdi Xaaji Maxamed Yuusuf (Goobdoon)

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 5 ee 19 Feb. 1979 Mashruuca horumarinta Beeraha
ISAGOO ARKAY: Xaashida 1aad iyo tan 2aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;
ISAGOO ARKAY Heshiiska Lamb 635/50 Taariikhdiisuna 7.7.76 ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Bangiga Adduunka (IDA)
Adduunka (IDA) kuna saabsan amaah lacageed oo loogu tala galay horumarinta Beeraha G. W. Galbeed.

ISAGOO AQOONSADAY: Inay tahay lagama maarmaan in la dhiso hay'ada madaxbannaan oo ka mas'uul ah fulinta howlaha la xiriira heshiiska xusan.
ISAGOO TIXGELINAYA Go'aanka Guddiga Siyaasadda ee X. H. K. S. iyo kan Golaha Wasiiradda.
Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda

qod 1aad

DHISMAHA MASHRUUCA

1) Mahhruuca horumarinta Beeraha ee Gobolka waqooyi Galbeed oo iminka wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono «Mashruuca» ayaa halkan lagu dhisay.

2) Mashruuca wuxuu yahay mid madax banaan oo awood iyo jirid qaanuuni ah leh, wuxuu la mid yahay Wakaaladaha ama Mashaariicdda heerkoodu yahay (A).

Qodobka 2aad

Ujeeddooyinka Mashruuca

Ujeeddooyinka Mashruuca waxay yihiin:.

1) Horumarinta Guud ee tacabka beeraha G. W. Galbeed

2) Ka horteggidda iyo ciribtirka dhibaatooyinka nabaddguurka dhulka beeraha.

3) Horumarinta waraabinta beeraha Gobolka W/Galbeed iyo hawlaha la xiriira.

4) Fidinta aqoonta beeraha iyo tababarka beeraleyda Gobolka

5) Tababaridda iyo kor u qaadidda aqoonta iyo waayo-aragnimada shaqaalaha beeraha ee Gobolka.

Godobka 3aad
Xarunta Mashruuca

Xarunta Mashruuca waxay ahaan doontaa Hargeysa oo ah

Qodobka 4aad

Awoodda

Mashruuca wuxuu leeyahay awood uu ku fulin karo ujeeddooyinka ku xusan qodobka 2aad ee Sharcigan.

Qodobka 5aad

Xubnaha Mashruuca

Xubnaha Mashruuca waxay ka kooban yihiin:-

1) Guddiga Sare

2) Maareyn Guud

3) Guddiga Fulinta

4) Waaxyo iyo xubno kala duwan oo lagu fuliyo ujeeddooyinka sharcigan ku tilmaaman.

Mashruuca wuxuu kaloo yeelanayaa xubin madax-bannaan oo lagu magacaabi doono xubnita Qorsheynta iyo Daraasaadka oo qaban doonta howlaha la xiriira Qorshaha iyo daraasaadka.

Qodobka 6aad

Guddiga Sare

1) Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:-

a) Wahiirka Beeraha (Guddoomiye)

b) Wasiirka Maaliyadda (Xubin)

c) Guddoomiyaha Bankiga Horumarinta (Xubin)

d) Maareeyaha Guud ee Mashruuca (Xoghaya)

2) Hawlaha Guddiga Sare ee Mashruuca:-

a) Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu ka mas'uul yahay dejinta Siyaasadda Guud eeMashruuca lagu maamulo. Wuxuu had iyo jeer go'aanno ka gaari doonaa sifaalaha lagu maamulaayo hawlaha la xiriira Mashruuca isagoo tixgelinaya ujeeddooyinka guud ee Mashruuca iyo talada Maareeyaha Guud.

Wuxuu talo ka bixinayaa Magacaabidda Madaxda Mashruuca.

b) Guddiga wuxuu leeyahay awood kormeer joogta ah

Godobka 7aad

Guddiga Fulinta

1) Guddiga Fulinta wuxuu ka kooban yahay

a) Maareeyaha Guud ee Mashruuca (Guddoomiye)

b) Agaahimaha Waaxda dhaqaaleynta Ciidda iyo Biyaha (Xubin)

c) Agaasimaha Waaxda Fidinta iyo Horumarinta beeraha Roobka »

d) Agaasimaha waaxda Maamulka »

e) Agaasimaha waaxda khudrada »

f) Khabiirka Farsamada Qalabka »

2) Xubnaha Guddiga Fulinta ee kor ku xusan marka laga reebo Maareeyaha Guud yaxay ka koobnaan doonaan koox khubaro ah oo ka caawinidoona Maareeyaha Guud Fulinta Howlaha Mashruuca.

Khubarada waxay ku wareejindoonaan Xilka Aqoonyahanada iyo Farsamayaqaanada Soomaalida ee Mashruuca hadba sida looga maarmo.

3) Hawlaha Guddiga Fulinta

Guddiga Fulinta wuxuu si wadajir ah mas'uul uga yahay fulinta ujeeddooyinka guud mashruuca ee ku xusanqodobka 2aad ee Sharcigan iyadoo islamarkaasna xubin kasta ay si toos ah mas'uul uga tahay hawlaha u gaarka ah.

4) Guddigu wuxuu talo iyo warbixinba ka bixinayaa sida ay u socdaan hawlaha Mashruuca iyo miisaaniyadda isagoo u gudbinayaa Guddiga Sare ee Mashruuca.

Qodobka 8aad

Fadhiyadda Guddiga Sare ee Mashruuca

Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu yeelan doonaa ugu yaraan (2) laba fadhi sanad kasta ama hadba sida loogu baadho. Fadhiyadda Guddiga Sare ee Mashruuca waxa isugu yeeraya Xoghayahana ka ah Maareeyaha Guud ee Mashruuca.

Waxa kaloo fadhiyadaasi isugu-yeeri kara Wasiirka Beera-

Qodobka 9aad

Fadhiyadda Guddiga Fulinta

Guddiga Fulinta wuxuu yeelandoonaa ugu yaraan 1 (hal) fadhi bishii ama hadba sida loogu baahdo. Fadhiyadda Guddiga Fulinta waxaa isugu yeeraya Maareeyaha Guud ee Mashruuca.

Qodobka 10aad

Hawlaha Maareeyaha Guud

Maareeyaha Guud ee Mashruuca wuxuu ahaan doonaa Guddoomiyaha Guddiga Fulinta (PIU), wuxuuna ka mas'uul yahay Maamulka Guud iyo fulinta ujeeddooyinka Mashruuca, qoridda, asluubta iyo daryeelka shaqaalaha, maamulka lacagta, la talinta Guddiga sare ee Mashruuca iyo saxiixa heshiisyada Mashruuca dhan ka yahay isagoo la socodsiinyaaa Guddiga Sare ee Mashruuca iyo kuwa Guddiga fulinta.

Qodobka 11aad

Magacaabidda Xubnaha Mashruuca

Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxa lagu magacaabi karaa xeer uu saxiixo Madaxweynaha J. D. S. isagoo tixgelinayaa ra'yiga Guddiga Sare ee Mashruuca.

Qodobka 12aad

Xuquuqda Dhaqaalaha

Xuquuqda Dhaqaalaha ee Maareeyaha Guud iyo Madaxda kale ee Soomaalida waxaa xukumi doona sharciga lamb. 36. ee 22kii Abriile, 1972 iyo Xeerarka lambar M.G.S.K. Lamb 74 ee 22kii Abriile 1972.

Qodobka 13aad

Shaqaalaha

1) «Mashruuca» wuxuu qoran karaa Shaqaalaha uu u baahan yahay iyadoo la raacayo Sharciyadda shaqa qoridda. Islamarkaas Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu qorto khubarada Ajnabiga ah ee uu u baahan yahay isagoo raacayaa sharciydda dalka sitana ogolaashaha Guddiga Sare

2) Shuruudaha Shaqada ee Shaqaalaha Mashruuca waxaa xukumaya sharcigan iyo qawaaniinta faahfaahsan Regulation) ee Sharcigan la xidhiidha, iyo sharciyada ku xusan qodobka 12 ee Sahrcigan.

Qodobka14 aad

Raasumaalka Mashruuca

Raasumaalka Mashruuca wuxuu ka kooban yahay:.

1) Lacagta dakhliga ee ka imaaneysa IDA, Dawladda J.D.S iyo beeraleeyda Gobolka oo guud ahaan isku-dhan 13,930,000 oo Doollarka Mareeykana ah ama So. Sh. 87.062.500

2) Wixii lacag ah oo ka soo gala hawsha Mashruucu qabto

3) Wixii hanti ah ee Dawladda iy Ururrada Caalamiga ahi ugu deeqaan «Mashruuca»

4) Wixii lacag ah ee Mashruuca Dibedda kaga yimaada amase Waddanka Gudihiisa.

5) Wixii lacag kayd ah «Reserve Fund» ee sanad kasta u dhigma «Mashruuca»

6) Wixii hanti ah oo degdeg amase si kale ku soo gala «Mashruuca».

Qodobk 15aad

Miisaaniyadda Mashruuca

Maareeyaha Guud marka ay tahay 30ka Seteember ama inta ka horeysa sanad kasta waa inuu isku dubaridaa miisaaniyadda sanadka maaliyadda soo gelaya isagoo faahfaahinaya kuna muujinaya bandhigga miisaaniyadda lacagta soo geli doonta iyo tan ka bixi doonta wuxuu hordhigi doonaa si loo ogolaado Guddiga sare ee Mashruuca kadib marka uu la tashado Guddiga Fulinta.

Qodobka 16aad

Xisaabdka sanadka

1) Maareeyaha Guud marka ay tahay 31ka Maarso ama inta ka horeeysa sanadkasta waa inuu diyaariyo, iskuna soo dubaridda xisaabaadka sanadka iyo bandhigiggii macaashka iyo kharashka Mashruuca ee sanadkii maaliyadda ee horee, is-

lamarkaasna u gudbiya Guddiga Sare ee Mashruuca kaddib marka uu la tashado Guddiga Fulinta.

2) Guddiga Saree ee Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu oggolaado ama wax ka beddelo xisaabaadka sanadka wuxuuna amar ku bixin karaa in lagu qoro faafinta Rasmiga ah ee Dawladda iyadoo kharashka uu bixinayo «Mashruuca».

Qodobka 17aad

Amaahda

«Mashruuca» isagoo haysta guddoonka Guddiga Sare ee Mashruuca wuxuu awood u leeyahay inuu ka amaahdo lacag xarumaha lacagta (Financial Institutions) ee Dalka iyo Dibedda si uu u hirgeliyo xilka la saaray ama ujeeddooyinka «Mashruuca» iyadoo la tixgelinayo raasamaalka Mashruuca oo la filayo in lagu bixiyo amaahdaas.

Qodbka 18aad

Baadhidda Xisaabaadka

Xisaabaadka «Mashruuca» waxaa baahi doona Hantidhowrka Guud.

Qodobka 19aad

Maamulka Lacagta

Maamulka Lacagta ee Mashruuca waxa xukumaya laguna maamulayaa habka ay tilmaamayaan sharciyada Dawladda iyo qawaaniinta faahfaahsan ee la xidhiidha.

Qodobka 20aad

Guddoominta Qawaaniinta Faahfaahsan

Madaxweynaha J.D.S. wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaya talada «Guddiga Sare ee Mashruuca» inuu soosaaro xeer faahfaahsan oo tilmaamaya habka hirgelinta qodobadda sharcigan.

Qodobka 21aad

Heeshiiska

Heshiiska lam. 635/50 ee 7dii Luulyo, 1976kii ee ka dhexeeya J.D.S. iyo Baanka Adduunka (IDA) waa midka ku lifaaqan

sharcigan wuxuuna ka mid yahay isla sharcigan :-

Heshiiskaas waxaa loo beddeli karaa qodobaddiisa hadba sida lɛ.bada dhinac oo u khuseeyo isla gartaan.

Qodobka 22aad

Dhaqanka Gelid

1) Sharcigan wuxuu dhaqan galay 1dii Jannaayo, 1978.

2) Sharcigani wuxuu ka mid noqon doonaa sharciyada rasmiga ah iyo xeerarka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo qori doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, Jannaayo 1978

S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA J.D.S.

SHARCI L. 6 ee 19 Feeb. 79 Dhismaha Machadka Teknoloji-yada Soomaaliyeed

MADAXWEYNAHA J. D. S.

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee ka-caanka 21/10/1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciyada L. 17,18 iyo 19 ee soo baxeen 1 Luulyo 1976 kuna saabsanaayeen Maamulka Guud ee Dawladda oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaan-ka Soomaaliyeed.

ISAGOO AQOONSADAY : In Farsamada Teknolojiyada Cas-riga ah asaas u tahay horumarinta Dalka baahi weyne u qbto Ummadda Soomaaliyeed lagama maarmaan noqotay in la dhiso hayad u gaar madax banaan si ay farsama-da teknolojiyada casriga ah ugu gaadato qayb wacan horu-marinta Dalka.

ISAGOO TIXGELIYEY : Go'aankii Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga K. Soomaaliyeed.

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCIGA SOO SOCDA

Qod. 1aad

Waxaa sharcigan lagu dhisay Machadka Teknolojiyada Soomaaliyeed oo ah Hay'ad Madax Banaan, lehna muuqaal sharci, waxaana loo aqoonsan doonaa hadda kadib «MACHAD».

Qod. 2aad

Machadka wuxuu u hogaansami doonaa sharcigan, xeerar-ka la xiriira, sharciyada iyo xeerarka Wakaaladaha Madax Ba-naan xagga maamulka xagga nidaamka shaqada waxay la mid tahay Machadyada Cilmiga ee Dalka ka dhisan :-

Qod. 3aad

Xarunta Machadka waa magaalo madaxda Muqdisho, haddii loo baahdo waxay ka furan kartaa Laamo meelaha howlaha ka-ga xiranyihiin dalka gudahiisa ama dibadiisa.-

Qod. 4aad

Machadka wuxuu hoos imaanayaa Madaxtooyada oo kormeer iyo ilaalin guud ku leh..

Machadka waxaa awood loo siiyay in uu shirkoobo Hay'ado waddani ah ama ajnabi ah haddii ay dan ugu jirto Machadka iyo qarankaba.-

Qod. 5aad

Ujeedada iyo howlaha Machadka waa sida soo socota:

b) ujeedooyinka guud ee Machadka:
   i- In farsamada teknolojiyada sare loo qaado lagana faa'iideysto aqoonta casriga ah ee teknolojiyada adduunka:

   ii- In lagu fidiyo farsamada teeknolojiyada aqoonyahan nada Soomaaliyeed si ay uga faa'iideystaan mustaqbalka uuna taabagelayaan waayo aragnimada ay ka helaan;

t) howlaha machadka:

   i- abuurid kaadir farsamayaqaan ah oo ku xeel-dheer farsamada teknolojiyada casriga ah;

   ii- in dadka ka faa'iideysto wax soo saarka teknolojiyada casriga ah dhinac waliba;

   iii- in dibadda loo dhoofiyo wax soo saarka machadka teknolojiyada Soomaaliyeed ka dib marka uu dalka ka haqabeelo;

iv- machadka wuxuu awood u leeyahay oggolaanshaha ama diidmada mashaariicda la xiriirta howlihiisa, ha haadeen kuwo Hay'adaha Dowladda soo qaddimaan ama shaqsiyaad gaar ahaaneed diyaariyaan ama kuwo shisheeye u soo gudbiyaan:

v) kharajka iyo qalab u raadinta Machadka oo howlaheeda iyo ujeedooyinkeeda lagu fuliyo.

Qod 6aad

xubnaha talo goynta ee Machadku waxay ka koobanyihiin;

1) Golaha Hoggaaminta Machadka
2) Golaha Cilmi Baarista Machadka
3) Guddoomiyaha Machadka.

Qod. 7aad

Golaha Hoggaaminta Machadka waxay ka koobanyihiin:

1) Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga Gudoomiye

3) Guddoomiyaha Machadka Xubin

4) Guddoomiyaha Hoggaanka Cilmi Baarista ee W/G. xubin

Qod. 8aad

Howlaha Golaha Hoggaaminta Machadka waa sida soo socoto:

b) Dejinta siyaasadda guud oo howlaha machadka qabanaayo oo koobayso:

i) Geesigelinta iyo xaqiijinta siyaasadda howlaha machadka;

ii) Lacag u raadinta iyo misaaniyada machadka;

t) La socodka howlaha farsamada ee kala duwan ee Hay'adaha Dawladda ay qabtaan;

j) ka dabatagidda iyo hubinta joogtada ah ee hirgelinta barnaamijka machadka fulinaayo;

x) talo ka soo jeedinta magacaabidda Guddoomiyaha Machadka, xeel-dheerayaasha masuul ka ah waaxyaha, farsamoyaqaannada iyo aqoonyahannada iyadoo la tixgelinaayo xeel dheernimadooda, aqoontooda ee xagga teknolojiyada casriga ah.-

kh) oggolaanshada misaaniyadda sanadka ee Machadka.-

Qod. 9aad

1.- Golaha Cilmi Baarista iyo fulinta waxay ka koobanyihiin

1) Guddoomiyaha Machadka Guddoomiye

2) Xeeldheerayaasha masuul ka ah waaxyaha Xubin

3) Farsamoyaqaannada sare iyo aqoonyahannada Sare ee Machadka oo Golaha Hoggaaminta Machadka u doortaan Xubin

2.- Guddoomiyaha wuxuu noqonaayaa masuulka Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta.

3.- Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeerayaa, diyaarinayaa ajendooyinka shirarka kala duwan ee Machadka.-

Qod. 10aad

1) Fulinta siyaasadda iyo barnaamijka guud ee Machadka oo ay soo dejiyaan Golaha Hoggaaminta Mahhadka;

2) Abaabulidda, soo diyaarinta, qaban qaabidda howlaha iyo ujeedooyinka guud ee Machadka ee sharcigan lagu tilmaamay, socodsiintooda iyo hirgeelintooda;

3) Waxay ka masuul yihiin ku dhaqaaqidda iyo fulinta howlaha Machadka guud ahaaneed iyo kan gaar ahaaneed ee sharcigan iyo kan Golaha Hoggaaminta Machadka ay guddoomiyaan.-

Qod. 11aad

1) Gudoomiyaha Machadka, xeeldheerayaasha mahuul ka ah Waaxyaha Machadka, farsamoyaqaannada Sare iyo aqoonyahannada sare ee Machadka waxaa lagu magacaabi doona xeer uu saxiixo Madaxweynaha isagoo tixgelinaaya talo soo jeedinta Golaha Hoggaaminta Machadka ama cidda u xilsaaraan.-

2) Guddoomiyaha Machadka, iyo xeeldheerayaasha mas'uul ka ah Waaxyaha Machadka, waxay jagada hayn karaan muddo laba sano ah iyadoo loo cusbooneysiin karo.-

3) Mushaahrada Guddoomiyaha Machadka iyo xeeldheerayaasha masuul ka ah Waaxyaha Machadka waxaa lagu soo saari doona xeer Madaxweynaha soo saaro ama Xeer nidaamiyaha guud ee sharcigan:-

Qod. 12aad

b) Xilka iyo masuuliyadda Guddoomiyaha Machadka guud ahaan wuxuu la mid yahay kuwo Machadyaha Cilmiga ah, kan Maareeyayaasha Guud iyo Madaxda Hayadaha Madax Banaan; gaar ahaan wuxuu ka masuul yahay:

i) Wuxuu kormeerayaa habsami u fulinta howlaha Mac-

ii) Wuxuu go'aan ka gaaraayaa nidaamka guud ee socdsiinta howlaha machadka gaar ahaan howlaha farsamo-yaqaannada, ganacsiga iyo isku xirka siyaasadda iyo barnaamijka Dawladda ka leedahay Machadka;

t) Guddoomiyuhu wuxuu leeyahay awoodaha soo socda:

i) Wuxuu ugu noqonayaa masuul Guddiga Cilmi Baarista iyo Fulinta ee Machadka si ay u fuliyaan howshooda iyo ujeedooyinka Machadka iyo habsami socodka howshaas isagoo waafijinaayo sharcigan iyo xeerarka la xiriira;

ii) Wuxuu isugu yeerayaa, diaarinayaa, ujeeddooyinka shirarka Golaha Hoggaaminta Machadka iyo Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta ee Machadka,

iii) Wuxuu masalayaa Machadka wixii la xiriira oo dhan ama magacaabaaya ciddi kale oo beddelkiisa masili lahayd haddii Golaha Hoggaaminta Machadka amar diidaaya bixin:-

iv- wuxuu saxiixaayaa magaca Machadka hashiisyada dhinac ka ah Machadka isagoo oggolaansho ka sita Golaha Hoggaaminta Machadka ama Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka.-

v- wuxuu maamulayaa kormeerayaa howlaha cilmi baarista isagoo fulinaaya siyaasadda guud ee Dalka, go'aannada Golaha Hoggaaminta Machadka iyo Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta, wuxuuna lixdii biloodba mar warbixin ku saabsan howlaha Machadka u gudbinaayaa Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka.-

vi) Wuxuu ka qaadanaaya tilaabooyinka arrimaha ku saabsan asluubta Shaqaalaha, maamulka guud, iyo kan la xiriira xubnaha Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta haddii tilaabooyin noocaas ah sharciga, xeerarka iyo nidaamiyada hoose cid kale awoodda siinaynin

Qod. 13aad

Jagooyinka shaqaalaha Machadka waxay yihiin kuwo hoos ku xusan:

1) Guddoomiyaha Machadka (Madax Agaasin Guud)

2) Xeeldheerayaasha masuul ka ah Waaxyaha

2) Farsamoyaqaannada Sare iyo aqoonyahannada Sare

4) Shaqaalaha Caadiga ah oo awood waxbarashada qaa-

Qod. 14aad

1) Mushaaharooyinka iyo gunooyinka shaqaalaha kala duwan ee Machadka waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye oo u saxiixo Madaxweynaha isagoo tixgelinaaya talada Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka;

2) Dallacsiinta shaqaalaha Machadka waxaa oggolaanshaheeda leh Golaha Hoggaaminta Machadka, isagoo tixgelinaaya talada u soo jeediyo Guddoomiyaha Machadka;

3) Darajo ka gaadidda shaqaalaha Machadka iyadoo halkii sanab mar la sameenaayo qiimaynta guud ee Shaqaalaha waxaa guddoominaaya Golaha Hoggaaminta Machadka ama cidi ay u wakiishaan.

Qod 15aad

Howlgabka iyo Liilitirka la xiriira shaqaalaha Machadka waxaa lagu dhaqayaa sharciyada arrimahaas khuseeya oo lagu maamulo shaqaalaha Dwladda.

Qod. 16aad

Maaliyadda daqliga ee Machadka waxay noqonaysaa:

1) Kaalmo joogto ah oo Dawladda u fidiso;

2) Raasumaal oo la gasho sharikadaha Adduunka;

3) Faaidada wax soo saarka ee Machadka.

Qod. 17

Wixii machadku leeyahay waxaa masuul ka ah Guddoomiyaha Machadka isagoo u xilsaari doona kala habaynta iyo habsami u maamulka sarkaal ka madax ah maamulka lacagta.

Lacagtaas waa in lagu keydiyaa Bankiyada Dalka ka furan.

Qod. 18aad

Guddoomiyaha Machadka marka ay tahay 30 Oktoobar ama inta ka horaysa sanad kasta waa inuu isku duba ridaa miisaaniyadda ku saabsan sanadka maaliyadda soo geleyso isagoo faahfaahinaayo kuna muujinaayo lacagta soo geli doonta ama ka bixi doonta Machadka sanadka soo socda.

Wuxuuna soo hordhigayaa Golaha Hoggaaminta Machad-

ka si loo oggolaado ka dib mar ay go'aan ka gaaraan gudbintaas Golaha Cilmi Baarista iyo Fulinta.

Qod. 19aad

Guddoomiyaha Machadka marka ay tahay 31 Maarso ama inta ka horeeysa sanad kasta waa inuu isku duba ridaa miisaaniyadda xiritaanka ee sanadka la soo dhaafay isagoo isku hagaajiyay xisaabihii sanadka iyo bandhigii macaashka si ay u oggolaadaan Golaha Hoggaaminta Machadka.

Qod. 20aad

Machadka wuxuu awood u leeyahay inuu qorto shaqaale shisheeye markii ay lagama maarmaan noqoto iyadoo la tixgelinaaya Xeerka L. 33 ee 25 diseember 1978 iyo sharciyada kale.

Qod .21aad

Iyadoo aan la burin sharciyada jira oo ku saabsan Cashuuraha iyo waajibaadka kale ee Hayadaha Dawladda dulsaaran, Machdka Teknolojiyada Soomaaliyeed wax canshuur ah iyo waajibaad kama bixinayaan Hantida uu soo wareegsanaayo ama gadanaayo oo sahlayso fulitaanka howsha iyo wax soo saarka Machadka.

Qod. 22aad

Madaxweynaha wuxuu awood u leeyahay isagoo tixgelinaayo talada u soo jeediyo Guddoomiyaha Golaha Hoggaaminta Machadka inuu guddoomiyo Xeer guud oo saameeya nidaamka iyo habsami u hirgelinta howlaha Machadka iyo kaa shaqaalaha Machadka.

Qod.23aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa marka laga bilaabo 1 Jannaayo 1979.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ee Dawladda.

Muqdisho 19 Febraayo 1979

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Jaalle Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 7 ee 19 Febraayo 79, Billadaha Maamuuska Milleteriga

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY: Xaashida Koowaad; tan labaad iyo tan saddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY:- Sharciga lamb. 1 ee Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in wax laga bedelo Sharciga Tr. 5 ee 30 Jannaayo 1963 ee ku saabsan Abaalmarinta Militeriga.

MARKUU ARKAY: Sharciga lam. 17; 18 iyo 19 ee 1 Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY: Go'aanka Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada.

WUXUU SOO SAARAYAA SHARCIGA SOO SOCDA:

Qod. 1aad

Waxaa la dhisay habka Billadaha Maamuuska Militeriga oo lagu Abaalmariyo falalka gaar ahaaneed ee Geesinimada Militeriga; si loo muujiyo in falalku mudan yihiin xushmad guud.; isla markiibana tusaale dhiiri gelin u noqda Xubnaha kale ee Ciidammada.

Qod. 2aad

Billadaha Maamuuska Militeriga waxay yihiin:-

— Xiddigta Geesinimada Soomaaliyeed

— Billada Dahabka ah

— » Qalinka ah

— » Maarta ah

— » ka qayb galka Dagaalka.

Qod. 3aad

Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa la guddoonsiinayaa dadka, ayagoo ku kacay fal Geesinimo leh oo samayntiisa haddii la dhaafo aan waxba u dhimaynin Sharciga iyo waajibka, kana hortaga khatar weyn ee u muuqata halisna gelin karta naftooda xilli Dagaal.

Guddoonka Maamuuska Billadaha waxaa la bixin karaa oo keli ah, marka falka la sameeyey haddii dhan kasta laga eego uu yahay mid lagu dayan karo.

Qod. 4aad

Billada Dahabka, Qalinka, Maarta ee Militeriga waxaa la guddoonsiin karaa Xilli Nabadeed, markii ay jiraan sifooyinka ku xusan Qodobka 3aad.

Qod. 5aad

Waqtiga nabadda sifooyinka falka Geesinimo waa inay noqdaan kuwa la xiriira waajibaadka loo dhisay Ciidammada sikasta ha ahaatee sifada qofku sameeyay.

Haddii falka Geesinimo yahay mid la xiriira xirfaddiisa ama yahay mid naxriisi ka keentay, kana baxsan hawlaha loo dhisay Ciidammada, waxaa la siiyaa Abaalgud nooc kale ah xataa haddii qofku ka mid yahay Ciidammada.

Qod. 6aad

Darajada Maamuuska Billadaha Militeriga waxaa lagu qiimeeyaa hadba inta qofka sameeyey la eg yahay, kaana waxaa muujinaaya waxyaabaha uu ka kooban yahay falku, niyadda sare uu muujiyay, khatarta uu ka hortagay iyo guud ahaan natiijada ka soo baxday.

Geerida iyo dhaawacyadu waxay muujinayaan khatarta uu qofku galay, hase yeeshee intaasi oo keli ah uma noqon karaan saldhig maamuus Billadeed, waana in aan loo samayn falka qiimayn uusan lahayn; laakiin waa in la tixgeliyaa waxyaabo fara badan oo khusaynaysa qiimaynta.

Qod. 7aad

Bixinta Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa Guddoomiya Madaxweynaha Jamhuuriyadda ee ah Taliyaha Sare Ciidammada Qalabka Sida, waxaana lagu soo saaraa Xeer Madaxweyne.

Madaxweynuhu waqtiga Dagaalka wuxuu awood u leeyahay in bixinta Billadaha uu wakiisho Madaxda Sare ee Ciidammada, asagoo ka dib ku soo saaraya Xeer.

Haddii Madaxweynuhu uusan si toos ah u soo saarin, Xeerka bixinta Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa soo jeediyaa Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 8aad

Soo jeedinta Abaalmarinta Militeriga shaqadda haya waxay

Soo jeedinta, iyadoo ay ku lifaaqan yihiin war-bixinnada loo baahan yahay ee caddeynaaya waxyaabaha qiimaha leh iyo Falka uu qofku sameeyay, meesha uu ku sameeyay, waxay soo maraysaa habka kala sarraynta, si qof walibk ee Madax ahi uga dhiibto ra'yigiisa.

War-bixinnada waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda Gaashaandhigga muddo ku siman saddex Bilood gudaheeda laga billaabo marka uu falku dhacay.

Qod. 9aad

Soo jeedinta Wasiirka Gaashaandhigga uu u bandhigayaa Madaxweynaha waxaa saldhig u ah ra'yiga Guddi loo magacaabay arrintaas, wuxuuna fikrad ka dhiibanayaa mudnaanta bixinta iyo Darajada Abaalmarinta Billadda Maamuuska.

Guddiga Abaalmarinta Billadaha Militeriga wuxuu ka koobar. yahay :.

1- Abbaanduulaha Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

2. Affar Sarkaal Sare ee Xoogga Dalka Soomaaliyeed.

3- Laba Sarkaal Sare ee ka tirsan Ciidanka qofka la abaalmarinayo.

Guddigu waxaa la isugu yeeraa Xeer hoosaad uu soo saarayo Wasiirka Gaashaandhigga.

Qod. 10aad

Militeriga shaqada ka fariistay ama dad kale ee sameeyay fal qiimo Militeri ah ee ka baxsan C.Q.S. Abaalmarinteeda waxaa soo jeediya Madaxda Militeriga ee meesha falku ka dhacay, waqtiga iyo habka soo jeedintaas waxaa la raacayaa Tusaalooyinka ku xusan Qodobka 8aad.

Qod. 11aad

Soo jeedinta aan la oggolaan lagama dacwoon karo. Sidoo kale ma bannaana in loo dacwoodo, si lagu helo isla falka Maamuusid ka Daraja Sarreysa midda horay loo guddoonsiiyay.

Qod. 12aad

Hadduu qof samaynaya fal qiimo militeri leh uu u Geeriyocdo Geesinnimadiisa darteed ama si kastaba ha ahaatee uu falka ka dib dhintay Billadda Maamuusidda waxaa loo bixin

Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda Militeriga loo bixiyey xusuusta qofka dhintay waxaa la guddoonsiiyaa ilmaha kan ugu weyn, Aabihiisa, Hooyadiisa ama Afadiisa.

Markii la waayo Ehelada la soo sheegay, Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda waxaa la guddoonsiiyaa colkii uu ka tirsanaa.

Haddii uu Geeriyoodo qofka la guddoonsiiyay Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda ee loo bixiyay xusuus ahaan, isu gudbinta lahaanshaha Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda waxaa lagu dhaqmayaa Qawaaniita Dhaxalka u degsan. Isla Qawaaniinta iyada ah waxaa lagu dabaqayaa, xataa haddii uu dhinto qofka horay u haystay Billadaha iyo Shahaadooyinka Maamuusidda.

Qod. 13aad

Falka qiimaha Militeriga leh ee dhowr jeer dhaca, haddii aan lagu maamuusin Abaalgud kale, waxaa midkiiba la guddoonsiin karaa Billad Maamuus, iyada oo aan tiradeeda la xaddadin.

Qod. 14aad

Billaddu waxay leedahay dhexrood cabbirkiisu yahay 35mm, dhinac waxaa kaga xardhan Magaca Qofka lagu Maamuusay, meesha iyo taariikhda falku dhacay, waxaana ku wareegsan xirmo Cawbaar ah, dhinaca kale waxaa ka xardhan Astaanta Qaranka ee muujinaysa Gaashaan iyo laba Waran oo isdhaafsan.

Xiddigta Soomaaliyeed waa DAHAB, waxayna leedahay dhexroor Cabbirkiisu yahay 35mm, dhinaca dhexda waxaa kaga xardhan magaca qofka lagu maamuusay, meesha iyo taariikhda falka dhacay, dhinaca kale waxaa kaga xardhan qoraal ah «GEESINIMO».

Qod. 15aad

1. Billaddu waxay wadataa Xaasaw midabkeedu vahav Buluugga, Calanka lehna jiitin u dhaxaysa oo cad, ballaceedu yahay 37mm, Xaasaw cabbirkeedu vahav 5mm, waxaa lagu qaataa dhinaca Bidixda ee xabadka.

2. Marka aan Billadda la qaadanavn waxaa labbiska Militeriga lagu qaataa dhinaca Bidixda ee Xabadka Xaasawda

da Dahabka ah; Xiddig yar oo Qalin ah kuwa leh Billadda Qalinka ah;Xiddig yar oo Maar ah kuwa leh Billadda Maarta.

3. Dadka leh Xiddigta Geesinnimada Soomaaliyeed waxay qaataan Xaasaw yar ee cabbirkeedu yahay 37mm, x 10mm waxayna dhexda ku wadataa Xiddig yar oo Dahab ah oo dhextaal Koobaabin.

Qod. 16aad

1. Dadka lagu Abaalmariyay Billadaha Militeriga marka ay sitaan dharka rayidka ah waxay Askarta Gaarka ah xaq ugu leeyihiin Salaan Militeri.

2. Militeriga la Abaalmariyay oo sita dharka militeriga waxay salaan xaq u leeyihiin kuwa la Darajada ah.

Qod. 17aad

1. Billadaha Maamuuska Militeriga waxaa la guddoonsiin karaa oo kale Horin madax bannaan, Dhismo Militeri, Urur iyo wixii ka sarreeya ee si wadajir ah u soo hooyey Xilli Dagaal Guul qiimo Militeri leh.

2. Billaduhu waxay ka lushaan Calanka ama Calaamada Colleeyahay.

Qod. 18aad

Billad kasta ee Maamuus Militeri waxaa la guddoonsiiyaa Sannadkiiba Lacagta Billad kasta ku hor qoran:-

Xiddigta Geesinnimada	Sh. So.	6.000
Billadda Dahabka	Sh. So.	1.080
Billadda Qalinka	Sh. So.	720
Billadda Maarta	Sh. So.	360

Qod. 19aad

Lacagta ku qoran Qodobka 18aad waxaa la siiyaa mutaystaha. Lacagta mutaystaha lagama ceshan karo, xaraashi karo, asaguna cid kale kuma wareejin karo.

Qod. 20aad

Xiddigta Geesinnimada waxaa mutaysta Qofka gamaaya

Qod.21aad

Qofkii isagoo nool mutaysta 2 iyo in ka badan Xiddigta Geesinnimada waxaa inta uu nool yahay Taallo looga dhisayaa Magaalo Madaxda.

Qofkii isagoo horay u mutaystay hal Xiddigta Geesinnimada dhinta wuxuu xaq u leeyahay in Taallo looga dhiso Magaalo Madaxda Gobolka uu ku dhashay.

Mutaystayaasha Xiddigta Geesinnimada waxaa lagu magacaabi karaa Magaalo, Iskuul, Waddo, Xero Militeri IWM.

Qofkii mutaysta saddex Billad Dahab waxaa Taallo looga dhisayaa Magaalo Madaxda.

Qod. 22aad

Billadaha Maamuuska waxaa lagu guddoonsiiyaa Xaflad weyn Maalmaha Ciidaha Qaranka, ayadoo colku kulansan yahay. Billadaha waxaa lala baxshaa Shahaado uu saxiixay Madaxweynahaayna ku qoran tahay sababta loo siiyay oo kooban.

Qod. 23aad

Mutaystaha waxaa laga qaadayaa Billadaha Abaalmarinta marka uu ku kaco fal lid ku ah jiritaanka Qarannimada. Kala noqoshada Abaalmarinta waxaa lagu soo saaraa Xeerka Madaxweynaha Jahuuriyadda.

Qod. 24aad

Mustaystayaasha Billadaha Dahabka ah marka ay Geeriyoodaan waxaa lagu magacaabayaa ISKUUL, Waddo Xero Militeri, IWM.

Qod. 25aad

Qofkii muddo 10 (toban) Sano ah Ciidammada ka mid ahaa muuiivayna Anshax iyo Asluub wanaag waxaa la guddoonsiinayaa «Billadda Shacada waqtiga dheer» ka dibna 5tii Sano mid la mid ah, ayaa la siinayaa.

Qod. 26aad

Mutaystayaasha Billadaha Ciidammada waxay xaq u leeyihiin tahiilaadka la siiyo Abaalmarinta u dhigma ee ku xusan Qod 12aad ee Sharciga tir. 65. ee 19ka Oktoobar 1970kii. Muqdisho. 19. 2. 1979

Qod. 27aad

Sharcigaani wuxuu dhaqan gelayaa maalintii uu saxiixo MADAXWEYNAHA J.D.S.

MADAXWEYNAHA

QAYBTA LABAAD
XEER

XEER WASAARADDA HAWLAHA GUUD L. 17 ee 1 Febraayo 1979 qaadid Guryo dan Guud awgeed ee waqti hore uu lahaa SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR oo ay la wareegtay BANKIGA HORUMARINTA SOOMAALIYEED kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani.

WASAARADDA HAWALAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.

ANNAGOO ARGNAY: Xaanshada koowaad tii labaad iyo tii seddexaad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciyada lamb. yihiin 17, 18, 19 ee 1° Luuliyo 1976 oo ku saabsan Xukunka Dalka oo la wareegay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga lamb. 41 soona baxay 13kii Setembere 1973 oo ku saabsan oggolaanshaha dhulka dhismaha;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (ATTO) 7812 Rep. taariikh. 26.1.1977 lagu diiwaan geliyey Xamar 1.12.77 lamb. 271 Att Pubblici Vol. 2 oo ah caddeynta Notaayada Dr. Maxamed Xasan Jasti taas oo BRERA ALFREDO wuxuu ka gaday kuna wareejiyey SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihiis ku yaalay cadka dhulka ah oo ku fadhiya mq. 1046,50/= looguna isticmaalo Xafiisyo, Ufficina iyo Dukaammo — kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani;

ANNAGOO ARAGNAY: Qoraal (ATTO) lamb. 7813 Rep. taariikh. 26.11.1977 lagu diiwaan geliyey Xamar 1.12.1977 lamb. 272 Atti Pubblici Vol. 22, oo ah caddeynta Notaayayada Dr. Maxamed Xasan Jasti taas oo BRERA ANTONIETTA wuxuu gaday kuna wareejiyey SHERIIF SAALAX XASAN CUMAR wax allaale wixii xuquuq ah oo ku saabsan cad dhul dhismihii ku yaal cadka dhulka ah oo ku fadhiya m. 13 dhirir oo ah m. 8,90 oo balac ah, kana kooban sida guri degmo iyo rimessa, kuna yaal Muqdisho — Degmada Shingaani;

ANNAGOO ARAGNAY: Warqadda lamb. yahay 295/XHK/AM taariikdeeduna ahayd 23 Setember 1978 oo ka soo baxday Shirkadda FIMA, kana muuqato in guriyaha ay la wareegtay Dawladdu;

ANNAGOO ARAGNAY : Warqadda qiimeynta guryaha oo ay soo sameeyeen Guddi loo xilsaaray kana kooban :- JEOM. XASAN CUMAR, JEOM. CABDULQAADIR CUSMAAN iyo JEOM. MAXAED JIBRIIL kana tirsan WAKAALADDA HINDISAHA SOOMAALIYEED taasoo muujinayso qiimaha Guryaha in uu yahay lacag dhan Sh.So. 1.030.797, 50/= hase yeeshee laga jaray qiimaha dhan ahaan Sh.So. 412.319/= oo u dhiganta 40% qiimaha asalka ee Guryaha sidaasne dhamaadka noqday lacag dhan Sh.So., 618.478 50/= (Lix boqol iyo toban iyo sideed kun afar boqol todobaatan iyo sideed iyo 50/Senti) eeg qiimaynta halkaan ku lifaaqan;

XEER

Waxaa la caddeynayaa in loo qaaday Dan Guud awgeed Guryaha uu lahaa SHARIIF SAALAX XASAN CUMAR, iyadoo loo celinayo magdhow gaaraya Sh.So. 618.478, 50/= (Lix boqol toban iyo sideed kun afar boqol todobaatan iyo sideed iyo 50/ Senti). Isla markaas waxaa la caddeynayaa in qiimahaas uusan jirin kan dhulka.

Lacagta kor ku qoran waxaa laga bixinayaa Miisaaniyadda Bankiga Horumarinta Soomaaliyeed..

Muqdisho, 1 Feb. 1979.-

WASIIRKA WASAARADDA HAWLAHA GUUD

W.S. INJ. MAXAMED XAWAADLE MADAR

GUDD. BANKIGA H. SOOMAALIYEED
W. S. Dr Cumar Axmed Cumar

Waan Aragnay ee Diiwaangelinay
Diiwaanka Lambar 1 bogga lamb. 3.
Muqdisho, 6 Feb. 1979.
Ku Xigeenka Hantidhowraha Guud
Sax. Xuseen Cabdulle Cali

XEER WASAARADDA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA L. 18 ee 5 Feb 1979, Xeer Nidaamiye Farsamayaqaanada Isgaarsiinta

WASIIRKA WASAARADA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambarkiisu yahay 20 ee 20 Juunyo 1976kii

WUXUU SAXIIXAY XEER NIDAAMIYAHA SOO SOCDA:

MADAXA 1aad

(CENTRAL PROVISION)

Qodobka 1aad

UJEEDDADA MACHADKA

Ujeeddada Machadku waa in la tababaro farsamoyaqaanno Isgaarsiineed ee lagu tababaro teknolojiyada Isgaarsiinta, loona carbiyo dhammaan waaxyaha kala geddisan ee Dawladda oo u baahan kara dadka noocaas ah.

Qodobka 2aad

FURITAANKA MACHADKA

Waxa Machadkan si rasmi ahaan ah loo aqoonsaday 28kii Juun 1976kii, wuxuuna ka hawlgalay tababarkii ugu horreeyey bishii Nofembar 14dii 1974kii.

Qodobka 3aad

WASAARADDA HAWLWADEENKA KA AH:

Waxa Machadkaan hawlwadeen ka noqon doona, ama hoggaamintiisa yeelan doona, Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyadoo ay kaalmaynayso sannadaha hore ee habayntiisa lagu jiro, Ururka Isgaarsiinta Adduunka (ITU), iyo xiriirka Iskaashiga Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Jarmalka iyo Jamhuuriyadda Soomaaliyeed. ee

Qodobka 4aad

GUDDI FARSAMEEDKA XIRIIRINTA:

Waxaa la sameyn doonaa Guddiga Xiriirinta, sida ku sheegan Lifaaqa 2aad, oo kala talisa Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta Qorshaynta iyo siyaasadda Machadka.

Qodobka 5aad

AGAASIMAHA MACHADKA:

Agaasimaha Tababarka Wasaaradda Boostada io Isgaarsiinta ayaa noqon doona Agaasimaha Machadka, wuxuu mas'uul ka noqon doonaa sida habsamida ah ee Machadka loo socodsiinnayo.

Qodobka 6aad

TABABARRADA:

Laba tababar oo waaweyn ayaa ka socon doona Machadka.

1. a) Tababarro Guud ee asaasi ah oo khuseeya dadka arday ahaan ku soo gala.

   b) Tababarro takhasuska qalabka ah ee ay qaadan doonaan ardayda ku guulaysata tababarada isgaarsiinta guud.

2. Tababarro gaar ahaaneed ee gaagaaban ee shaqaalaha (in-service traing)

Qodobka 7aad

TABABARKA AASAASIGA AH EE ISGAARSIINTA GUUD.

7) I. Nooca Tababarrada: Tababarrada aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud waxay ka koobnaan doonaa aqoonta aasaasiga ah oo dhan xag tiyeeri iyo xag gacan-ka-qabashaba (threery an practice).

7) II QAADASHADA ARDAYDA: Qaadashada joogtada ah ee sannadeed waxay ku xirahaan doohtaa baahida iyo qorshaha waaxyaha Dawladda. Ardaydaas oo ah kuwo ku soo guuleystay imtixaanka weyn ee Dugsiga Dhexe lagaga baxo. Qaadashaduna waxay ku imanaysaa tartan qoran ee la qabto marka natiijada imtixaanka dugsiyada Dhexe la soo dhejiyo. Dadka araajida soo qortana waxa lagu imtixaanayaa maadooyinka hoos ku qoran.

1) Luqooyinka: Ingiriisi iyo Soomaali

2) » X I S A A B.

3) » S A Y N I S.

Dabadeedna waxaa soo bixi doona liis ah siday na-

Dhammaan ardayda sidaas lagu qaatay waxay saxeexi doonaan Warqadda Heshiiska sida ku xusan (Lifaaqa 1aad) inta aanay bilaabin tababarkooda.

7) III. BILAWGA TABABARKA: Tabarka aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud wuxuu bilaabmi doonaa lix bilood ka dib markuu dhamaado tababarka luqada oo ay barbar socdeen maadooyin Saynis ah (preparatory coure)

7. IV. WAKHTIGA TABABARKA: Tababarrada aasaasiga ah ee isgaarsiinta guud waxay socon doonaan muddo 2 sano ah iyadoo kala qaybin doono 6 bilood form walba.

Qodobka 8aad

TABABARKA TAKHASUSKA QALABKA:

I Noocyada Tababarrada takhasuska qalabka: Tababarka takhasuska qalabku waxay koobi doonaan rakibida socodsiinta iyo dayactirka qalabka takhasuska oo ay isticmaalaan Wasaaradaha Dawladda iyo waaxyaha kale oo ku shaqeeya.

a) isgaarsiinta dayaxgacmeedka
b) Line oy site and Troposheric sacatter Microwave Radio relay systems.
c) High frequency and very high frequency Radio Links.
d) Air and marine Navigational Aids.
e) Television and scund Broadcasting.
f) Telephone Exchange swittching.
g) Teleprinters and Telex Exchanges.
h) Power Systems.
i) local Line Planning.

II. Qaadashada Ardayda Takhasuska:

Ardayda loo qaadanayo tababarrada takhasuska qalabku waa a daydii ku soo guulaystay tababarka aasiga ah ee isgaarsiinta guud. Waxaa kaloo la qaadan karaa farsamoyaqaannada u qalma heerkan.

III. BILOWGA TABABARKA: Tababarka takhasuska qalabku waxay bilaabmi doonaan ka bacdi markay tababarada asaasiga ah ee isgaarsiinta guud dhammaadaan, ardayduna soo maraan Dugsiga Xalane ama shaqada Qaranka marba sidii waafaqsan siyaasadda Dawladda..

Bilaabidaas oo ku xiran helitaanka macalimiin munaasibah oy waxbarasho iyo qalabkii takhasuska.

IV. WAKHTIGA TABABARADDA.

Tababarada Takhasuska Qalabku waxay noqon doonaan

muddo hal sano ah, iyadoo ay 6 bilood oo hore noqon doonaan barashada xirfadaha sare ee isgaarsiineed oo waafaqsan mudabarashada xirfadaha sare ee isgaarsiineed oo waafaqsan maadada, 6da oo kalena noqon doonaan tababarka barashada qalabka 6da bilocd oo dambe iyana ku jira ama la socda tegid goobaha shaqada oo lagu kormeeri doono.

Qodobka 9aad

TABABARO XIRFADEED OO GAAGAABAN:

Tababarada xirfadeed waxay koobi doonaan shaqooyinka farsamo hoosaadka ah waxayna khusayn doonaan shaqaalaha ka shaqeeya ama u shaqayn doona Wasaaradaha Dawladda ee kala geddisan iyo hayadaha kale oo ku shaqeeya qalabka isgaarsiinta. Tababarrada noocaas ahi waxay koobi doonaan laguna qorshayn doonaa marba shaqooyinka ay shaqaalaha tababarka qaadanayaa qaban doonaan, wuxuuna u badan doonaa tababarku gacan-ka-qabad.

I. QAADASHADA ARDAYDA

Ardayda ka qayb galaysa tababar Xirfadeedka gaagaaban waxa soo magacaabi doona Wasaaradaha iyo Waaxyaha kala geddisan Heerka agooneed ee tababarka lagu soo gelayo waxaa sugi doona Agaasimaha Machadka isagoo la tashanaya wakiilada Wasaaradaha Dawladda iyo hayadaha soo magacaabay shaqaalahaas.

II. BILOWGA TABABARKA

Tababarada xirfadeed waxay bilaambi doonaan ka bacdi marka la helo liiska ardayda tababarka qaadanayaa iyo marka la helo barayaal, hoy waxbarasho iyo qalab tababarka lagu sameeyo.

III. WAKHTIGA TABABARKA

Wakhtiga tababarada xirfadeed ee gaagaaban waxay ku xirnaan doonaan uieeddada tababarka iyo maadooyinka barnaamijku ka kooban yahay, laakiin waa inaanay sinaba uga badan lix Bilood.

Qodobka 10aad

BARNAAMIJKA (SYLLABI)

Barnaamijyada tababarada cusub iyo kabidda barnaamijka jira ee lagu shaqeeyo hadday duruufta isbedelaysa lagama maarmaan ka dhigto waxa samayn doona Agaasimaha Machadka.
isagoo la tashanaya wakiilka waaxyaha arrimuhu khuseeyaan iyo xubnaha shaqaalaha Machadka.

Qodobka 11aad

BIXINTA SHAHAADOOYINKA

Markuu arday kasta dhammaysto foorm tababarka asaasiga isgaarsiinta guud ah, wuxuu/waxay heli doonaa/doontaa warqad caddeyn ah oo ay ku qoran yihiin natiijooyinkiisii oo dhan ee u foormkaas kaga baxay. Shahaado meel mar ahna wuxuu/waxay/ heli doonaa doontaa markuu ku guulaysto.

a) Fasalka (foorm) afraad ee isgaarsiinta guud, shahaadadaas oo la heer ah shahaadada Dugsiga Sare ee afar sanoo caadiga ah.

b) Tababarka takhasuska qalabka. Shahaadadaas oo la heer ah 2 sanoo ka sareysa waxbarashada Dugsiga Sare.

c) Dhammaan Tababarrada Xirfadeed ee gaagaaban.

Qiimeynta shahaadooyinka tababarrada Xirfadeed ee gaagaaban waxa samayn doona Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyadoo la tashanaysa Wasaaradda farsameedka ay khusayso iyo hayadaha kale ee ku lug yeelan kara arrimahaas.

Qodobka 12aad

SHARCIGA MACHADKA:

Machadku wuxuu ku socon doonaa sharciga ku xusan lifaaqyada halkaan ku taxan, kaddibna beddelaadda sharciyadaas oo ay mastaqbalka soo socda duruuftu lagama maarmaan ka dhigto waa in aanay sina ukhilaafin mabaadi'ida Xisbiga. Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed oo danaynaya qarannimadiisa iyo ummaddiisaba. Sharciyada yar-yar ee dar-yeelaya socodsiinta hawl-maalmeedka Machadka waxa marba soo saaridoona saxiixina doona Agaasimaha Machadka ka bacdi markuu la tashado Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta iyo barayaasha waayo aragga ah.

Qodobka 13aad

MAALIYADDA:

Maaliyadda Machadka waxa sannad walba diyaarin doona Agaasimaha Machadka.

Qodobka 14aad

WASIIRKA WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

AGAASIMAHA GUUD EE WASAARADDA BOOSAHA IYO ISGAARSIINTA

KU XIGAHA AGAASIMAHA Isgaarsiinta guud. faraca	AGAASIMAHA MACHADKA	GUDDIGA XIRIIRKA SHAQAALAHA MACHADKA			
BARE SARE diridda & radio farac dayaxgacmeed microwave transmission.	BARE SARE telefoonka (exchanges) faraca telephone power	BARE SARE kaalmooyinka baddà faraca duulista & hawada marine	BARE SARE faafinta codka farac codka television	BARE SARE telex & teleprinter farac teleprinter telex	BARE SARE local line planning & vocational local line planning courses

Fiiro Gaar: Agaasimaha Machadka iyo ku-xigeen kiisuba waxay noqon doonaan saraakiil carbisan oo shahaado jaamaceed haysta kana tirsan Wasaaraddà Boosaha iyo Isgaarsiinta. Baraha Sare ee horjoogaha ka ah faarac walba a wuxuu hoqon qof munaasib ah oo u carbisan faracaas, marka laga Waxbarashadiisa iyo khibrad gacmeedkiisa shaqada waxaana kaalmayn doona barayaal iyo tusayaal (demonstratore) marba inta loo baahrdo si uu u dhammaystiro tababarada wakhti walba.

Barayaasha iyo tusayaasha waxaa faraca isgaarsiinta guud loogu qori doonaa marba baahida wakhtigu siday tahay.

Qod. 15aad

TALLAABO QAADKA ARDAYDA TABABARRADA ISGAARSIINTA GUUD & TAKHASUSKA:

Ardayda soo gudbaa waa shaqo tegayaan.

Tababarka takhasuska Tababarka Qalabka	Magudbaha (below 50% waa inuu dib u qaataa tababarka takhasuska.
Tababarka takhasuska Isgaarsiinta Sare	Magudbaha ka hooseeya 50% waa inuu dib u qaataa qaybtaas.
Farsamoyaqaano waxbarasho ahaan ku qalmo inay ka qayb galaan.	
Isgaarsiinta guud formka IV.	Magudbaha ka hooseeya 40% waa in la cayriyaa kuwa 40 — 44% keenay ha ku noqdaan formkaas.
Isgaarsiinta guud formka III	Magudbaha ka hooseeya 40% waa in la cayriyo kuwa 40 — 44% keenayna ha ku noqdo formkaa
Isgaarsiinta guud formka II	Magudbaha ka hooseeya 45% waa in la cayriyo
Isgaarsiinta guud forka I	Magudbaha ka hooseeya 45% waa in la cayriyaa.

Qaadashada sannadeed oo ku soo guuleystay imtixaanka dugsiga dhexe ee tartan Machadka lagu qabtay ku soo galay.

FTIRO GAAR: Ardayda laga cayriyo Machadka kartidarro waxbarasho wgeed gaar ahaan formka III & IV, haddii dabeecaddoodu fiican tahay waa in loo qaataa hawlaha farsamada hoose ee wasaaradaha Dawladda ee isgaarsiineed loo furaa tababarro xirfadeed ee gaagaaban.

Qodobka 16aad

Wuxuu sharcigaani hirgeli doonaa Marka Wasiirka Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiintu soo saxeexo.

Waxaa saxeexay Sharcigaan: Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad
Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

LIFAAQA N. 1

WARQADDA HESHIISKA
(XURUUF WAAWEYN)

MAGACA ARDAYGA ————————————

TAARIIKHDA DHALASHADA ————————————
CINWAANKA GURIGA ————————————

CINWAANKA HADDEER ————————————

HADDUU KA DUWAN YAHAY KAN GURIGA ————————

WAALIDKA/AMA QOFKA MASUULKA KA AH ————————

CADDEYN

Anigoo ah ardayga hoos ku saxeexan waxaan halkan ku caddeynayaa adkaynayaana inaan u hoggaansanaayo duruufta iyo shaqooyinka Machadka Tababarka Isgaarsiinta Qaranka una bushin-tuurmaayo qanuunka iyo sharciga u degsan.

Waxaan kaloo caddeynayaa adkaynayaana inaan markaan dhammaysto tababarkayga isgaarsiinta aan u shaqayn doono Dawladda Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliyeed sida marba la igu amro.

Waxaan kaloo caddeynayaa adkaynayaana in inta tababarka ii socdo iyo marka aan shaqada tagoba inaan dalka ugu shaqaynayo si furfuran oo daacadnimo ah si kastoo ay duruuftu iga keentaba, kana qayb gelayo hawlaha iskaa-wax u-qabsada iyo hanuuninta markii la iiga baahdoba.

Waxaan kaloo aqoonsanahay in haddii alaab Dawladdu leedahay igu jabaan, ama igu lumaan xaq la iigu leeyahay in la warsado qiimaheedii anan gudo, ama la iga jaro gunnadayda ilaa aan wada gudo qiimihii sheyga. Waxaana halkaan ku caddeynayaa inaan ku kalsoonahay diyaarna u ahay.

Saxeexa Ardayga

————————————

Taariikh

————————————

Fiiro Gaar :- waa in warqaddan la buuxiyaa maalinta ugu horeysa ee tababarku bilaabmo laguna xafidaa galka ardayga buuxiyey (FF/-) foomkaan.

LIFAAQA 2aad

GUDDIYADA MACHADKA TABABARKA ISGAARSIINTA QARANKA

Labadaan Guddi ayaa la samayn doonaa si ay uga kaalmeeyaan Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta dejinta siyaasadda Machadka, dhowridda iyo hagaajinta heerka tababarrada Machadka.

a) Guddi farsameedka Xiriirinta
b) Guddi Farsameedka Qiimeynta.

Shaqooyinka, mas'uulyada iyo xubnaha guddiyadani waxaa lagu caddeeyay hoos:

a) Guddi Farsameedka Xiriirinta

Guddigani wuxuu mas'uul ka noqon doonaa inuu kala taliyo Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta qorshaynta iyo siyaasadda Machadka iyo hirgelinta siyaasadaha la isla gaaray. Wuxuuna yeelan doonaa awooda inuu u soo jeediyo Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta wixii sharciyo cusub ah ee loo baahanyahay, ama soo jeediyo wixii kabid ama beddel ah ee lagu samaynayo sharciga jira taasoo ay keentay duruufta is rogrogaysa iyadoo mar walba la tixgelinayo in kabidaas ama sharciyadaas cusubi waafaqsanyihiin mabaadi'dii Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed.

Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa xubnahan:

1) Agaasimaha Machadka (Guddoomiye)
2) Ku_xigaha Agaasimaha Machadka
3) laba sargaal oo ay soo magacowday Wasaaradda Boostada iyo Isgaariinta
4) Sargaal ka yimid Wasaaradaha la xiriira Machadka (i. e. Wasaarad kasta oo u baahan inay Machadka ka hesho farsamoyaqaanno carbisan)
5) Sargaal ka tirsan Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta
6) Sargaal ka tirsan W. Shaqada iyo arrimaha Bulshada
7) Maareeyaha Mashruuca Machadka ee ITU
8) Horjoogaha kooxda Tababarrada ee G. D.P.

Maareeyaha Mashruuca iyo Horjoogaha kooxda G.D.R waxaa hadhow bedeli doono barayaal waayo arag ah oo loo magacaabay.

Guddigu wuxuu shiri doonaa 4tii biloodba mar, shirarkaas waxa wargelin doona xubnaha Agaasimaha Machadka laba asbuuc ka hor, shirarkaasna waxa la qaban doonaa bilo[illegible]

Shirarka khaaska ah haddii loo baahdo waxa guddiga isugu yeeri karaa Agaasimaha Machadka.

Qaraaraadka shirarka waa la xafidi doonaa waxaana lo(gudbin doonaa xubnaha guddiga iyo Wasaaradda la xiriirta muddo ku siman laba asbuuc gudaheed markii shirarka laqabtay.

LIFAAQA NO. 3

INTIXAANNADA IYO QIIMAYNTA

Sharcigaani wuxuu tifatirayaa hababka la raacayo wakhtiyada imtixaannada iyo qiimaynta ardayda ilaa muddada ay tababarka Machadka ku jiraan.

IMTIXAANNADA

Imtixaanada qoraalka ah, gacan-ka-qabashada iyo laabka ee ardayda dhiganaysa tababarada isgaarsiinta guud iyo takhasuska qalabku waxay noqon doonaan saddex nooc.

1) Imtixaano kaltaneed ee maadooyinka kala geddisan lana qaado wakhtiyo habboon ilaa inta tababaradu socdaan.

2. Imtixaanno dhexe oo la qaado badhtamaha teeramka tababar takhasuseed walba.

3) Imtixaanno kama-dambays ah oo maadooyinka oo dhan ah lana qaado bisha ugu dambeysa ee tababarada takhasuska qalabka.

Dhammaan imtixaanadaas waxa samayn doona baraha u xilsaaran maadada ardayda lagu imtixaamayo.

Ardayda ka maqnaata imtixaan iyadoo aan wax cudur-daar ah haysan, waxay heli doonaan eber (Zero) imtixaankaas isaga ah. Eberkaas oo loogu dari doono marka la samaynaayo isku-celceliska imtixaanadiisa oo dhan. Ardayda ka maqnaado ka maqnaato imtixaan iyagoo haysta cudur-daar waxay heli doonaan isku-celceliska saddexdii imtixaan ee maadadaas ugu dambeeyey. Lambarkaas oo loogu dari doono marka la sameynayo isku-celceliska imtixaanadiisa oo dhan Cudur-daarada macquulka ah oo noqon kara jiro daran, uuna soo caddeeyay takhtar la aqoonsan yahay, ama fasax uu bixiyey Agaasimaha Machadka.

Ardayda dhigata tababarada xirfadeed ee gaagaaban (oo badanaaba ah dad shaqaale ah) waxay geli doonaan imtixaano la qaban doono wakhtiyo habboon inta tababarku socdo iyo imtixaan ugu dambays ah ee la qaban doono asbuuca ugu dambeeya ee tababarka.

QIIMAYNTA

Ardayda waxa lagu qiimayn doonaa natiijooyinkaimtixaankooda sida jaantuskan ku muujisan;

1) 75% iyo wixii ka sareeya ——— aad buu ugu qalmaa
2) 50% ilaa 74% ——————— waa u qalmaa
3) 49% iyo wixii ka hooseeya ——— magudbe.

Tallaabooyinka laga qaadayo kuwa dhaca waxay ku tifatiranyihiin lifaaqydaa No 4 & 5.

QIIMAYNTA ARDAYDA

1) Tababarada IsgaarsiintaGuud

Tallaabo-qaadka arday walba waxaa la qiimayn doonaa ka dib marka la qaado imtixaanka dhexe iyo imtixaanka ugu dambaysta ah oo walba waxaana qiimayndoona «Guddiga Qiimaynta» Qiimayntaana waxa loo samayn doonaa sida jadwalka hoose ku qeexan.

a) Arday kasta waxaa loo xisaabinayaa natiijooyinkiisii kaltameed ee maada kasta ilaa iyo imtixaanka kama dambeysta ahaa.

b) Arday kasta waxaa loo xisaabinayaa natiijooyinka shaqada guriga ee maada kasta ilaa iyo imtixaanka kama dambeysta ah.

c) Arday walba waxaa la isugu darayaa isku-celceliska natiijooyinkii imtixaanada kaltaneed iyo shaqada guriga oo «a» iyo «b». Sidaas darteed iskucelceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu helay «c» ayaa waxa lagu darayaa natiijada imtixaanka kama dambaysta ah ee maadadaas si loo helo shaqada iyo awood Waxbarashadeedka ardayga ee kolkaas.

e) Isku celcelis guud oo maadooyinka oo dhan ayaa waxa looga soo saari doonaa lambarada lagu soo xisaabiyay «d». Waxaana lagu magacaabi doonaa isku celceliska forma ee ardayga, waxaana lagu isticmaali doonaa liiska kala sarraynta ardayeed ee tababarkaas.

2) Tababarrada Takhasususka Qalabka.

Horukaca iyo tallaabo-qaadka arday walba waxa la samayn doonaa ka bacdi imtixaan dhexeed walba iyo ka bacdi imtixaan

kama dambaysaad walba waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta» Qiimayntaa waxa loo samayn doonaa sida jadwalkaan hoose ku qoran.

2.1 Ka bacdi imtixaan dhexeed walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku celceliska natiijooyinka kaltan imtixaaneedkiisii oo dhan

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii guriga oo dhan.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii kaltaneed iyo tan guriga ee «a» iyo «b». Sidaa darteed isku celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka dhexe si loo helo isku celceliska badhtamaha kal tababareedka oo loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas. isku celcelisyadaas waxa lagu isticmaali doonaa samayn kala sarraynta guud tababarkaas.

2.2 Ka bacdi imtixaan kama dambaysaad walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambeyey.

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada guriga laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambayey.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celcelis natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo kan guriga ee «a» iyo «b» Sidaa darteed iskucelceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama dambaysta ah si loo helo shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas.

e) Lambarka lagu soo saaray «d» ayaa waxa lagu dari doonaa isku celceliska badhtamaha kal tababareedka (para. 2.1. oo xubinta «d»)si loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga intii tababarku socday. Taasna waxa lagu magacaabi natiijadii tababarka waxaana la isticmaali doonaa marka la samaynayo liiska kala sareeynta ee

3. Tababarada Xirfadeedee

Tallaabo-qaadka arday walba waxaa la qiimayn doonaa ka bacdi marka la qaado imtixaanka kama-dambaysta ah waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta». Qiimaynta waxaa loo samayn doonaa sidan ku qeexan jadwalka hoose, iyadoo natiijooyinka loo kala tixgelinayo qoraal iyo gacan-ka qabasho.

a.) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa isku-celceliska natiijooyinka kaltan imtixaaneedkiisa oo dhan.

b) Arday walba waxa la isugu darayaa isku-celceliska natiijooyinka imtixaanadiisii kaltaneed iyo tan guriga ee «a» iyo «b». Sidaa darteed isku-celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

c) Lamabarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka dhexe si loo helo iskucelceliska badhtamaha kal tababareedka oo loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka aradayga kalkaas, iskucelceliyadaas waxa lagu isticmaali doona samayn kala sarraynta guud tababarkaas.

2.2 Ka bacdi imtixaan kama dambaysaad walba.

a) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambeyey.

b) Arday walba waxa loo xisaabin doonaa dhammaan isku celceliska natiijooyinka imtixaanada guriga laga soo bilaabo imtixaankii dhexe wixii ka dambayey.

c) Arday walba waxa la isugu darayaa isku celcelis natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo kan guriga ee «a» iyo «b» sidaa darteed isku celceliska shaqada guriga waxa lagu qiimayn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkooda.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» waxa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama dambaysta ah si loo helo. shaqada awood waxbarashadeedka ardayga kolkaas

c) Lambarka lagu soo saaray «d» ayaa waxa lagu dari doonaa isku celceliska badhtamaha kal tababareedka (para. 2.1. oo xubinta «d») si loo arko shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga intii tababarku socday. Taasna waxa lagu magacaabinatiijadii tababarka waxaana la isticmaali doonaa marka la samaynayo liiska kala sarraynta ee tababarka.

3. Tababarada Xirfadeedka

Tallaabo-qaadka arday walba waxaa la qiimayn doonaa ka bacdi marka la qaado imtixaanka kama-dambaysta ah waxaana qiimayn doona «Guddiga Qiimaynta». Qiimaynta waxaa loo samayn doonaa sidaan ku qeexan jadwalka hoose, iyadoo natiijooyinka loo kala tixgelinayo qoraal iyo gacan-kaqabasho.

a) Arday walba waxaa loo Xisaabin doonaa isku-celceliska natiijooyinka kaltan imtixaanadiisa oo dhan.

b) Arday walba waxaa loo Xisaabin doonaa iskucelceliska natiijooyinka imtixaanadiisa guriga oo dhan.

c) Arday walba waxaa la isugu darayaa iskucelceliska natiijooyinka imtixaanada kaltaneed iyo shaqada guriga ee «a»iyo «b» sidaa darteed iskucelceliska shaqada guriga waxaa lagu qiimeyn doonaa imtixaanada kaltaneed badhkood.

d) Lambarka lagu soo saaray «c» ayaa waxaa lagu dari doonaa natiijooyinka imtixaanka kama-dambeysta ah si loo helo shaqada iyo awood waxbarashadeedka ardayga kalkaas isago ha

LIFAAQA 5aad

TALLAABO QAADKA ARDAYDA

Ardayda Qaadanaysa Tababarka Isgaariinta Guud iyo Takhasuska Qalabka.

Iyagoo raacaya natii jooyinkii arday walba helay imtixaankii walba oo dhexe ama imtixaankii dambaysta ahaa, Guddiga qiimayntu markay ka baaraan degaan natiijooynka arday kasta, waxay warbixin u gudbin doonaan Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta taasoo ku saabsan sidii arday walba loogu meelayn lahaa fagaare shaqo oo ku habboon. Warbixintaas oo ka koobnaan doonta :.

a) U gudbinta formka xiga ardayda ku guulaysta formamka 1, 2, iyo 3.

b) U gudbinta tababarka Takhasuska qalabka ardayda ku guulaysata formka 4.

c) U gudbinta tababarka qalabka 6da bilood oo ugu dambaysa ardayda ku soo guulaysata 6da bilood oo hore ee tababarka takhasuska qalabka.

d) U gudbinta goobaha shaqada ardayda ku guulaysata tababarka takhasuska qalabka.

e) U gudbinta shuruudda leh ee formka xiga ama heer tababareedka xiga, iyadoo la siinayo digniin qoraal ah ardayda isku-celceliskoodu qarka uu u saaranyahay dhaciin.

f) Ku celinta ama reebidda ardayda formkii ama heer waxbarashadeedkii uu horay u dhiganayay ee arday-da ay guddigu ku qiimeeyaan inaanay wadi karin shaqada formka sare ee xiga ama heer waxbarashada xiga, laakiin ay rajada ka qabaan inuu gudbi doono haddii fursad la siiyo. Talo-geliyadaasi waa inay caadiyan ku ekaataa ardada formka 3 &4 ee isgaarsiinta guud iyo ardayda tababarka takhasuska qalabka qaata oo keliya.

g) Ka cayrinta Machadka ardayda awooddooda wabarasho aanay gayaysiin karin inay horukac tababareed sameeyaan. Iyagoo talo-bixinta ku daraya in ardayga la cayriyay loo qaato hawl-farsameed hoose haddii uu dabci wanaagsan yahay.

h) Dhiiri-gelin dhaqaale oo la siiyo ardayda heerkoodu gaarsiisanyahay siyaalaha ku lifaaqa No 7, oo ay shar-

di u tahay in dabcigiisa iyo imaatinkiisuba wanaagyihiin.

2. Ardayda Qaadanaysa Tababarrada Xirfaddeed.

Tababar Xirfadeed kasta markuu dhammaado, Guddiga qiimayntu waxay lafaguri doontaa natiijooyinka arday walba is la markaasna waxay guddigu talo bixinteeda u gudbin doontaa Wasaaradda uu ardaygaasi ka yimid ama u shaqayn doono iyagoo u sii marinaya Wasaaradda Boosaha iyo Isgaarsiinta iyagoo tixgelinaya awooda waxbarasho ee ardaygaas siday isla gartaan inay tahay daw. Waxay guddigu talo-bixintooda ku dari doonaan:-

a) Awoodda ardayga shaqooyinkii tababarka uu ku qabtay iyadoo aan la kormeerin.

b) Awoodda ardayga uu shaqooyinkii tababarka uu ku qabtay iyadoo la kormeerayo.

c) Talo-bixin haddii ay natiijooyinkii ardaygu aad u hooseeyeen in loo diro hawlo aan aqoon farsameed sare u baahnayn.

3. Guddigu markuu talo bixintiisa samaynayo wuxuu tixgelin doonaa qodobada soo socda:

a) Waxbarasho dugsiyeedka guud iyo gacan-wax-ka-qabadka ardayga, iyadoo la fiirinayo natiijooyin tababaro hore haddii ay jiraan, isla markaasna si gaar ahaaneed loo tilmaamayo meelaha uu aad ugu fiican yahay iyo meelaha uu aad ugu xunyahay intaba.

b) Maqnaashihiisa, soo daahiddiisa iyo bugtadiisaba.

c) Dabeecaddiisa guud iyo faa'iidadiisa sarkaal ahaan.

d) Xaqiiqa ama sifo kasta oo jihayn karta shaqadiisa iyo awooddiisa ee lagu arkay intuu tababarka ku jiray.

4. TUSMO

Heerarka guud ee soo socda waa in tusaale ahaan loo qaataa marka arday walba la qiimaynayo. Waana in la xasuusnaada marka la qiimaynayo natiijooyinka ardayda formka I ilaa III inaan loo baahnayn in tiirarkan loo raaco si adag, khaas ahaan marka arday helo natiijo qarka u saaran dhacniin. Mararkaas oo kale haddii guddigu isla garta in aradygu ka gudbi karo formka xiga, waa inay ardayga fursad siiyaan. Markaasoo kalena waa in digniin qoraal ah la siiyaa sida ku tibaaxan LIFAAQA No. 6. Waana in arrimahaas oo kale loo arkaa kuwo gaar ah ee aan loo arag qaanuun lagaga hortegayo hoos-u-dhigga-heerarka Machadka.

4. 1 Ardayda qaadata Tababarka Isgaarsiinta Guud.

ARDAYDA FORMKA I	Isku-celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form II iskucelcelis ka hooseeya 50% halla cayrsho.
ARDAYDA FORMKA II	Isku celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form III. Isku-celcelis u dhaxeeya 45 ilaa 49 ha u gudbo form III, digniin qoranna halla siiyo.
ARDAYDA FORMKA III	Isku celcelis ah 50% ama ka kor ha u gudbo form IV, inta u dhexaysa 45 ilaa 49% ha u gudbo form IV. hana la siiyo qoraal digniin ah. Isku-celcelis u dhexeeya 40% ilaa 44°. ha ku noqdo formka (mar keliya) Isku-celcelis ka hooseeya 40% waa in laga cayriyaa Machadka.
ARDAYDA FORMKA IV	Isku-celcelis ah 50% iyo ka kor ha u gudbo tababarka Takhasuska qaqalabka. Isku-celceliska u dhexeeya 40% ilaa 49% ha u gudbo tababarka takhasuska qalabka, hadduu ku gudbo imtixaanka labaad (re-exam) hadduu ku dhaco form IV dib ha ugu noqdo.

4. 2 Ardayda Qaadata Tababarka Takhasuska Qalabka.
isku-celcelis imtixaan dhexaad oo ah 50% ama ka kor ha u gudbo ugu dambeeya.

Isku-celcelis imtixaan dhexaad oo ka hooseeya 50% ha ku noqdo tababarka (mar uun).

Natiijo tababar oo ah 50% ama ka kor ha u gudbo goobaha shaqada.

Natiijo tababar oo ka hoosaysa 50% ha loo oggolaado inuu dib u qaato qaybtii ugu dambaysay ee tababarka fursadda ugu horaysa.

4. 3 Ardayda qaadata Tababarka Xirfadeed.

Ardayda waxa lagu kala qiimayn doonaa «aad buu ugu qalmaa» «waa u qalmaa» iyo «ma gudbe» sida uu qeexayo LI-

FAAYA No 3 waxaana guddigu tixgelin doonaa imaatinka iyo buugtaba.

4.4 GUUDI AHAAN

Tusaalooyinka guud ee soo socda culayska waa in lasaaraa tallaaboqaadka ardayda xagga hawl farsameedka iyo gacan wax ka-qabashada marka loo eego maadooyinka aan farsamada ku lug lahayn oo tababarka ku jira.

Marka la fiirinayo imaatinka iyo wakhti dhowridda ardayda, gaar ahaan Tababarrada Isgaarsiinta guud, tusmooyinka soo socda waa in la isticmaalaa:-

a) Isku-celcelika ah maqnaasho 3 casho ama ka badan bishiiba waxa loo soo qaadi karaa eri.

b) Isku-celcelis ah daahid 4 casho ama ka badan bil uun waxa loo soo qaadi karaa eri.

c) Isku-celcelis ah bugto 4 casho ama ka badan bil uun waxa loo soo qaadi karaa eri iyo ku-noqosho tababarka marka ugu horaysa ee fursad la helo.

LIFAAQA NO 6

HAB-DHISKA DIGNIINEED

1) Dhammaan ma gudbayaasha (ka hooseeya 50%) isku celceliskooda fasaleed iskucelceliskooda tababar badhtameed iyo natiijoojinkooda tabarku waxa lala socodsiin doona ardayda ay arrintu khusayso iyadoo la isticmaalayo qoraal digniin ah. Digniinahaas waxa saxeexi doona qaybinna doona Agaasimaha Machadka.

2) Dhammaan digniinaha waxa qaybin doona Agaasimaha iyagoo laba koobi ah oo habka caamka ah ee Machadka NTTI/2, iyadoo uu koobi haysanayo ardayga arrintu khusayso koobiga kalena marka ardayga la gaarsiiyo ka bacdi lagu xafidayo galkiisa (PF/—),haddii uu ardaygu isla markiiba warqadda digniinta soo celin waayo, arrintaas waxaa loo qaadan doonaa gef sida ku sheegan LIFAAQA No. 8.

TIR. NTTI/PW/— HABKA CAAMKA AH EE DIGNIINTA

Ku; ————————————

Tababar; ———————————— No. ———

Waxaa halkaan laguugu sheegayaa inaad ku dhacday tababarkan soo socda, adigo helay natiijo isku-celceliskeedu yahay ———————— oo keliya

TABABARKA ISGAARSIINTA GUUD FORM I/II/III/IV
TABABARKA TAKHSASUSKA QALABKA ——— (naynaasta)

ISKU-CELCELISKA IMTIXAANKII DHEXE/ISKU-CELCELISKA TABABARKA

TABABARKA XIRFADEED ———————— (naynaasta)

SAXEEXA AGAASIMAHA————————

TAARIIKHDA ————————————

Ku; — — — — — — — — — — — — — — — — — —
(Agaasimaha)

Digniintaas sare waa arkay.

Saxeexa :————————————
Taariikh ————————————

F=G=:- Noqolka asalka ah waa inuu ardaygu la haystaa, la saxeexaa oo isla markiiba loo soo celiya meelaynta galka (PF/-) ardaygay khusayso.

(Habka NTTI/2)

LIFAAQA NO 7

GUNNO ARDAYDA

1. Gunno joogta ah, oo qadarkeeda marba dawladdu xadayn doonto, ayaa arday walba la siin doonaa. Ardaydaas oo ah kuwa ku qaata tababarka Machadka Isgaarsiinta Guud. Waxay ardaydu gunnadaas u isticmaali doonaan kharashka gaadiidka, huugagta wax lagu qoro iyo buugagta farsamada di sy escbstsdhsfoofs u ksbto, Gunnada waxa bixin doonaa Agaasimaha Machadka ama ciddii uu xil saaro bil walba asbuuca hore ee bisha kale marka laga reebo ardayda cusub ee ku sheegan para No. 6

2. Bixinta gunnadu waxay ku xiran tahay shuruudaha soo socda:

a) Iska maqnaashaha maalin, ama maalin badheed, waxa laga goyn doonaa gunnadii maalintaas, iyadoo la tixraacayo xisadaha (goyntu waa 6/=

b) Imaatinka xisaaska Machadka wakhti dembe, ama habsaan fasax la'aaneed wakhtiyada shaqada lagu jiro, waxa la go/i doonaa 50%

c) Haddii arday jebiyo ama lumiyo shay ka mid ah alaabta dawladda Agaasimaha Machadku, hadduu doono waa ka joojin karaa gunnada ardaygaas ilaa qiimaha shaygii laga wada jaro ama qayb ahaan laga jaro.

d) Ardaygii ku yimaada dhar aan ahayn kan Machadka waxaa ka go'aysa gunno 4/=

e) Agaasimaha Machadku wuu ka joojin karaa gunnada hadii arday sharciga Machadka ku xad gudbo, sida ku sheegan LIFAAQA No. 8.

3. Gunna waxa dib loo qiimayn doona ka bacdi markii imtixaan kama dambays ah la qabto taasoo ku iskuceliska fasaleed ee arday kasta. Qiimayntu waxay u dhici doontaa sidaan soo socota:

a) Isku-celcelis ah 70 ama ka kor ——— abaal gud laca. ceed.

4. Gunnadu isla markiiba way ka go'aysaa ka bacdi markuu Machadka ka baxo ama uu dhammaysto waxbarashadiisii.

5. Wax gunno ah ma laha ardayda hoos ku carrifani:-

a) Ardayda tababarka ku laabatay natiijo xumo aw. geed.

b) Haddii Guddigu farsamadu u garato in ardayga gunnadiisa la siiyo, waa la siin karaa.

6. Gunnadd joogtada ah ardayda bilaabaysaa sannadka ugu horreeya ee tababarka isgaarsiinta guud waxaa saddexda bilood oo hore hayn doona Machadka. Waxaana gunnadaas loo isticmaali in lagu soo gado dharka ardayda wixii ka dambeeyana si caadi ah oo joogta ah bay gunadooda u heli doonaan.

7. Goynta gunada markuu habsamo ama maqnaado fasaxla'aan ama qef sharciga Machadka khilaafsan keensado ardaygu waxaa loo isticmaali doonaa lacagtaas iyada ah sidan hoos ku qoran:

a) Daweeynta dhaawacyada shaqaalaha Machadka ama ardayda ku gaara laababka, qalabka baraatikada IWM.

b) Qalabaynta iyo hagaajinta libraray ardaydu leedahay iyo iibin buugag waxbarashro

c) abaal gudyo la siiyo ardayda fiicfiican.

d) Hawlaha yar yar ee Machadka.

8. Tababarka Dugsiga Sare ee Xalane wuxuu raacsan yahay Machadka.

LIFAAQA NO 8

HABKA SHARCIGA MACHADKA

Si loo abuuro loona hantiyo hawo laaqi u ah Waxbarasho, waxaa muhiim ah in sharci hagaagsan lagu socodsiiyo Machadka. Ardayda waxqasta iy o kuwa aan u hoggaansanayn shar-

ciqaba waa in laga raacdeeyaa Machadka wakhti horeba si aanay u sadhayn ardayda hoggaansan.

Agaasimaha Machadka ayaa u xilsaaran masuulna ka ah haynta iyo fulinta sharciga Machadka. Si uu u socodsiiyo wuxuu tixgelin doonaa Agaasimuhu go'aanada guddiga Xiriirinta iyo shirarka shaqaalaha Machadka. Agaasimuhu, hadduu doono, wuxuu gacan weydiisan karaa qofkii uu doono ee shaqaalaha Machadka, ka mid ah inuu wax kala qabto amba kala taliyo arrimaha sharciga, isiga keliya ayaase leh wixii go'aan kama dambaysa ah.

Marka arday ku xad gudbo sharciga Machadka, waa in si fiican looga taxadaraa loona baaraa si sharci loogu qaado. Qaadista sharcigana waa inuu ka horreeyaa qoraal, kaasoo dabadeed gelaya galka edebta. Haddii ay suuragal tahayna waa in caddayno laga qaadaa wixii markhaatiyaal ah oo goob joog ahaa markii gafku dhacay, Gafafku markay caddaadaan waa in loo saaraa:-

a) Gaf Daran: Tuugo, jejebin qalab dawladeed, khilaaf Sharciga Machadka, edeb-darro loola jeedo in lagu kala daadiyo horukaca ardayda kala ee Machadka, samayn waraaqo beenbeen ah, khiyaamayn imtixaan, maqnaasho badan, kaydsan agar gaf oo sahlan hawl waxbarasho sannadeed oo keliya.

b) Gaf Sahlan: Wixii gaf ah kana soo horjeeda sharciga Machadka isla markaasna aan lagu xisaabin karin gaf daran, waxaa lagu tirinayaa gafafka sahlan.

Wixii ciqaab ah ee lagu abaalmarin karo gararkaas kala duwan waxaa goyntooda iska leh Agaasimaha Machadka isagoo tixgelinayo culayska gafka. Jadwalka soo socda waa la isticmaalaa:

a) Gaf daran: eri aan soo laabasho lahayn, eri ku siman hal asbuuc, goyn gunno ama qaarkood muddo hal bil ah.

b) Gaf Sahlan: eri ku siman maalin, goyn gunno ama qaarkood muddo ah hal asbuuc, digniin qoraal ah.

Ardaygii ay ku caddaato inuu gaystay gaf ka mid ah kuwa ku sheegan jadwalka hore waxaa loogu sheegi doonaa gafkii sa qoraal, iyo ciqaabta uu mutaystay oo tifaftiran. koobiga gafka ah oo ardaygu arkay, waxaa lagu ridi doonaa galka ardayga arrintu khusayso.

LIFAAQA NO 9

SHARCI GUUD EE ARDAYDA

1. Dhowrista Wakhtiga

Arday walba waxa laga filayaa inuu dhowro wakhtiga jadwalkiisa, unna imaado meesho loogu talo-galay. wakhtiga loogu talo galay. Ardayga soo daaha subaxdii ama ka dib wakhtiga nashada waxa calaamadin doona magaciisa baraha xisadda leh.

Ardaygaasi wuxuu waayi doonaa gunno siin fiiri lifaaq No. 7.

2. Maqnaashaha:

Ardayda ka maqnaata Machadka iyagoo aan cudur-daar macquul ah haysan waxay waayi doonaan gunnadoodii maalintaas, gunnaduna way go'aysaa halkii maqnaasho oo walba.

3. Bugto:

Ardayga ka maqnaa Machadka jiro awgeed waa inuu dayaa inuu soo gaarsiiyo arrintiisa Agaasimaha Machadka si dhakhso leh, waana inuu arkaa Agaasimaha Machadka marka ugu horraysa ee uu soo laabto lana yimaado shahaado takhtareed. Haddii la waayo shahaadooyinkaas takhtareed, maqnaashaha ardaygaas waxa loo xisaabin doonaa maqnaasho fasax la'aaneed gunnadiisana wuu waayayaa.

4. Akhlaaqda Guud.

Waxa ardayda oo dhan laga doonayaa inay muujiyaan habsami inta ay Machadka joogaan, wxbarashadoodan daryeelan Arday walba waxa laga filayaa inuu isu qaabiyo wakhtiwalba si asluub san. Asluub samidaasna aanu kula dhaqmin madaxdiisa oo keli ah, ee uu kula dhaqmaa jaallayaashiisa ka hooseeya iyo kuwa la simaanba. Ardaydu waa inay ilaaliyaan inay buuq saayid ah oo fasalada kale dhega-barjaysiiya samayn.

5. Dharka Machadka

Dhammaan ardayda tababarka isgaarsiinta guud iyo tababarka takhsuska qalabka waa inay labisnaadaan dharka Machadka wakhti kasta oo ay imaanayaan Machadka, arrintaani ma khusayso ardayda cusub oo aan markaas weli labis la siin. Ardayga aan ku imaan dharka waxaa ka go'aysa gunno fiiro lifaaq No. 7 Agaasimaha Machadku waa ka dayn karaa ardayda inay soo labistaan dharka Machadka fagaarayaasha khaaska ah oo keliya.

6. Gelidda fasallada.

Ardayda looma oggola inay galaan fasaalada iyo qolalka aan ahayn fasalladooda iyagoo aan fasax ka wadan qof ka mid

7. Ka bixidda Fasallada:

Ardayda looma oggola inay ka baxaan fasalka wakhtiga dersigu socdo iyagoo aan ka wadan fasax qofka ama macallinka x sadda leh.

8. Cabidda Sigaarka

In sigaar lagu cabbo fasallada, laababka, qololka hawlgacmeedka iyo Makhaasiinada waa reeban yihiin, marka laga reebo wakhtiyada imtixaanada qoraalka ah lagu jiro oo uu baruhu u ogolaado inay iskaga hoos cabbaan.

9. Buugta/Wargeysyada/Joornaalada.

Ardayda looma oggola inay soo qaataan wax buug ah, wargeysyo iyo joornaalo toona kuwaas oo aan ahayn kuwa looga baahanyahay waxbarashadooda, haddii lagu arko buug, wargeys ama joornaal waa laga qaadi doonaa qalabka Machadka ayaana lagu dari doonaa.

10. Qalabka iyo Tuulka:

Ardayda ayaa masull looga dhigayaa loona xilsaarayaa xafidaadda iyo haynta qalabka, buugta iyo tuulka loo qaybiyo. Shay dibedda loogama saari karo iyadoo laga haysan ruqsad Agaasimaha Machadka. Haddii shay Machadku ku lumo ama ku dhaawacmo arday, ardayga ama ardayda ay khusayso waxaa la weydiin karaa inay soo mag-dhabaan ama beddelkiisii keenaan.

11. Isticmaalka Telefonka

Ardaydu ma isticmaali karto telefoonka iyagoo aan ruqsad ka wadan Agaasimaha Machadka. Ruqsadaasna waxaa uun la bixin karaa marka wax khatar ahi jiro ama deg-deg ah.

12. Dhaawacyada Shaqada Dhexeedda ah.

Ardayda dhaawac gaaro iyadoo fasalka lagu jiro waa inay xaaladda isla markiiba gaarsiiyaan baraha xiisadda isla leh.

13. Jiro Inta Shaqada lagu jiro:-

Ardayda jiro kedis ahi ku timaado iyagoo fasalka ku jira ama Machadka gudihiisa jooga waa inay markiiba gaarsiiyaan barahooda, isla markiibana haddana la soo gaarsiiyaa Agaasimaha Machadka, si wax looga qabto oo takhtar loogu geeyo

14. Guud ahaan.

Ardayda waxaa laga filayaa inay ku dhaqmaan warqaddaan ruuxeeda iyo sharciyadaanba.

NIDAAMKA GUDDIGA

a) Nidaamka caamka ee guddiyeed ayaa xukuma ama ay ku dabbiqi doonaa ujeeddooyinkooda iyo shaqada guddi farsameedka xiriirinta.

1. Ajendaha shirka waxa sii diyaarin doona Guddoomiyaha shirka wuxuuna u gudbin doonaa xubnaha guddiga hal asbuuc ka hor intaan shirka la isugu imaan. xubnaha doonaya in ajendaha wax lagu daro wuxuu qoraal ahaan ku soo gaarsiinayaa guddoomiyaha toban casho ka hor intaan shirka la isugu imaan. Waxaa arrimaha looga hadli doonaa siday ajendaha ugu kala horreeyaan.
2. Shirarka khaaska ah mooyee, wuxuu guddigu marka hore ka wada xaajoon doonaa arrimihii iyo qodobadii shirarkii hore.
3. Arrimaha aan ajendaha ku jirin waxa laga hadli karaa oo keliya marka arrimaha ajenduhu dhammaadaan oo uu guddoomiyuhu yiraahdo, wax kale.
4. Shirarka khaaska ee guddiga waxa lagu soo qaadayaa oo keliya arrimaha keenay shirkaas aan caadiga ahayn, Foodna waa loo qaadi doonaa haddii ay lagama maarmaan noqoto.
5. Dood kasta xubin guddiga ka tirsani soo jeediyo waa inuu taageeraa qof kale oo guddiga xubin ka ah si looga hadlo dooddaas, doodda uu soo jeediyo guddoomiyuhu looma baahna in xubin kale taageerto.
6. Kabidda dood kasta ee xubin guddiyeed soo jeediyo waa in xubin kale oo guddiga ka tirsani taageertaa.
7. Wakhti habboon ayaa guddoomiyuhu siin doonaa falanqeynta doodaha iyo wixii kabid ahba.
8. Marka doodaha iyo kadibaha loo cod bixinayo, kabidaha ayaa marka hore loo cod bixin doonaa. Haddii ay jiraan wax ka badan hal kabid, kabidlii ugu dambaysey ayaa loo cod bixin doonaa.
9. Haddii kabid doodeed guddigu isku raaco, cod bixin looma samayn doono wixii kabid ah oo la keeno ama cod bixin doodii asalka ahayd.
10. Socodsiinta doodeed ama kabineed waxay ku xirmaan doontaa aqlabiyada gacmaha oo la taago xuhnaha guddiga oo dhammi. iyadoo lagu darayo guddoomiyaha, waxay xaq u leeyihiin inay cod bixin dhiibaan, cod bixintaas oo ama taageero ah ama ka soo horjeeda kabid ama dood, xubin kastaa waxay kaloo xaq u leedahay inay ka aamusto cod bixinta.
11. Haddii tirada taageerayaasha iyo kuwa ka soo horjeedaa kabid ama dood ay isla ekaadaan, guddoomiyaha Guggidu wuxuu xaq u leeyahay hal cod bixin oo kale inuu dhiibto haddii uu doono.

12. Natiijada bixinta codka waxa loo sheegi doonaa xubnaha guddiga marka codadka la tiriyi ka bacdi, iyadoo isla markiiba xoghaynta shirku ku darayso warbixinta qararaadka.

b) Guddi Farsameedka Qiimaynta:
Guddigani wuxuu mas'uul ka noqon doonaa:

1. Ilaalinta guud oo ay ku sameeyaan imtixaanada oo dhan ee Machadka, iyagoo fiiro gaar ahaaneed siinaya heerarka, waxyaallaha imtixaandaasu ka kooban yihiin iyo ujeeddada cad ee ay imtixaanadu leeyihiin.

2. Qiimaynta natiijooyinka imtixaanada kama-dambaysta ah oo dhan oo ku saabsan Tababarrada Isgaarsiinta guud ee asaasiga ah imtixaanada dhexe iyo kuwa kamadambaysta ah oo dhan ee tababarada Takhasuska Qalabka iyo imtixaanada kama-dambaysta ah tababarada xirfadeed ee gaagaaban ee waafaqsan ujeeddooyinka Lifaaqa No. 5.

Guddigu wuxuu ka koobnaan doonaa xubnaha soo socda:

1) Agaasimaha Machadka (Guddoomiye)
2) Ku-xigaha Agaasimaha Machadka
3) Madaxa Faraca Tababarka
4) Maareeyaha Mashruuca ee IYU
5) Bare Waaya arag ah ee ka tirsan ITU
6) Horjoogaha kooxda Iskaashiga Tababarrada ee GDR

Guddigu wuxuu kulmi doonaa ka bacdi markay dhammaadaan pp: a qaado, toxaanada dhexe iyo imtixaanada kamadambaysta ah, iyo mararkii kale oo Agaasimaha Machadku is yiraahdo waa Munaasib.

Shirarka Shaqaalaha Machadka:

Marka laga yimaado shirarka caadiga ah ee guddiyada Machadka,shir guud oo ay barayaasha Machadku ka soo wada qayb galaan ayaa la qaban doonaa asbuucii ama 14kii cishaba marba sida habboon iyadoo uu guddoominayo Agaasimaha Machadku shirarkaas waxa tixgelin doonaan socodsiinta hawlmaalmeedyada iyo habaynta Machadka iyagoo la kaashanaya tibaaxyaha ay guddiga xiriirinta farsameedku dejisay, warbixinta shirarka barayaasha waa la xafidi doonaa waxaa loo soo gudbin doonaa xubnaha shaqaalaha Machadka oo dhan koobi walba ee warbixineed waa in lagu ridaa galka shirarka ee Machadka. Horjoogayaashaa ardayda ee tababarada ka geddisan oo Machadka wax ka dhigta goobjoogayaal ahaan ayaa looga soo qayb gelin haddii loo baahdo.

MAXKAMADDA GOBOLKA W/GALBEED

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDU,

MARKUU Akhriyey arjiga taariikhdiisu tahay 14.8.78, ee uu soo qortay L/Xidigle MAXAMED CILMI FAARAX, kuna codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeegga Wareega ee L.Y. 116453 Taariikh 12.8.78 Sh So. 41.000 (Afartan iyo Kow Kun) ee ku qoran magaciisa, lagana sameeyey Bankiga Ganacsiga Ummada Laanta Boorame.

MARKUU Arkay taarka L. Y. 112, taariikh 16.1.1979 ee uu soo diray Laanta Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka ee Boorame, kuna caddeeyey jiritaanka jeegaasi.

WUXUU Ogolaaday cusboonaysiinta jeeggu niay waajib tahay. isagoo tix-geliyey cadaynta qoraalka ah ee Bankiga Sameeyey Jeegga.

WUXUU Garawsaday in L/Xidiglaha loo cusboonaysiiyo jeegga isaga ah ka dhumay.

WAXAA LA AMRAYAA

In Bankiga ganacsiga iyo kaydka Boorame uu u cusboonaysiiyo Jaalle L/Xidigle Maxamad Cilmi Faarax jeegga lambarkiisa iyo lacagtiisuba kor ku sheegan yihiin, 15 (Toban iyo shan), maalmood ka dib markii qaraarkaan lagu soo saaro FAAFINTA RASMIGA ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, haddii inta ka horraysa mudadaa uusan cadayn iyo cabasho qoraal ah ka keenin ciddii haysta jeegga isaga ah:-

WAXAA LA FARAYAA

Codsadaha inuu deg deg u gaarsiiyo maqalka qaraarkaan Bangigii Sameeyey jeega kor ku sheegan, amase Bankii ugu dhow meesha isagu uu deggan yahay si Buugtaasi ugu dhejiyay maqaallada qaraarkaan irdohooda 15 maalmood, meelaha dadweynuhu ka eegan karo ee u furan.
Hargeysa 29. 1.1979

KAALIYAHA MAXKAMADDA
Jaalle Siciid Axmed Ismaaciil

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA
Jaalle Yuusuf Xaaji Cabdi

L. 151

OGEEYSIIS ISU IMAATIN CAADI AH

SHINEEMA «HODAN» S. P. A. Saldhigeedu yahay Muqdisho, Ra'sumaalkeedu yahray Shs. 300.000/= waxa ogeeysiineysaa

Dadka qeybaha ku leh Shirkadda Shineema Hodan S.P.A. ee saldhigeedu yahay Muqdisho in ay ka soo qayb galaan shir Guudnimo ee Caadi ah laguna qabandoono saldhiga Shirkadda, maalinta bishu tahay 20 Maajo 1979 saacaddunatahay 9,00 subaxnimo, haddii suura gal noqonweydo shirku waxa mar labaad la qabandoonaa 15.6.79; isla saacadda kor ku xusan.

ARRIMAHA LAGA DOODI DOONO

1) Xogwaranka Guddiga Maamulka Guud iyo Baarayaasha
2) Hordhrigga Xaashida Miisaaniyadda iyo dheefta.

Waxaa xaq u leh inay ka soo qayb galaan fadhiga dadka ku qoran Buugga Shirkadda ilaa shan beri ka hor maalinta la isu imaanayo.

Muqdisho 28.2.1979

GUDDIGA MAAMULKA GUUD

L. 152

SOMALI BOTTLING COMPANY Ujeeddo: Digniin isku yeerid ah

Dhamaan waxaa loo yeerayaa Saamileyda Shirkadda Somali Bottling Company in ay iskugu yimaadaan Shirweyne caadi ah iyo mid aan caadi aheyn 15ka Luulyo 1979, saacaddu markey tahay 16ka P. M. (4ta Galabnimo), Xarunta Hargeysa.

Sida Qodobbada Xeerka Madaniga ah, waxa laga hadli doona arrimaha hoos ku qoran:

1) Dhinaca caadiga ah uruurinta Xisaabaadkii maalgelinta iyo dhismaha iyo oggolaanshaha Miisaaniyadda.
2) Dhinaca aan caadiga ahayn, siyaadinta maaliyadda, oggolaanshaha Saamiga Shirkadda in lagu daro dad cusub, ama la diido iyo habeyntii dadkii hore wixii aan si sharci ah ugu jirin Shirkadda sida Qodobka 2441 X.M
3) In la doorto Guddiga Maamulka iyo Guddiga Hantidhowrka.
4) In laga hadlo wixii arrimo ah ee loo baahan yahay oo la xiriira kuwa kor ku xusan.

MAAMULKA SHIRKADDA EE KU M.

Muqdisho 10.6.1979

L. 152/BIS

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad — Muqdisho 25 Maarso 1979 L. 1 R 3

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada | D S.

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

QIIMADU: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sanadii waa Sh. 100 Somaliya gudeheeda — dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiis'o waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janayo. Qiimaha qortitaanku F.R. nalkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — **Lacagta waxaa lagu bixinayaa** Xafiska Canshuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHAHRCI

SHARCI L. 8 ee 21 Feb. 79, Wareejin Xil Ganacsi Xoolo. L. 232

QAYBTA LABAAD

M.W.

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Bed Naado Dhul Jaalle Yuusuf Cali Tahar L. 150

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Bed Naado Dhul Jaalle Cusmaan Xaaji Cumar L. 151 L. 234

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Bed Naado Jaalle Kinsi Maxamed Cabdi iyo Cabdi Bootaan Cilmi L. 152

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Bed Naado Dhul Jaalle Aadan Cusmaan Maxamed L.153 L. 235

WASAARADDA H. GUUD, 13.11.1978, Bed. Naado Dhul Jaalle Xasan Maxamuud Maxamed L. 154

WASAARADDA H. GUUD, 13.11.1978, Bed. Naado Dhul Jaalle Axmed Sheekh Yuusuf L. 155 L. 236

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Cali Faarax Gadiid L. 156 L. 237

Wakaaladda Madbaaddu Qaranka ...

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Sheekh L. 157

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Jaamac Yacquub L.158 L. 238

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Safiya Aadan Nuur L. 159

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Maxamed Saban Nuur L. 160 L. 239

WASAARADDA H. GUUD, 3.12.78, Bed. Naado Dhul Jaalle Shariif Cabdulqaadir Abuukar L. 161

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Adna Shukri Aadan Ismaciil L. 162 L. 240

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Caydiid Dagaal L. 163

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Cabdulaahi Warsame Siyaad L. 164 L. 241

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Cabdi L. 165

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Cadar Cabdullaahi Nuur L. 166 L. 242

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Yuusuf L. 167

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Gardheeye Maxamuud Samantar L. 168 L. 243

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Yuusuf Xasan L. 169 L. 244

WASAARADDA H. GUUD, 18.11.78, Naado Dhul Jaalle Axmed Caydiid Dagaal L. 170

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Maxamed Yuusuf Nuur L. 171

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Maxamed Xaaji Cali L. 172 L. 245

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Jaamac Axmed Xuseen L. 17

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Dennis Antooy Mariano L. 174 L. 246

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Jaamac Dirir Guuleed L. 175

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Cabdi Maxamed Rodol L. 176 L. 247

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Faarax Aadan Ismaaciil L. 177

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Maxamed Warsame Barkhadle L. 178 L. 248

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Axmed Xasan Saalax iyo Sali Cabdi Ciise L. 179

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Ayaan Maxamed Maydhane L. 180 L. 249

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Cusmaan Nuur Yoonis L. 181

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Sheekh Ciise L. 182 L. 250

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Axmed Ducaale Qaalib L. 183

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Cabdullaahi Taabid Axmed L. 184 L. 251

WASAARADDA H. GUUD, 27.11.1978, Naado Dhul Jaalle Kislaiine Antoy Mariano L. 185 L. 252

WASAARADDA H. GUUD, 4.1.1979, Naado Dhul Jaalle Cabdi Nuur Weheliye L. 186

WASAARADDA H. GUUD, 4.1.1979, Naado Dhul Jaalle Kaaha Cabdi Maxamed L. 187 L. 253

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAAADIR,17.3.79, lumid Buug K. L. 1312 ku qoran Shs. 6.055,05 u leeyahay Cabdulqaadir Maxamed Cumar L. 189 L. 254

MAXKAMADDA GOBOLKA BENAADIR, 25.3.79, lumid Jeeg War. L. 696181 ku qoran Shs. 4 000/= u leeyahay Barakaale Maxamed Diini L. 190 L. 255

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG 21.3.79 lumid Buug Kayd L. 1926 oo uu leeyahay Axmed Sh. Xuseen L. 191 L. 156

SOCIETA' INCREMENTO PRODUZIONI AGRICOLE — S.P.A. — Saldhigga Shalambood - Raasumaal Shs.So. 8.112.000

OGEYSIIS ISU YEERID SHIR CAADI AH L. 192

QAYBTA 1AAD

S H A R C I

SHARCI L. 8 ee 21 Feb 79 wareejin xil Ganacsi Xoolo

MADAXWEYNAHA J.D.S.

ISAGOO ARKAY Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21.10.1969;

ISAGOO ARKAY Sharciyada Lamb 17 18 iyo 19 ee 1da Luulyo 1976 oo ku saabsan Maamulka Xukunka Dalka oo loo wareejiyay Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

ISAGOO AQOONSADAY Intay tahay lagama maarmaan in Ganacsiga ee Gobolka Jubada Hoose ee raacsanaan jirtay Wakaaladda Horumarinta Xoolaha loona wareejiyay Warshadda Hilibka ee Kismaayo lagu soo celiyo Wakaaladda Horumarinta Xoolaha;

ISAGOO TIXGELIYAY Go'aankii Guddiga Siyaasadda ee X.H.K.S. iyo kan Golaha Wasiiradda.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

Laanta Ganacsiga Xoolaha oo raacsan Warshadda Hilibka Kismaayo laguna tilmaamay sharciga L. 68 ee 17 Oktoobar 1977, waxaa loo wareejiyay Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (LDA) oo yeelanaysa awoodda iyo Xilka ganacsiga Xoolaha Dalka gudahiisa ama dibadiisa.

Qod. 2aad

Shaqaalihii ka tirsanaan jiray Laanta Ganacsiga ee Warshadda Hilibka waxaa loo wareejiyay Wakaaladda Horumarinta Xoolaha.

Wixii Xoolo ama qalab ah ee Warshaddu kala wareegtay «LDA» Ganacsig Xoolaha daraadeed, waa in dib loogu celiyo «LDA», ayaduna ay bixiso qiimahooda.

Sidoo kale wixii lacag ah ee Warshadda looga goostay ganacsiga Lo'da awgeed, waa in dib loogu celiyaa.

Qod 3aad

Xil wareejin iyo qiimeynta xoolaha iyo Qalabka lala kala wareegay waxa tali doona guddi oo ay isla wada-dhisaan Wasiirka Wasaaradda Warshadaha iyo Wasiirka Xoolaha. Dhirta

Qod. 4aad

Shaqaalaha Laanta Ganacsiga Xoolaha lagu tilmaamay qod. 2aad ee sharcigan xuquuqdooda qaynuuniga ah iyo kuwa dhaqaaleba waxay ku yeelanayaan Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (LDA), gaar ahaan wixii ku saabsan Liilitirkooda iyo Howlgabkooda muddada ay u shaqaynayeen warshadda Hilibka ee Kismaayo.

Qod. 5aad

Waxaa la buriyey sharci ama xeer kasta oo ka soo horjeeda sharcigan ama aan la socon karin gaar ahaan qod 4aad ee sharciga 68 ee 17 Oktoobar 1977 oo laanta Ganacsiga ee Wakaaladda Horumarinta Xoolaha (LDA) ee Gobolka Jubada Hoose ku wareejiyay maamulkeeda iyo Xilkeeda Warshadda Hilibka Kismaayo.

Qod. 6aad

Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa laga bilaabo 1 Jennaayo 1979.

Sharcigan waxaa lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 21 Febraayo 1979

MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE)

QAYBTA 3AAD

TALOCYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
BEDDELAAD DHAADO DHUL
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Yuusuf Cali Tahar maalintii 28.8.1977, loona oggolaaday oo ku yaal Muqdisho — Degmada Waaberi Jidka uu iska beddelay cabbirkii hore qaabkiisu ahaa Regtangolar addimihiisuna ahaayeen 30X25 kuna fadhiya mq. 750 sababtoo ah Qorshaha dhulka oo is beddelay.

Xafiiskaan, waxay isu beddeshay sida hoos ku tilmaaman:-

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallayaashaas qaabkiisu waa Regtangolar addimihiisuna yihiin 40X25 kuna fadhiya mq. 1000

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

WAQOOYI waxaa ka xiga:- Dhul dad leeyahay
Koonfur waxaa ka xiga: JID
Galbeed waxaa ka xiga:- Cusmaan Xaaji Cumar
BARI waxaa ka xiga: JID
18 November 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 150

WAAXDA SHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
WASAARADDA HAWLAHA GUUD
BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cusmaan Xaaji Cumar yare Maalintii 3.7.1968 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmadda Wadajir Jidka Madiina uu iska bedelay Cabirkii hore qaabkiisu ahaa Regtangolar Addimihiisu ahaayeen 30X55 kuna Fadhiya 1650 Mdh. Sababtoo ah Qorshihii dhulka oo is bedelay.

Sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda Lamberkeedu ahaa WHG/3/23/717 ee 11.6.78. kana baxday Xafiiskaan waxay isu bedeshay Sida hoos ku tilmaaman.

Rasmi ahaan dhulka haatan la siin karo Jaallayaashaas Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna yihiin 40X55 lana mid ah 2,200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul Dad leeyahay
Koonfur waxaa ka xiga: JID
Galbeed waxaa ka Xigga: Dhul Dad leeyahay
BARI waxaa ka xiga: Yuusuf Cali Tahar
18 Nofeember 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 151

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
BEDDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Kinse Maxamed Cabdi iyo Cabdi Bootaan Cilmi Maalintii 14.5.1961 locna oggolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmadda Waaberi Qaabkiisu ahaa Regtangolar Addimihiisu ahaayeen 52,30,46 kuna fadhiya 1547,50 Mdh. looga qaatay dan guud laguna Beddelay Dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmadda Waaberi Jidka Madiine

Sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda Lambarkeedu ahaa 670717 oo 2.5.1961 oo ka soo baxday Xafiiska waxy isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay Dhulkii looga qaaday danta guud waxuu yaal Muqdisho Degmada Waaberi jidka Madiina qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 30X40 kuna fadhiya 1,200 Mdh.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA
Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lambar 852/78.
Koonfur waxaa ka xiga: WADDO
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 189/75.
BARI waxaa ka xigga: WADDO
18 Nofeember 1978
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED
L. 152

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
BEDDELAAD DHAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Aadan Cusmaan Maxamed Maalintii 12.5.1969 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmadda Hodon qaabkiisu ahaa Regtangolar Addimihiisu ahaayeen 43,20X56 kuna fahdiya Mdh. looga qaatay dan guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmadda Kaaraan Jidka Balcad

Sidaas aawadeed Naadadii hore oo lagu soo diray warqadda Lambarkdeeu ahaa 11821 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay Sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday Danta Guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 30X40 kuna fadhiya 1,200 mdh.

Waqocyi waxaa ka xiga : Waddo
Koonfur waxaa ka xiga : Dhul lamb. 141-142 B.-
Galbeed waxaa ka xiga : Waddo
Bari waxaa ka xiga : Waddo
Muqdisho 18 Nofembar 1978

AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED
L. 153

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALEYNTA
BEDELAAD NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Xasan Maxamuud Maxamed maalintii 18/7/67kii loona Ogolaaday oo ku yaal Muqdisho Degmada Wardhiigley Qaabkiisu Ahaa Bollo Addimihiisuna ahaayeen 30X10X25X15X14X26. kuna fadhiya 1877, Mdh.

looga Qaatay Dan Guud looguna Bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Jidka Sidaa awgeed naadadii hore loogu soo diray Warqadda lambarkeedu ahaa oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga Qaaday Danta Guud wu xuu ku yaal Muqdisho Degmada Cabdulcasiis Jidka Qaabkiisu waa Regtangolar Addimihiisuna waa 40X30 kuna fadhiya 1.200 Mdh.-

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 1021/60
Koonfur waxaa ka xiga: WADDO
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lamb. 1248/60
BARI waxaa ka xiga: Dhul lamb. 938/58.

Muqdisho 13 Nofeember 1978

Xubnaha Xafiiska Aftida ee Degmada waxaa magacaabaya Guddiga Qaranka ee Aftida, isagoo dhegeystay talada Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada.

Haddii ay yimaadaan arrimo deg-deg ah ee lagama maarmaan ka dhigaya wax ka beddel dadka kor ku xusan, waxaa tillaabo ka qaadaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka.

Qod. 11aad

(Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida)

Guddiga Xafiiska Dhexe ee Aftidu wuxuu ka koobmaa Guddoomiye, Guddoomiye Ku-xigeen, 3 Kaaliye iyo hal Xoghaye.

Xafiisku wuxuu yeelanayaa 4 qof oo qaabilsan tirada. Xubnaha Xafiiska Dhexe ee Aftida waxaa lagu magacaabayaa Xeer Madaxweyne.

Qod. 12aad

(Wargelinta xilka iyo dhaarta)

Qof kasta oo loo magacaabo inuu xubin ka noqdo hay'adaha Aftida lagama cafin karo, haddii aysan jirin sabab la garawsan karo; ka cafiska waxaa awood u leh hay'adii awal qofka magacawday.

Magacaabidda waa in la gaarsiiyaa dadka ay khu-

soyso ugu yaraan 15 maalmood ka hor taari[illegible] a Aftida.

Intuusan xilka qaban, xubin kastoo ka[illegible] ah Guddiga Goobta codbixinta, Xafiiska Degmad[illegible] a Xafiiska Dhexe ee Aftida, wuxuu marayaa dhaart[illegible] socota:

«WAXAAN MAGACA ILAAHAY KU MARAYAA IN AAN XILKA LA II DHIIBAY EE LA XIRIIRA AFTIDA DASTUURKA KU GUTO NIYADSAMI, DAACADNIMO, SI EEXXDANA U DHOWRO SHARCIGA».

Qod. 13aad

(Diyaarinta Goobaha codbixinta, Xafiisyada Degmooyinka iyo kan Dhexe ee Aftida)

Diyaarinta Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka waxaa u xilsaaran Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada. Diyaarinta Xafiiska Dhexe ee Aftida waxaa u xilsaaran Cuddiga Qaranka ee Aftida.

Qod. 14aad

(Tilmaamidda Goobaha codbixinta iyo Xafiiska Aftida ee Degmada)

Ugu dambeyn labaatan maalmood ka hor taariikhda Aftida, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa inuu ogeysiiyaa Dadweynaha tirada iyo meelaha ay ku yaalaan goobaha codbixinta iyo Xafiiska Aftida ee Dagmada, isagoo isticmaalaya daabacyo lagu dhejiyo meelaha dadweynuhu ku kulmo, boorar, shirar, kulammo iwm.

XUBINTA IV

QALABKA CODBIXINTA

Qod. 15aad

(Qalabka Goobta codbixinta iyo Xafiisyada Aftida iyo xaashiyaha codbixinta ee keydka ah)

Guddiga Qaranka ee Aftidu waa inuu u diyaariyaa goob kasta oo codbixin qalabka soo socda:

1) hal nuqul oo Dastuurka ah;

2) hal nuqul ee Sharcigan;

3) kolay ningaxan oo ay ku jirto shaabadda Goobta codbixinta oo wadata khad iyo khadeeye;

4) kolay ningaxan oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta;

5) sanaadiiq;

6) saxaarad loogu tala galay xaashiyaha codbixinta;

7) seddex diiwaan oo loogu tala galay hawlaha goobta codbixinta;

8) hal dhalo oo ah khadda aan tirmeyn;

9) shan xabbo halkudhegyo oo dadweynaha loogu tilmaamayo sida loo codbixinayo;

10) qalabka xafiis iyo wixii kale ee lagama maarmaan ah.

Waxaa kale oo Guddiga Qaranka ee Aftidu diyaarinayaa kolayo ningaxan oo ay ku jiraan shaabadda, khadda iyo khadeeyaha, warqadaha tirinta, diiwaannada, qalabka iyo daabacyada kale ee looga baahan yahay Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka iyo kan Dhexe.

Qalabka goob kasta ee codbixin iyo kuwa xafiisyada Aftida ee Degmooyinka, waa in lagu uruuriyaa saxaarado gaar ah, oo xiran, ningaxanna, lana·gaarsiiyaa waqti ku habboon, ayagoo ay la socdaan sanaadiiqdii, Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka.

Guddiga Qaranka ee Aftidu wuxuu isla mar ahaantaas u diyaarinayaa Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinka, iyagoo kolayo ningaxan ku jira, tiro ku habboon oo ah xaashiyo codbixin oo keyd ah, kuwaasoo loogu talagalay Goobaha codbixinta ee ay suurtowdo in baahidoodu ka badato kuwii ay heleen. Xaashiyahaas Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga ee Degmooyinku maalinta codbixinta waxay ku bixin karaan weydiis qoraal ah, sababna leh, ee ka yimaadda Guddoomiyaha Guddi-

ga Goobta codbixinta, ayna saaran tahay shaabadda Goobtu.

Haddii ay jiraan dhibaatooyin gaar ah ee la xiriira isgaarsiinta, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu ku aamini karaa kolayadaas qof wakiil ka ah, wuxuuna u dhiibayaa maalin ka hor taariikhda Aftida si loogu hayo Guddoomiyayaasha Goobaha codbixinta ee ku yaalla meelo ka fog Magaala madaxda Degmada.

Qod. 16aad

(Shaabadda, diiwaannada, xaashiyaha codbixinta, sanaadiiqda codbixinta, warqadaha tirinta)

Shaabadaha Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida, xaashiyaha codbixinta, diiwaannada, sanaadiiqda codbixinta, warqadaha tirinta waa inay isku nooc ahaadaan dalka oo dhan. Shaabaduhu waxay leeyihiin lambar u gaar ah ee ku socda tiro taxan.

Qod. 17aad

(Xaashiyaha codbixinta)

Xaashiyaha codbixinta ee Aftidu waxay ka sameysan yihiin warqad cad oo boolleetooyin laga jari karo ku dheggan midkiibana boqol xaashi ku yaalliin. Cadka ku haraya bolleetada wuxuu leeyahay lambar u gaar ah oo taxan.

Qod. 18aad

(Ilxirrada iyo sanaadiiqda)

Goob kasta ee codbixin wuxuu Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu ka diyaarinayaa laba ilxir oo u habeysan si kafaalaqaadeysa qarsoodida codka.

Ilxir kasta waa in la dhigaa laba sanduuq oo mid bluug xiddig cad leh yahay, looguna tala galay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee oggol Dastuurka, kan kale-

na uu huruud yahay, looguna talagalay in lagu rido xaashiyaha codbixinta ee diiddan Dastuurka.

Midabbada sanaadiiqdu waa inay ahaadaan kuwo aan tirtirmeyn.

Sanduuqa buluugga ah dushiisa waa in lagu dhigaa «HAA». Kan huruudda ah na «MAYA».

Qod. 19aad

(Tilmaamidda habka codbixinta)

Nuqul ah halkudhegga ku tilmaaman lambarka 9aad ee Qod. 15aad waa in lagu dhejiyaa meel dadweynuhu arki karo, dibadda iyo gudaha goobta codbixinta. Sidoo kale waa in lagu dhejiyaa ilxir kasta gudihiisa.

XUBINTA V

CODBIXINTA

Qod. 20aad

(Gaarsiinta qalabka Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida ee Degmada)

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu waa inuu gaarsiiyaa lix saac ka hor waqtiga loogu tala galay bilowga Aftida Goob kasta ee codbixin saxaaradda iyo sanaadiiqda codbixinta.

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu kaloo gaarsiinayaa inta ka horreysa 4ta galabnimo ee isla maalintaas Xafiiska Aftida ee Degmada saxaaradda loogu tala galay. Wuxuu hubinayaa in la gaarsiiyey Goob kasta ee codbixin, ama xafiiska Aftida ee Degmada nuqul warqadda magacaabidda Xubnaha Guddiga Goobta codbixinta ama kan Xafiiska Aftida ee Degmada.

Qod. 21aad

(Dhisidda Goobta codbixinta)

Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixintu markii uu helo qalabka ku tilmaaman qodobka hore:

1) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Goobta codbixinta isagoo u yeeraya inay ka soo qayb galaan Kaaliyaha iyo Xoghayaha;

2) Kaddib markuu xaqiijiyo tusana xubnaha kale ee Goobta codbixinta dhammida ningaxa, wuxuu furayaa saxaaradda asagoo ka soo saaraya hubinayana qalabka ku jira inay dhan yihiin:

3) Kaddib markuu xaqiijiyo tusana xubnaha kale dhammidda ningaxa, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabada goobta codbixinta iyo kan warqadaha codbixinta, wuxuuna ku ridayaa saxaaradda loogu talagalay: lambarka shaabada iyo kan xaashiyaha codbixinta waxaa lagu tilmaamayaa diiwaanka;

4) Wuxuu xaqiijinayaa tusayaana xubnaha kale inay sanaadiiqdu maran yihiin, kaddibna dib ayuu u xirayaa waana ningaxayaa, asagoo u dhaafaya keliya daloolka looga ridayo xaashiyaha codbixinta; sanduuq kastana waa inuu dhigaa ilxirka loogu talagalay;

5) Wuxuu soo bandhigayaa hal nuqul oo ah Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya si dadweynuhu u arko;

6) Wuxuu u gudbinayaa qalabka intiisa kale Xoghayaha;

7) Wuxuu hubinayaa in qalabka codbixinta loo naqaamiyey si hawlaha Aftidu habsami ugu socon karaan.

Hawlahaas gogoldhigga ah waa in lagu fuliyaa waqtiga ugu yaraan saddex saacadood ka hor furitaanka codbixinta, dabadeedna Guddoomiyuhu wuxuu ku [illegible] waaqayaa furitaanka codbixinta.

Qod. 22aad

(Awoodda ilaalinta nabadgelyada ee Guddoomiyayaasha Guddiga Goobaha Codbixinta iyo Xafiisyada Aftida)

Guddoomiyaha Guddiga Goobtu wuxuu u xilsaaran yahay ilaalinta nabadgelyada meelaha dadweynahu ku soo ururayo, wuxuuna adeegsanayaa Ciidammada Nabadgelyada si uu uga fogeeyo ama u xiro qofkii dhibaato u geysanaya habsamida hawlaha Aftida amaba dembi gala.

Hawlwadeennada Hay'adaha Dowladda iyo Taliyayaasha Ciidammada Nabadgelyadu waxay fulinayaan awaamirta Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixinta si loogu suurtageliyo codbixiyaasha gelitaanka goobta lagana ilaaliyo agagaarka Goobta codbixinta hordhoobasho sabab la'aan ah.

Awoodaha kor ku xusan kuwo la mid ah waxaa leh Guddoomiyayaasha Guddiyada Xafiisyada Aftida ee Degmooyinka.

Qod. 23aad

(Gelitaanka Goobta Codbixinta)

Marka laga reebo xubnaha Guddiga Goobta codbixinta, waxaa keliya oo geli kara goobta qofka leh xaqa codbixinta.

Codbixiyayaashu waxay Goobta u gelayaan mid mid ayagoo isu xigsanaya sida ay u soo kala horreeyeen.

Codbixiyayaashu Goobta codbixinta lama geli karaan hub ama qalab kale oo wax dhibi kara.

Qod. 24aad

(Cggolaanshaha codbixinta)

Mawaadin kasta wuxuu ka cod bixin karaa Goobtu rabo, kaddib:

1) markuu caddeeyo magaciisa iyo da'diisa;

2) marka laga aqoonsado goobta inuu yahay qof leh xaqa codbixinta. Go'aankaas waxaa lagu gaarayaa si deg-deg ah iyo hab gaaban, ayadoo la tixgelinayo qorallc markhaati iyo wixii kale oo caddeyn waxtar leh ah.

Gacanta bidixda, ama haddii aysan jirin, tan midigta amaba, haddii labaduba maqan yihiin, meel kaloo la arki karo oo jirkiisa ka mid ah, waa in calaamad muuqata oo ah khadda aan tirmin laga mariyaa codbixiyaha intaan la siin xaashida codbixinta.

Qod. 25aad

(Qofka xaqa u leh codbixinta ee aan qof ahaan bixin karin codka)

Waxaa codbaxsanaya qofkii xaq u leh ee yimaada qof ahaan goobta codbixinta. Qofkii codka aan dhiiban karin iin jir ee muuqata awgeed loogana aqoonsado Goobta codbixinta inuusan bandhigi karin codkiisa, wuxuu Guddoomiyhu u oggolanayaa inuu kaalmeeyo qof kale oo codbixiyuhu ku kalsoon yahay.

Arrintaasna waa inuu Xoghayuhu ku qoraa diiwaanka ayadoo la tilmaamayo sababta loogu oggolaaday, magaca qofkaas iyo kan kaalmeeyey.

Qod. 26aad

(Habka codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha uu tilmaamayo qod. 24aad Gudoomiyhu wuxuu mid mid u siinayaa codbixiyayaasha xaqa u leh codbixinta xaashiyaha codbixinta oo lagu dhuftay shabadda Goobta loogana jaray bolleetada siday isu lambar xigaan. Codbixiyuhu waa inuu la aadaa ilxirrada codbixinta loo sameeyey midkood. Codka oggolaanshaha Dastuurka waxaa loo dhiibanayaa xaashida codbixinta oo lagu rido sanduuqa bluugga ah kan diidmadana sanduuqa huruudka ah.

Haddii codbixiyuhu arko in xaashida la siiyay ay xun tahay ama ayan dhammeyn wuxuu Guddoomiyaha weydiisan karaa mid kale asagoo soo celinaya tii hore.

Guddoomiyuhu wuxuu amri karaa in laga eryo Goobta Aftida codbixiyayaasha ula kac ugu raaga codbixinta ayadoo laga soo celinayo xaashiyihii codbixinta waxaana loo eggolaan doonaa codbixinta marka inta joogta ay dhammaadaan. Haddii lagu helo codbixiyaha hal xaashi codbixin wax ka badan, ama xaashi ka duwan nooca la isticmaalayo, amaba uu hore u codbixiyey, Guddoomiyuhu wuxuu ka qaadayaa xaashiyaha uu haysto wuxuuna degdeg ugu dhiibayaa Ciidammada Nabadgelyada si loo horgeeyo maxkamad, looguna qaado dacwad ciqaabeed.

Haddii lala kulmo arrimaha ku xusan saddexda faqradood ee kor ku xusan, waxaa lagu qorayaa ayadoo la raacinayo magaca codbixiyaha, diiwaanka Goobta codbixinta: xaashiyaha codbixinta ee qofka laga qaado waa inay saxiixaan Guddoomiyaha iyo ugu yaraan hal qof oo ka mid ah Xubnaha Guddiga Goobta, waana in lagu ridaa kolay u gaar ah.

Qod. 27aad

(Saacadaha hawlaha codbixinta)

Hawlaha codbixintu waxay bilaabanayaan 6da aroornimo waxayna xiriir u soconayaan ilaa 6da fiidnimo.

Haddii loo baahdo codbixinta waxaa la gaarsiin karaa ilaa iyo 10ka fiidnimo. Si kastaba ha ahaatee, inta ay codbixiyayaal taagan yihiin Goobta codbixinta horteeda, hawlaha codbixinta lama xiri karo.

Qod. 28aad

(Gabagabada hawlaha goobta codbixinta)

Marka la dhammeeyo hawlaha ku xusan qodabbada sare, Guddoomiyuhu wuxuu ku dhaqaaqayaa, hakad la'aan hawlaha soo socda:

1) wuxuu ku dhawaa[illegible]yaa codbi[illegible]ftidu in ay xiran tahay;

2) wuxuu xirayaa, ningaxaya[illegible]iqda codbixinta: ningaxa dishiisa waxaa lagu [illegible]ayaa shaabadda Goobta codbixinta, waxaana saxii[illegible]a Guddoomiyaha iyo xubnaha kale ee Guddiga Goob

3) wuxuu hubinayaa diiwaankana[illegible] qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee la isticmaa[illegible]y asagoo ka eegaya boolleetayaasha laga jaray jeexyada ku haray;

4) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee looga qaaday codbixiyaasha:

a) iyagoo xumaa ama aan dhammeyn awgeed;
ed;

b) iyagoo ay codbixiyaashu ula kac ugu raageen codbixinta awgeed;

t) iyagoo codbixiyaasha lagu helay hal xaashi codbixin wax ka badan;

j) iyadoo codbixiyaasha lagu helay xaashiyo codbixin ee aan waafaqsaneyn kuwa sharciga ah;

x) iyadoo la ogaaday inay hore u codbixiyeen;

5) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa tirada xaashiyaha codbixinta ee aan la isticmaalin;

6) wuxuu hubinayaa, diiwaankana ku qorayaa, asagoo sal ka dhiganaya waxyaabaha aan kor ku soo sheegnay, tirada dadka run ahaantii codbixiyey;

7) wuxuu xirayaa diiwaannada hawlaha Goobta codbixinta;

8) wuxuu daabacyadaas kor ku xusan ku ridayaa kolyada u gaarka ah, kuwaasoo uu u xirayo una ningaxayo sida ku xusan lambarka 2aad ee qodobkan;

9) wuxuu ku ridayaa shaabadda Goobta codbixinta kolayga loogu talagalay: ningaxa dushiisana waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan;

10) wuxuu kolayada ku ridayaa saxaarad uu xirayo, ningaxayana: ningaxa dushiisa waxaa la saarayaa saxiixyada ku tilmaaman lambarka 2aad;

11) wuxuu saxaaradaha raacinayaa sanaadiiqda codbixinta.

Qod. 29aad

(Joogista dhammaan xubnaha goobta codbixinta)

Muddada ay socdaan hawlaha goobta codbixintu dhammaan xubnaha Guddigu waa inay joogaan. Waxaa la oggol yahay maqnaasho gaaban, markiiba hal qof, ayadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha Guddiga Goobta.

Qod. 30aad

(Diiwaanka goobta codbixinta)

Diiwaaneynta hawlaha goobta Aftida waa in laga sameeyaa saddex nuqul oo ay wada saxiixaan dhammaan xubnaha Guddiga Goobta. Hal nuqul oo ay la socdaan dhammaan lifaaqyada isaga ku xusan waxaa loogu talo galay Xafiiska Aftida ee Degmada si uu uga guto hawshiisa, labada kalena Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

Qod. 31aad

(Qaadidda iyo dhiibidda qalabka goobta)

Mar alla markay dhammaadaan hawlaha ku tilmaaman qoddobbada sare Guddoomiyuhu, asagoo ay la socdaan ugu yaraan xubin ka mid ah Guddiga Goobta codbixinta, ayna ilaalinayaan Ciidammada Nabadgelyada wuxuu degdeg u qaadayaa una geynayaa Xafiiska Aftida ee Degmada saxaaradda ay ku jiraan qalabka ku tilmaaman qod. 28aad iyo sanaadiiqda codbixinta.

Marka loo dhiibayo saxaaradaha iyo sanaadiiqda, Xafiiska Aftida ee Degmadu waa inuu hubiyaa dhammi-

da ningaxa, laguna qoraa diiwaan laba nuqul ah oo mid uu qaato Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixinta, midka kalena Xafiiska Aftida ee Degmada.

Guddoomiyaha Guddiga Goobta codbixintu waa inuu isla waqtigaas u dhiiba Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada labada nuqul ee diiwaanka Goobta codbixinta ee ku xusan qod. 30aad

XUBINTA VI

HAWLAHA XAFIISKA AFTIDA EE DEGMADA

Qod. 32aad

(Dhisidda Xafiiska Aftida ee Degmada)

Marka la helo qalabka ku tilmaaman qod. 20aad, Guddoomiyaha Xafiiska Degmada ee Aftidu:

1) Wuxuu ku dhaqaaqayaa dhisidda Xafiiska Aftida ee Degmada asagoo ugu yeeraya inay ka soo qaybgalaan Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo u qaybsanayaasha tirada;

2) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale ee xafiiska dhammida ningaxyada, wuxuu furayaa saxaaraddda, ka soo saarayaa hubinayaana, qalabka ku jira;

3) Markuu xaqiijiyo, tusana xubnaha kale dhammida ningaxa la saaray, wuxuu furayaa kolayga ay ku jirto shaabadda Xafiiska, wuxuuna ku qorayaa lambarkeeda diiwaanka;

4) Wuxuu qalabka kale u dhiibayaa Xoghayaha Xafiiska Aftida ee Degmada

Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu dhowrayaa in ay soo gaaraan qalabka ku tilmaaman qod. 31aad.

Qod. 33aad

(Qabashada qalabka Goobta codbixinta)

Qabashada saxaaradaha iyo sanaadiiqda Goobaha codbixinta Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu raacayaa habka ku tilmaaman faqrada 2aad ee Qod. 31aad, ayadoo loo kala hormarinavo sida loo soo kala horreeyey

Qod. 34aad

(Xiridda Xafiiska Aftida ee Degmada kaddib marka la qabto qalabka Goobaha codbixinta)

Xafiiska Aftida ee Degmada lama xiri karo ka hor inta aysan soo gaarin ama aysan tirsan dhammaan qalabka Goobaha codbixinta ee Degmada.

Inta uu xiran yahay Xafiiskku, qofna kuma jiri karo gudihiisa, ilaalintiisana waxaa Guddoomiyuhu u xilsaarayaa Ciidanka Nabadgelyada oo dibadda ka ilaalinaya.

Qod. 35aad

(Bilawga hawlaha tirinta)

Hawlaha tirinta waxay billaabanayaan 8da xubaxnimo ee maalinta xigta tan Aftida, ayadoo la sii dhisayo Xafiiska Aftida ee Degmada. Lama billaabi karo tirinta Goob codbixin, inta ay ka dhammanayaan hawlaha midda markaas faraha lagula jiro. Inta aan la billaabin tirinta Goobta codbixinta, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa saxaaradda, asagoo hubinaya dhammida ningaxa: wuxuu kaloo hubinayaa dhammida ningaxyada kolayada saxaarada ku jira iyo kuwa sanaadiqda codbixinta.

Guddoomiyuhu ka dib markuu cod dheer ku sheego lambarka u gaarka ah Goobta codbixinta iyo meesha ay ku tiil. wuxuu kolayga ka soo saarayaa diwaankii Goobtaas wuxuuna cod dheer ku sheegayaa tirada dadka

dhab ahaan ka codbiyey Goobta sida ku cad isla diwaankaas.

Qod. 36aad

(Kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qodobka hore, Guddoomiyuhu, kaddib marka uu ka gooyo ningaxa, wuxuu furayaa sanaadiiqda bluugga ah ee ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee oggolaaday Dastuurka, ayadoo uu gacan ku siinayo hal Kaaliye.

Xaashiyaha codbixinta ee ku jira sanaadiiqda bluugga ah waxaa looga soo saarayaa midba mar, la hubinayaa, la tirinayaa lana dhigayaa meel gaar ah, iyadoo lagula dhawaaqayo cod dheer hadba tirada guud oo ay gaaran xaashiyaha codbixinta ee oggol Dastuurka.

Marka la dhammeeyo kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta, kuwa oggol Dastuurka waxaa lagu celinayaa sanaadiiqdoodii iyadoo la ningaxayo; kuwa aan ansaxa ahaynna lagu xirayo kolay gaar ah, iyadoo hadba Xoghayuhu calaamadeysanayo tirada codadka.

Ka dib marka uu kaga gooyo ningaxa Guddiga hortiisa, Guddoomiyuhu wuxuu furayaa sanaadiiqda huruudda ah oo ay ku jiraan xaashiyaha codbixinta ee diidday Dastuurka iyadoo la raacayo habka ku xusan faqradda hore.

Xaashiyaha codbixinta waxaa taaban kara oo keliya xubnaha Guddiga.

Qod. 37aad

(Xaashiyaha codbixinta ee aan ansaxa ahayn)

Waxaan ansax ahayn xaashiyaha codbixinta oo ay ka maqan yihiin shaabadda Goobta codbixinta iyo kuwa ay ku yaalliin saxiix, magac, ama calaamado kale ee uu gacantiisa ku qoray codbixiyuhu.

Qod. 38aad

(Wada joogista dhammaan xubnaha Xafiiska)

Muddada ay socdaan hawlaha tirinta xaashiyaha codbixinta, dhammaan xubnaha Xafiiska Aftida ee Degmada waa inay wada joogaan.

Waxaa laysu oggol yahay maqnaasho gaaban, oo sabab laga garaabi karo leh, markiiba hal qof, iyadoo oggolaasho laga haysto Guddoomiyaha.

Qod. 39aad

(Baarista cabashada iyo go'aannada)

Marka ay dhammaadaan hawlaha kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta, Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu baaraya wixii cabasho ah ee la xiriira Goobta codbixinta oo ku soo gaaray si qoraal ah inta ay socotay codbixinta iyo kaddibba wuxuuna Guddigu go'aan kaga gaarayaa cod hal dheeri ah.

Qod. 40aad

(Hubinta natiijada goobta codbixinta)

Marka ay dhammaadaan hawlaha ku xusan qoddobbada hore, Guddoomiyaha Guddiga Xafiiska Aftida ee Degmadu wuxuu:

1) Xaqiijinayaa wixii iskhilaaf ah ee u dhexeeya tirada u soo baxday Xafiiska Aftida ee Degmada iyo tan ku qoran diiwaanka Goobta codbixinta, isagoo muujinaya, haddii ay jiraan, sababaha keenay;

2) Kula dhawaaqayaa cod dheer tirada guud ee codbixiyayaasha, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay iyo kuwa aan ansaxin;

3) Kula dhawaaqaya cod dheer natiijada Aftida isagoo kala sheegaya tirada codadka oggolaaday Das tuurka iyo inta diiday;

4) Ku qorayaa arrimaha kor xusan oo idil diiwaanka Xafiiska Aftida ee Degmada.

Qod. 41aad

(Dib u dhigidda kala shaandheynta)

Hawlaha la xiriira kala shaandheynta xaashiyaha codbixinta ee Goobta codbixinta, mar haddii la bilaabo waa in la dhammeystiraa iyadoo aan la joojin.

Haddii hawlaha xafiiska lagu dhammeystiri waayo maalintaas gudaheeda, Guddoomiyuhu wuxuu dib ugu dhigayaa 8.00 subaxnimo ee maalin xigta.

Qod. 42aad

(Isugeynta natiijada guud ee Aftida Degmada)

Marka la dhammeeyo hawlaha Goobaha codbixinta Degmada ee ku xusan qodobbada hore, Guddoomiyuhu wuxuu:

1) Isugeynayaa guud ahaan tirada codka bixisey, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansaxin, codadka oggolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday ee Goobaha codbixinta Degmadaas;

2) Ku caddeynayaa cod dheer natiijada ku meel gaarka ah ee ka soo baxday Degmada, isagoo kala saaraya tirada oggolaatay Dastuurka iyo inta diiday;

3) Ku ogeysiinayaa natiijadaas, taar ku qoran lambar iyo farba, xafiiska dhexe ee Aftida;

4) Ka buuxinayaa Diiwaan seddex nuqul ah hawlaha laga qabtay Xafiiska Aftida ee Degmada iyo natiijada ka soo baxday, iyadoo ay wada saxiixayaan dhammaan xubnihiisa: mid ka mid ah seddexdaa diiwaan waxaa loo dhiibaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada, kuwa kalena mid waxaa loo dirayaa Maxkamadda

Sare, kan kalena Xafiiska Dhexe ee Aftida iyadoo la raacinaayo kolay gaar ah oo ningaxan oo ay ku jiraan dhammaan wixii cabasho ah ee soo gaaray Xafiiska Aftida ee Degmada, dushiisana lagu qorayo magaca goobta codbixinta ee arrintaasi khuseyso;

5) Dhigayaa qalabka kale ee Goobta codbixinta iyo kuwa Xafiiska Aftida ee Degmada qol gaar ah oo uu tilmaamo Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee degmadu, iyadoo la xirayo, lana ningaxayo si halkaa loogu ilaaliyo, uguna yaallo maxkamadda Sare ilaa iyo inta ay ka ansaxinayso Aftida.

XUBINTA VII

HAWLAHA XAFIISKA DHEXE EE AFTIDA

Qod. 43aad

(Dhismaha Xafiiska Dhexe ee Aftida)

Ka dib marka laga helo Guddiga Qaranka ee Aftida qalabka ku xusan qod. 15aad, Guddoomiyaha Xafiiska Dhexe ee Aftidu wuxuu:

1) Kulminayaa xubnaha kale ee Xafiiska oo ka kooban Guddoomiye ku-xigeenka, Kaaliyayaasha, Xoghayaha iyo u Qaybsanayaasha tirada;

2) Ka dib marka ay xaqiijiyaan isaga iyo xubnaha kale ee Xafiiska dhammida ningaxyada qalabka, wuxuu furayaa saxaaradda, isagoo ka soo saaraya, hubinayana qalabka ku jira;

3) marka la xaqiijiyo dhammida ningaxa, wuxuu furayaa koleyga ay ku jirto shaabadda Xafiiska, wuxuuna ku qorayaa diiwaanka Xafiiska;

4) U gudbinayaa Xoghayaha qalabka kale.

Qod. 44aad

(Hawlaha Xafiiska Dhexe ee Aftid

Xafiiska Dhexe ee Aftidu:

1) marka ay soo gaaraan taararka ku xusan lambarka 3aad ee Qod. 42aad wuxuu tirinayaa kuna dhawaaqayaa natiijada guud ee ku meel gaarka ah ee Aftida;

2) Marka ay soo gaaraan diiwannada iyo cabashooyinka ku xusan lamb. 4aad ee qod. 42aad wuxuu:

a) Go'aan ka gaarayaa si ku meel gaar ah cabashooyinkaas iyo haddii ay jiraan kuwa kaloo la soo gaarsiiyey mar dambe Xafiiska Dhexe ee Aftida;

b) Isu geynayaa, guud ahaan Goobaha codbixinta ee Jamhuuriyadda oo idil tirada ka codbixisay, xaashiyaha codbixinta ee ansaxay, kuwa aan ansaxin codadka oggolaaday Dastuurka iyo kuwa diiday.

Markaas kaddib Guddoomiyuhu wuxuu ku caddeynayaa cod dheer natiijada ku meel gaarka ah ee Aftida ee Dalka Jamhuuriyadda oo idil.

Arrimaha kor ku xusan oo idil waxaa laga buuxinayaa Diiwaan laba nuqul ah oo midkood loo dirayo Maxkamadda Sare si ay uga gudato waajbaadkeeda shirci-gani tilmaamayo, iyadoo la raacinaayo qalabka kale iyo wixii cabasho ah ee soo gaaray Xafiiska Dhexe ee Aftida; kan kalena waxaa loo dirayaa Guddiga Qaranka ee Aftida.

XUBINTA VIII

CIQAABAAD

Qod. 45aad

(Ishortaagidda bandhigidda Aftida)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneyn, qof kasta oo dariiqad kasta ku hor istaaga, ama carqaladeeya shir bandhig, ama ishortaaga meel ku dhejin halkudhegyo la xiriira hawlaha Aftida, ama ishortaaga faafinta ama

ku dhejinta daabacyo bandhig, amase jeexjeexa halku-dhegyo ama daabacyo meel ku dheggan ama lagu dhejin rabo ama la faafin rabo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano ama ganaax ilaa 3.000 oo shilin.

Qod. 46aad

(Hollin ishortaagid xorriyadda codbixinta)

Qof kasta oo, isagoo u ballan qaadaya ama siinaya lacag, wax qiimo ama waxtar gaar ahaaneed leh, isku daya, si kastaba, inuu wax u dhimo xorriyadda codbixinta ee qofka waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano ama ganaax ilaa 2.500 oo shilin.

Qofkii si uu ku gaaro ujeeddooyinka kor ku xusan isticmaala xoog, handadaad, khayaano ama idhasarcaadis, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 3.000 oo shilin.

Qod. 47aad

(Is hortaagid habsami u socoshada hawlaha codbixinta iyo kala shaandheynta)

Haddii uusan falku dembi ka weyn keeneyn, qofkii, isagoo isticmaalaya handadaad ama falal xoog ah, is-hortaaga isticmaalka xorriyadda codbixinta ama carqaladeeya habsami u socoshada hawlaha cod bixinta ee goobta Aftida ama kuwa kala shaandheynta ee ka socda Xafiiska Degmada ee Aftida, waxaa lagu ciqaabaya xarig ilaa3 sano iyo ganaax ilaa 3.000 shilin.

Qod. 48aad

(Soo gelid idan la'aan Goobaha codbixinta iyo xafiisyada Aftida)

Qof kasta oo isagoon xaq u lahayn, inta ay socdaan hawlaha Aftidu, soo gala goobaha codbixinta ama xafiisyada Aftida, halkaana ku hakada inakstoo lagu amray inuu ka baxo, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa lix bil ama ganaax ilaa 1.000 shilin.

Hadduu qofkaasi hubeysan yahay, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano, ama ganaax ilaa 2.500 shilin.

Qod. 49aad

(Codbixin xad gudub ah)

Qof kasta oo isagoo og inuusan xaq u lahayn codbixin ama isagoo sheeganaya magac qof kale, codbixin isu soo taaga goobta codbixinta amase ay caddaato inuu bixiyey hal cod ka badan, amase, isagoo u xilsaaran inuu u cod bixiyo ruux iin jir awgeed aan awoodaas lahayn, ugu cod bixiya si ka duwan sidii la faray, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 1 sano ama ganaax ilaa 1.000 Shilin.

Isla Ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofkii u ogolaada codbixin ruux aan xaq u laheyn ama u diida mid xaq u leh, amase uga marag kaca si been ah xaqiiqda codbixiyaha, ama lagu helo isagoo haysta xaashiyo codbixin ee ka duwan kuwa sharciga ah.

Waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 2 sano iyo ganaax ilaa 2.400 Shilin haddii denbiyada faqradda hore ku xusan uu galo Sarkaal dawladeed ama qof u xilsaaran hawl guud.

Qod. 50aad

(Been abuurid xadid qoraallo ama wax ka beddelid Xisaabaadka la xiriira Aftida)

Qof kasta oo been abuura xaashiyaha codbixinta ama xaashiyo kale oo la xiriira hawlaha aftida, amase wax ka beddela, xada, isku beddela ama jeexjeexa qeyb ama dhammaan mid ka mid ah xaashiyaha dhabta ah, amase ogaal u isticmaala xaashiyo been ah ama wax laga beddelay ama leysku beddelay, xataa haddii uusan ka qeyb qaadan qof ahaantiisa falkaas, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 3 sano iyo ganaax ilaa 3.000 Shilin. Isla ciqaabtaas waxaa muteysanaya qofkii si kastaba wax uga beddela natiijada Aftida.

Qad. 51aad

(Fal ama fal la'aan ka horjeeda sharciga oo ay ku kacaan xubnaha Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska)

Qof kasta oo isagoo xubin ka ah Guddiga Goobta codbixinta ama xafiis afti, gala denbiyada ku xusan qodobbada hore wuxuu muteysanayaa ciqaabta u degsan denbiyada uu galay oo lagu kordhiyo 1/3. Haddii uu ku kaco fal ama fal la'aan aan ku xusneyn qodobbada kore, hase yeeshee ka soo horjeeda sharciga, suuragelineynna hawlaha aftida, ama hakinaya habsami u socoshadooda, ama wax u dhimaya ansaxintooda, waxaa lagu ciqaabayaa xarig ilaa 5 sano iyo ganaax ilaa 5.400 Shilin.

Qod. 52aad

(Diidid sabab la'aan xubin ka noqosho Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska Aftida)

Qof kasta oo, isagoo loo magacaabay xilka xubinnimada Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiisyada Aftida, sabab la'aan diida xilkaas ama ka maqnaada isu imaatinka Guddiga Goobta codbixinta ama Xafiiska Aftida, waxaa lagu ciqaabayaa ganaax ilaa 2.000 shilin.

ı ganaaxaas waxaa muteysanaya xubnaha kor ku xusan oo sabab la'aan ka taga inta aysan dhammaan hawlaha aftidu.

Qod. 53aad

(Dhumid xaqa doorashada iyo go'aan deg-deg ah)

Muwaadin kasta oo gala danbiyada ku xusan sharcigan, laguna xakumo xarig aan ka yareyn 6 bilood, wuxuu u keenayaa inaan loo dooran karin muddo shan sano ah xil kasta oo ku yimaadda doorasho.

Dacwadaha la xiriira denbiyada sharcigan ku xusan waxaa loo qaadayaa si deg-deg ah, waxaana awood u leh Maxkamadaha caadiga ah.

XUBINTA IX

QODOBBO KALA GUUR AH

Qod. 54aad

(Kormeerka Xooghayaha Guddiga Xisbiga Gobalka iyo kan Degmada)

Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobalku wuxuu Kormeerayaa si toos ahna u xaqiijinayaa in hawlaha Aftida ee Gobolku ku dhammaadaan muddadii iyo habkii loo dejiyey.

Isla Xilkaas oo kale ee heer degmo wuxuu saaran yahay Xooghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada.

Qod. 55aad

(Masuuliyadda Ciidammada Nabadgelyada)

Nabedgelyada iyo xasilloonida socodka hawlaha Aftida waxaa ka mas'uul ah Ciidammada Nabedgelyada iyagoo raacaya awaamiirta iyo tusaalooyinka Xooghayaasha Guddiyada Xisbiga ee Gobollada iyo Degmooyinka, iyo Guddoomiyayaasha Guddiyada Goobaha codbixinta iyo Xafiisyada Aftida.

Qod. 56aad

(Ansaxinta Aftida)

Ansaxinta hawlaha aftida waxa awood u leh Maxkamadda Sare, waxeyna ku dhawaaqeysaa 10 maalmood gudahooda laga billaabo maalinta Xafiiska Dhexe ee Aftidu soo saaro natiijada ku meel gaarka ah.

Isla marka ay ansaxineyso, Maxkamaddu waxey soo saareysaa natiijada Aftida ee kama dambeeysta ah.

Qod. 57aad

(Natiijada Aftida)

Haddii Shacbiga Soomaaliyeed uu Aftida ku oggolaado in la qaato, Dastuurka waxaa soo saaraya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Haddii natiijada Aftidu noqoto mid diiddan qaadashada Dastuurka, waxaa la diyaarinayaa Dastuur cusub oo loo qaadi doono Afti 6 bilood gudahood.

Qod. 58aad

(Dhaqangalka Sharciga)

Sharcigan wuxuu dhaqangelayaa maalinta uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, waxaana lagu baahinayaa faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, ...

MADAXWEYNAHA J.D.S.

(S. Gaas Maxamed Siyaad Barre)

IIB MA GALO

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad . Muqdisho — 1da Juunyo 1979 L. 6

FAAFINTA BIL SOO BAXA — جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 17 ee 16 Maajo 1979, Heshiis Amaahda ee dhexmaray J.D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah, kuna saabsan Mashruuc Kaalmo Farsamo — Bog 400

LAW N. 17 on 16th May 1979, The Development Gredit Agreement between the Somali Democ ratic Republic and the International Develop ment Association — » 401

SHARCI L. 18 ee 16 Maajo 79, Heshiiska Amaahda iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar — » 402

Wakaaladda Madbadda Qaranka — Muqdisho

LAW N. 18 on 16 May 79, The Development Credit Agrement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association » 403

SHARCI L. 19 ee 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray J. D.S. iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Dekedda. » 404

LAW No. 19 on 16 May 1979, The Development Credit Agrement between the Somali Democratic Republic and International Development Association. » 405

SHARCI L. 20 ee 1 Maajo 1979, Sharciga Habaynta Waxbarashada Shaqaalaha. » 406

SHARCI L. 21 ee 3 Juunyo 1979, Cafis ku saabsan Markabka MV Lord Bayro. » 409

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L 26 Feb 1979

Wax ka beddelid Qaabka dhismaha Maamulka D. Hoose » 410

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L 27 ee 21 Febraayo 1979, in shaqada D. Hoose ee Xamar loo qoro Jaalle Maxamuud Xasan Maxamed » 412

XEER MADAXWEYNAHA L. D. S. L 28 ee 21 Febraayo 1979, Magacaabid Agaasimayaal cusub. » 414

WASAARADDA GAR IYO ARR. DIINTA L. 29 ee 12 Maajo 1979, ku wareejin Beeraha maxaabiista qaarkood » 416

WASAARADDA GAR. IYO ARR. DIINTA L. 30 ee 12 Maajo 1979, wareejinta u dhis Iskaashatada waayo arag » 417

QAYBTA KOOWAAD
SHARCI

SHARCI L. 17 ee 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah kuna saabsan Mashruuc kaalmo Farsamo.

MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Meelmarin Heshiis

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Kaamo Farsamo (Technical Assistance Project), laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 10ka Maajo 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharciga soo socda :

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Kaalmo Farsamo laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun, 1978 waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah; waxaanna lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriydda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 16 Maajo 1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA

LAW No. 17 on 16th May 1979 The Development Gredit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association

President of the Somali Democratic Republic

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : The 1st., 2nd. and 3rd. Charter of October 21st. Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18 and 19 of 1st. July, 1976.

HAVING SEEN : The Devalopment Credit Agrecmant (Technical Assistance Freject) between the Somali Democratic Republic and the International Development Assocnation (IDA), signed on 30th June 1978 at Columbis, United State s of America.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers on 10th MAY 1979.

Herebypromalgates the following law :-

Article I

The Development Credit Agreement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on Columbia, United States of America in 30th June 1978, is hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdishu, 16.5.1979.

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE
PRESIDNT OF THE

Somali Democratic Republic

SHARCI L. 18 ee 16 Maajo 79, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray J. D. Soomaaliyeed iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar.-

MADAXWEYNAHA
JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

MEELMARIN HESHIIS

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo, 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar, laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirradda ee 10ka Maajo, 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :-

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Biyaha Xamar laguna kala saxeexday Columbia, USA, 30kii Juun 19778, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya astaan sharci ah; waxaanna lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoquraadiga Soomaaliya

Muqdisho 16 Maajo 1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE
MADAXWEYNAHA

J.D.S.

LAW. N. 18 on 16 May 79, The Development Credit Agrement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association.-

PRESIDNT

OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

INSTRUMENT OF RATIFICATION

HAVING SEEN : The 1st, 2nd. and 3rd. Charter of October 21st Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18, and 19 of 1st. July 1976.

HAVING SEEN : The Development Credit Agrement (Mogadishu Water Supply Project) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), siged at Columbia, USA, on 30th June 1978.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers on 10th May 1979.

Hereby promulgates the following Law :

Article I

The Development Credit Agrement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on 30th June, 1978 at Columbia, USA, is Hereby ratified.

Article II

This Agreement shall have the force of Law in the territory of the Somali Democratic Rep; and shal be published in the Official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho 16 Maajo 1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OFF THE
SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCI L. 19 x 16 Maajo 1979, Heshiiska Amaahda ee dhexmaray J. D. Soomaaliyeed iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Hormarinta kuna saabsan Mashruuca Dekedda.

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

Meelmarin Heshiis

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar, 1969.

ISAGOO ARKAY : Sharciyadda tirsigoodu yahay 1, 17, 18, iyo 19 ee 1dii Luuliyo 1976.

ISAGOO ARKAY : Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta (IDA) kuna saabsan Mashruuca Dekedda (fourth port project), laguna kala saxeexday Columbia. USA, 23kii Ogosto, 1978.

ISAGOO TIXGELINAAYA : Go'aankii Guddiga Siyaasadda iyo Golaha Wasiirada ee 10ka Maajo, 1979.

Wuxuu soo saarayaa sharcigan soo socda :-

Qodobka 1aad

Heshiiska Amaahda ee dhexmaray Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Horumarinta kuna saabsan Mashruuca Dekedda laguna kala saxeexday Columbia, USA, 23kii Ogosto 1978, waa la meelmariyey.

Qodobka 2aad

Heshiisku wuxuu ku yeelan doonaa Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya astaan sharci ah, waxaana lagu saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho 16 Maajo 1979

SAREEYE GAAS MAXAMED SIYAAD BARRE

MADAXWEYNAHA

J. D. S.

LAW. N. 19 on 16th May 79, The Development Credit Agrement between Somali Democratic Republic, and the International Development Association.-

PRESIDNT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

Instrument of ratification

HAVING SEEN : The 1st, 2nd. and 3rd. Charter of October 21st Revolution, 1969.

HAVING SEEN : Law No. 1,17,18, and 19 of 1st. July 1976.

Having Seen : The Development Credit Agreement (fourth port project) between the Somali Democratic Republic and the International Development Association (IDA), signed on 23rd August, 1978 at Columia, United States of America.

TAKING NOTE : Of the approval of the Political Bureau and that of Council of Ministers on 10th May 1979.

Hereby promulgates the following Law:-

Article I

The Development Credit Agrement between the Somali Democratic Republic and the International Development Association signed on 23rd Agust, 1978 at Columbia, USA, is Hereby ratified.

Article II

This Agrement shall have the force of law in the territory of the Somali Democratic Republic; and shall be published in the official Bulletin of the Somali Democratic Republic.

Muqdisho, 16.5.1979

MAJOR GENERAL MOHAMED SIAD BARRE

PRESIDENT OF THE

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

SHARCIGA L. 20 ee 1 Maajo 1979 Habaynta Waxbarashada Shaqaalaha

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo 3aad ee Kacaanka 21 Oktoobar 1969

MARKUU ARKAY : Sharciga Jaamacadda L. 72 ee 7. 9. 1977 iyo Xeerka Jaamacadda L. 93 ee 7. 9.1977;

ISAGOO AQOONSAN : Baahida loo qabo in la dejiyo sharci habaynaya waxbarashada shaqaalaha;

ISAGOO TIXGELINAAYO : Go'aanka Golaha Dhexe ee XHKS

WUXUU SOO SAARAYAA

SHARCI SOO SOCDA :-

Qodobka 1aad

1) Shaqaaluhu waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb qaataan waxbarashada Jaamacadda iyo dhammaan macaahidda sare ee dalka, iyadoo loogu talagalayo 10% tirada ardada loo qaadanayo Jaamacadda Ummadda sannad walba.
2) Tirada kore, waxaa weheliya 200/250 Shaqaalaha macallimiinta ah ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Sannad walba gelaya kulliyadda waxbarashada.

Qod 2aad

Shaqaaluhu waxaa kaloo ay si buuxda uga qayb gelayaan Waxbarashada dibedeed oo u qaybsan :

b) Waxbarasho heer jaamacadeed ee maadooyinka la xiriira Xirfadaha iyo aqoonta hay'ad waliba u baahan tahay si hawlaheeda loo horumariyo aanse dalka laga heli karin;
t) waxbarasho takhasus sare oo la xiriirta baahida hay'adaha dawladda ee cudud shaqaale oo aqoon sare leh;
j) waxbarasho heer dhexe oo lagu soo qaadanayo dugsiyo iyo macaahid sare ee farsamo oo aan dalka laga heli karin lana xiriirta baahida hay'adaha;
x) tababarro gaagaaban oo kor loogu qaadayo aqoonta xirfadeed ee qofka shaqaalaha ah;.

Qodobka 3aad

Habka lagu maamulayo deeqaha shaqaalaha :

b) Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada iyo Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare ayaa wadajir u xaddidaya qaybta hay'ad walba laga siinayo waxbarashada Jaamacadda Ummadda Laba bil ka hor inta ayan bilaaban waxbarashada Jaamacaddu, taasoo ku soo bixi doonta wareegto Madaxweyne;

t) deeqaha waxbarashada dibadeed heer kastoo ay yihiin, waxaa qaybinaysa Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sre iyadoo tixgelinsa baahida iyo qorshaha hay'adaha dawladda;

j) si loo sugo caddaaladda iyo sinnaanta waxaa xulitaanka qofka la siinayo deeqda ka qaybgelayo wadajirna u saxiixaya magacaabiddiisa Madaxda hay'adda, Unugga Xisbiga iyo Guddiga Dhexe ee Shaqaalaha.

Qodobka 4aad

Habka loo raacayo dadka ay soo magacaabayaan Ururrada Bulshadu waa sida soo socota :-

b) inay noqdaan dad u go'ay hawlaha ururrada sida xubnaha guddiyada fulinta iyo hawlwadeennadooda;

t) waxay kaloo Ururradu soo magacaabi karaan xubnaha kale ee Ururrada ee si muuqata oo firfircoon uga soo qeybgalay hawlaha bulshada ugu yaraan saddex sano;

j) dadka deeqda la siinayo waxaa wadajir u soo magacaabaya guddiyada fulinta ee Ururrada Bulshada.

Qodobka 5aad

Qofka la siinayo deeq waxbarasho heer kastoo ay tahay, waa inuu oofiyaa shuruudaha soo socda :-

b) inuu yahay qof hawlkar ah, dadaal iyo himmad leh lana hubo kacaannimadiisa iyo xilkasnimadiisa iyadoo mudnaan gaara la siinayo shaqaalaha kaasoo hal-

gamay Ururrada Bulshada iyo dhallinyarada xisbiyiinta ah;

t) inuu haysto shahaadada waxbarasho ee lagu geli karo Kuliyadda, Machadka ama hay'adda waxbarasho ee loo doonayo uuna leeyahay saldhig waxbarasho oo uu uga bixi karo nooca waxbarashada loo doonayo.

j) inaan da'diisu ka weynaan 30 (soddon) sano hadduu bilaabayo waxbarasho jaamacadeed;

x) inuusan hayn xil shaqo oo gaarsiisan Agaasime Waax ama wax u dhigma;

kh) inuu soo hayay shaqada dawladda ugu yaraan saddex sano oo taxan;

d) inuu soo maray tababarka Dugsiga Xalane iyo shaqada Qaranka hadduu bilaabayo waxbarasho Jaamacadeed;

r) qofka shaqaalaha ah ee hore u dhammeeyay waxbarasho jaamacadeed waxaa u furan oo keliya takhasus sare, mana bilaabi karo waxbarasho maaddo cusub oo heer jaamacadeed.

Qodobka 6aad

Sharcigani wuxuu dhaqangeliyaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.
Muqdisho 1 Maajo 1979

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA J. D. S.

SHARCI L. 21 ee 3 Juunyo 1979, Cafis ku saabsan Markabka MV LORD Bayron.

MADAXWEYNAHA J. D. S.

MARKUU ARKAY : Warqadda Koowaad labaad iyo saddexaad ee Kacaanka; 21ka Oktoobar 1969;

MARKUU ARKAY : Sharciga Lamb. 1, 17, 18, iyo 19 1da Luulyo 1976;

MARKUU ARKAY : Qod. 149 XC iyo 255 XHC;

MARKUU ARKAY : Xukunka Maxkamadda Badbaadada Dalka Lamb. 69/76, taariikh 9. 4. 1976, xukunkaasoo lagu aqoonsaday in markabka «MV LORD BAYRON» uu galay denbiga ku xusan Qod. 1aad, Qaybtiisa 2aad ee Sharciga Lamb. yahay 15, soona baxay 15kii Abriil 1974;

MARKUU TIXGELIYEY : codciyadii isdabajoogga ahaa ee Dowladda Giriigga, kuna saabsanaa in xal siyaasadeed iyo saaxiibtinnimo lagu dhammeeyo xaaladda Markabka MW LORD BAYRON;

MARKUU TIXGELIYEY : Warbixintii Guddoomiyaha Guddiga Qorshaha Qaranka, kuna saabsanayd wadahadalladii uu kula yeeshay ATENE madax ka tirsan Dowladda Giriigga;

ISAGOO TIXGELINAAYA : xurmeynta Mabaadi'da iskaadhiga, isu soo dhawaashaho, iyo wax wada qabsiga dawliga ah;

WUXUU KA CAFIYEY

Markabka MV LORD BAYRON ciqaabta ku xusan xukunka MBD Lambar 69/76, ee 9ka Abriile 1976;

ISLA MARKAANA

Wuxuu amrayaa in laga siidaayo xayiraaddii lagu hayey markabka isaga ah.

Muqdisho 3 Juunyo 1979

MADAXWEYNAHA J. D. S.
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 26 ee 17 Febraayo 1979,

Wax ka beddelaad Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose

MADAXWEYNAHA J. D. S.

Wax ka beddelaad Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose;

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969;

ISAGOO ARKAY : Sharciga Lam. yahay 21 ee 3. 2. 1977, Qodobkiisa 5aad, Xarafka 2aad

ISAGOOARKAY : Xeerka lam. yahay 86 ee 23. 8. 1977 iyo kan lam. yahay 50 ee 14. 1. 78, kuwaas oo wax looga toosiyey Xeerka Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO ARKAY: Xeerka lambarkiisu yahay 28 biis 21.2.76, kaas oo lagu Dhaqoo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

ISAGOO HUBSADEY : in loo baahan yahay in wax laga beddelo Qaabka Dhismaha Maamulka D/Hoose.

ISAGOO OGAADAY : baahida loo qabo Abuurida jagooyin cusub iyo Toosin Jagooyinkii hore.

ISAGOO DHEGEYSTAY : Tala jeedinta Duqa Magaalada Muqdisho.

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Toosin

Waxaa lagama maarmaan Noqotay in wax laga beddelo ama laga toosiyo jagooyinkii hore ugu jiray Xeerka shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho, waxaana loo toosiyey sida soo socota :

XAFIISKA DUQA MAGAALADA

1 — Faracii Xoghaynta Xafiiska Duqa Magaalada waxaa loo beddelay :

Jago lam. 00002 Xubinta Xoghaynta Gaar ahaaneed oo Duqa Magaalada Muqdisho «A5»

WAAXDA CAAFIMAADKA

2 — Laantii Nadaafadda Guud ee Waaxda

Jago lam. 30052 Xubinta Nadaafadda Guud, waxayna hoos imaan doontaa Waaxda Arrimaha Ijtimaaciga ee D/Hoose, «A5»

XAFIISKA GARYAQAANKA D/HOOSE,

Jago lam. 00010 Xafiiska Garyaqaanka D/Hoose oo horay darajadiisu u ahayd «A6» waxaa daradiisa laga dhigay «A3»

XAFIISKA ARR. DIBEDDA & XIRIIRKA DADWEYNAHA

4 — Xubintii hore ee Xiriirka Dadweynaha waxaa loo beddelay :-

Jago lam. 10033 Waaxda Xiriirka Dadweynaha, waxayna hoos imaan doontaa Duqa Magaalada Muqdisho, isla markaasina yeelan doontaa Laba Laamood oo kala ah: A3

Jago lam. 10034/1 B — Laanta Qoraalka & Dukumontooyinka «A6»

Jago lam. 10035/1 T — Laanta Dacwooyinka Dadweynaha «A6»

5 WAAXDA ARR. IJTIMAACIGA

Jago lam. 31322. Laantii Beeraha iyo Dhirta, waxaa loo beddelay : Xubinta Beeraha iyo Dhirta «A6»

6 WAAXDA GANACSIGA

Jago lam. 20404 Laantii Badarka waxaa loo beddelay : Xubinta Badarka «A6»

7 WAAXDA CANSHUURAHA

Faracyadii 14ka Degmo ee waaxda kor ku xusan waxaa loo bedelay :

Jago lam. 20080/94 Laamaha 14ka Degmo, ee D/Hoose «A6»

QODOBKA 2AAD
ABUURID JAGOOYIN CUSUB

Waxaa Maamulka D/Hoose oo Muqdisho lagama maarmaan u noqotay in qaabkii dhismaha shaqaalaha lagu kordhiyo Jagoojin Cusub, taasoo ay keentay baahsanaanta iyo Ballaarka Hawlaha kala duwan ee D/Hoose ku daryeelayso bulsho weynta ku nool Gobolka Banaadir, Jagooyinka cusub ee la abuurayna waa kuwa soo socda :

1 — WAAXDA CANSHUURAHA

waxaa loo Abuuray :

Jago. lam. 20. 911. Xubinta Canshuuraadka kala duwan «A6»

2 — WAAXDA DAD-DHIGIDDA

Waxaa loo Abuuray :

Jago lam. 31543/1. Faraca Arkiifiyada B 2

3 — KU/HA DUQA MAGAALADA EE MAAMULKA GUUD

Waxaa loo Abuuray :

Jago. lam. 10.103/1. Xubinta Kormeerka Guud «A5»

4 — WAAXDA CAAFIMAADKA

Waxaa loo Abuuray :

Jago. Lam. 31544/1. Faraca la degaalanka Cayayaanka B2

Qodobka 3aad

Qodobada Xeerkani ka kooban yahay waxaa lagu kordhin doonaa Xeerka hore ee lamb. yahay 28 biis ee 21. 2. 1976, kaasoo lagu Maamulo Shaqaalaha D/Hoose ee Muqdisho.

Qodobka 4aad

Xeerkaani wuxuu dhaqan gelayaa marka uu Saxiibo Madaxweynaha J. D. S. iyada oo aan qodobadiisa waxba laga beddelin, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA SAXIIXAY
MADAXWEYNAHA J. D. S.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Jaalle Yuusuf Ibraahim Cali «Abuuraas»

Xubin Golaha Dhexe XHKS
Ahna Duqa Magaalada Muqdisho

W*aan* **arag***nay ee* **Dii***waangeli***nnay***
Dii*waanka lamb. 3 bogga lamb. 23*
Muqdi*sho 12* **Maajo** *1969*
Han*tidhawraha* **Guud KMG**
***Yuusuf* Cali Nuur**

XEER MADAXWEYNAHA J D. S. L. 27 ee 21 Febraayo 1979, In Shaqada D/Hoose ee Xamar loo qoro Jaalle Maxamuud Xasan Maxamed

Waan aragnay ee Diiwaangelinnay
Diinwaanka Lambar. 3 bogga lamb. 25
Muqdisho 12 Maajo 1979
Hantidhawraha Guud KMG
Yuusuf Cali Nuur

ISAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21kii Oktoobar 1969,

ISAGOO ARKAY : Sharciga lam. yahay 28 biis ee 21. 2. 1976, iyo Beddelaadii ka dambaysay.

ISAGOO ARKAY : wareegtada lam. yahay 6/1/12/14650 ee 30. 10.1978, kana soo baxday Wasaaradda shaqada iyo Arrimaha Bulshada, ee lagu qaybiyey Ardayda Shaqada Qaranka qaybta 7aad 1978 iyo dalabkii ka horeyey ee D/Hoose

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Muxudiin Jurus Xasan uu u soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhd aheyd 1.10.78 uu waydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Hodaan Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 17X30 kuna fadhiya 510 mq.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Muxudiin Axmed Waasuge
Koonfur waxaa ka xiga: Waddada Sanca
Galbeed waxaa ka xiga: Gacal Geedi
B a r i waxaa ka xiga: Mugtaar Sheekh Muxudiin

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 412

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa lacaddenayaa in Jaalle Cabdulqaadir Mukhtar SHeekh uu u soo qortay waaxda Sah. iyo Deg. Magaaladynta Xamar maalintiitaariikhdu ahyd 31/10/77 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Kaaraan Qaabkiisuna waa Rektangol Addimihiisuna waa 20X18 kuna fadhiya 540 Mq.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga Muxyadiin Xagalay
Koonfur waxaa ka xiga wadda sanca
Galbeed waxaa ka xiga Maxamed Xuseen
Barri waxaa ka xiga Muxuddiin Xuseen

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L.413

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa lacaddeynayaa in Jaalle Maxamed SHeekh Xuseen Rooble. uu u soo qortay waaxda Sah. iyo Dag. Magaaladatan Xamar maalintii taariikhdu ahyd 22/1/1979 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Dagmada Qaabkiisu waa Rektangol Addimihiisuna waa 5X20 kuna fadhiya 100/Mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga Dhulkiisii hore
Koonfur waxaa ka xiga Dhul Dawladeed
Galbeed waxaa ka xiga waddo
Barri waxaa ka xiga Dhul Dada leeyahay

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L.414

J.D.S.

WASAARADDA *HAWLAHA* GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabdi Axmed Siyaad uu u soo qortay Arji Waaxda Sah. iyo Degaanka Magaaleynta Xamar maalintii taariikhd aheyd 13.1.79 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmda Kaaraan Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 40X30 kuna fadhiya 1,200 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 17 B.
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xiga: **Waddo**
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 22 — 23 B.

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 415

J.D.S.

WASAAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Ibraahim Xaaji Barre uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 13.3.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA WAA SIDA HOOS KU TILMAAMAN

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 873 Y.
Galbeed waxaa ka xiga: Waddo
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 872 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaaleynta ee W.H.G. waxaa laga doodi karaa muddo (30) soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L. 416

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaliima Xaaji Jaamac uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 12.9.77 uu ku wyediistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Y[illegible] shiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 422 Y
Koonfur waxaa ka xiga: Waddo
Galbeed waxaa ka xig: Dhul lam. 419 Y
B a r i wxaa ka xiga: Dhul lam. 423 Y

Qofkii doonaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 417

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAH. IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xasan Cilmi Cali uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta X[illegible] maalintii taariikhdu aheyd 27.12.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa a xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 593 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 592 Y
B a r i waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii doonaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 14.2.1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 418

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in J/le Faaduma Maxamuud Jaamac uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 16.9.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORON

Waqooyi waxaa ka xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 2120 Y
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 2123 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 2110 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAHAN. IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 419

J.D.S.

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Qaasim Maslax Qaasim uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 25.11.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa a xiga: Waddo
Koonfur waxaa ka xiga: Dhul lam. 587 Y.
Galbeed waxaa ka xiga: Dhul lam. 586 Y
B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 590 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho 31 Jannaayo 1979
AGAASIMAHA WAAXDA SAH. & DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIM CIGE GUULEED

L. 420

J.D.S.

WASAARADDA *HAWLAHA GUUD*
WAAXDA SAHANKA IYO DEGAANKA MAGAALAYNTA
NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Faarax Maxamed uu u soo qortay Waaxda Sah. iyo Deg. Magaaleynta Xamar maalintii taariikhdu aheyd 28.12.78 uu ku weydiistay gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Magaaladatan Xamar Degmada Yaaqshiid Qaabkiisu waa Regtangolaare Addimihiisuna waa 20X30 kuna fadhiya 600 mq.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA SOO SOCOTA

Waqooyi waxaa ka xiga: Dhul lam. 542 Y

Koonfur waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

B a r i waxaa ka xiga: Dhul lam. 539 Y

Qofkii danaynaaya Dhulkaas wuxuu si fiican uga arkikaraa Naqshadda Dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Degaanka Magaalaynta ee W.H.G. waxaana laga doodi karaa muddo (30) Soddon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Buugga Faafinta Rasmiga ah.-

Muqdisho. 31 Jannaayo 1979

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA
INJ. CABDIKARIIN CIGE GUULEED

L. 421

FAAFINTA RASMIGA AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 7aad Muqdisho 1 Agoosto 1979 L. 8

FAAFINTA BIL SOO BAXA

جريدة شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.

QIIMUHU : waa 5 shilin lambar waliba RUKUNKA : Sanadkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibadana waa Sh so. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qoritaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa laba Sh — Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta wxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta

KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

W. M.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA L. 42 ee 7 Juunyo 1979, Xeer ku saabsan Xeernidaamiyaha Isgaariinta — Bogga *517*

DECREE OF THE PRESIDENT of the Republic N. 42 on 7th Jun 1979, Concerning Telecommunications Regulation. » *538*

XEER WASAARADDA H. GUUD, L.43 ee 6 Maajo 1979, Cad dhul Dawladeed ee ku yaal Degmada Hawl-Wadaag ee loo oggolaaday dhismihiisa Jaalle Cabdi Sheekh Cumar Ciise kufadhiya mq. 1.200/ »

Wakaaladda M. Qaranka

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH
WASAARADDA H. GUUD, 6. 3. 1978, Naado Dhul Jaalle Masjid Nuur L. 467 » 558

WASAARADDA H. GUUD, 6. 3. 1978, Naado Dhul Jaalle Masjir Nuur L. 558

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.7.79 Lumid Buug Kayd L. 8804 ku qoran Shs. 3.500 ay leedahay Luul Cabdalla Cali L. 468 » 559

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.7.79 Lumid Buug Kayd L. 3587, kuna qoran 7.782/ ay leedahay Aamina Xaaji Cali L. 469 » 560

SHIRKADDA «SOMALCONSULT». Xamar 1. 8.79 Ogeysiis isugu yeerid fadhi aan caadi ahayn L.472 » 561

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA J. D. S. L. 42 ee 7 Juunyo 1979 ku saabsan Xeernidaamiyaha Isgaarsiinta.

M A D A X W E Y N A H A
J. D. S.

ASAGOO ARKAY : Xaashida 1aad, tii 2aad iyo tan 3aad ee Kacaanka 21ka Oktoobar 1969;

ASAGOO ARKAY : Qodobka 41 ee Sharciga Isgaarsiinta Sharci Lam. 1 soona baxay 22kii Diisember, 1975;

ASAGOO AQOONSADAY : Inay tahay lagama maarmaan in la sameeyo Xeernidaamiye oo fasir iyo faahfaahin ka bixinayo Sharciga Isgaarsiinta;

ASAGOO TIXGELINAYA : Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Boosta & Isgaarsiinta.

WUXUU XEEREEYEY

QODOBKA 1AAD

Xeernidaamiyaha Isgaarsiinta ee halkan ku lifaaqan ayaa la oggolaaday oo noqon doona qayb ka mid ah Dekreetadan.

QODOBKA 2AAD

Dekreetadani waxay dhaqan gelaysaa ka bacdi marka lagu soo saaro faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 7. 6. 1979

WASIIRKA BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA
Jaalle Dr. Cabdullaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J. D. SOOMAALIYA

QAYBTA 1AAD

Qodobka 1aad

Qeexid

a) **ISGAARSIIN** :-
Waa wax kasta oo la tebiyo, dirid ama qabasho calaamado la isla yaqaan, jabaqyo ama humaagyo, iyadoo la adeegsanayosilgo, raadiyo ama hab kaloo birlab - danabeed.

b) **TELEGARAAF** :
Waa hab Isgaarsiineed oo lagu gudbiyo walax qoran iyada oo la isticmaalayo calaamado.

c) **TELEEFOON** :
Waa hab isgaarsiineed oo u habeysan gudbinta hadalka.

d) **FOOTOTELEGARAM** :-

Waa nooc dirid sawir-danabeed oo ah dirid meel ilaa meel ama dhul iyo hawada iyo dhambaal sawirid aad u sugan ah.

Qodobka 2aad

Hawlaha Isgaarsiintu waxay khaas u yihiin Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

QODOBKA 3AAD

Marka laga reebo hawlaha mahuraanka ah ee Xoogga iyo Nabadsugidda gudaha, rakibaadda iyo socodsiinta qalabka isgaarsiineed waxay gaar u yihiin Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta oo kali ah.

QODOBKA 4AAD

Wasiirka Boostada iyo Isgaarsiinta wuxuu bixin karaa ruqso si gaar ahaaneed loogu isticmaali karo haddii ay kalifto sababo saameeya danta bulshada ama baahi wadajir ah oo caalami ah.

QODOBKA 5AAD

Hawlaha Isgaarsiinta waxaa lagu fulinayaa Xafiisyada Taararka, Teleefoonada, Kabiinka teleefoonada ee jira gaar ahaan loogu rakibay isticmaalka bulshada.

QODOBKA 6AAD

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiintu awood bay u leedahay inay diido gudbinta, diridda ama qabashada calaamado, hummaagyo ama jabaqyo ama wax sir lug ku leh waji kastaba ha yeeshaane iyadoo la adeegsanayo silig, raadiyo, arag ama habab kale oo birlab-danabeed, haddii ay u muuqdaan inay khatar ku yihiin badbaadada dalka lid ku yihiin xeerarka waddanka, xasiloonida bulshada ama sharafteeda.

QODOBKA 7AAD

Waxaan ahayn celinta kharajka taar ama lacagta wicidda Teleefoonka, Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiintu uma qoolla qaybin la'aanta ama daahidda taararka, kala go'a xiriirka wicid Teleefoon, ama daahidda ama kala go'a xiriirka dhambaalada Telekiska.

QODOBKA 8AAD

Taariifadα Isgaarsiinta

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay awood u leedahay inay soo saarto taariifadda hawlaha Isgaarsiinta ayadoo kala tashaneyso Wasaaradda Maaliyadda.

Qaybta II
DHAQAN SAAMEEYA TELEGARAAFKA

Qodobka 9

Mudnaanta gudbinta

Taararka kala mudnaasho ayaa la siiyaa marka la gudbinayo,

a) Taararka la xiriira naf la badbaadinayo xagga badda ama Cirka. Ereyga «degdeg» waa in lagu qoraa cinwaanka hortiisa iyo «degdeg» (SVH) khaanadda tusmo hawleedka.

b) Taararka hoggaaminta gaadiidka Cirka ee degdegga ah oo hore laga raaciyo «degdeg».

c) Taar hawleedka degdegga ah oo hore laga raaciyo

d) Taararka saadaasha hawada ee degdegga ah oo hore laga raaciyo «degdeg».

e) Taararka hoggaaminta gaadiidka Cirka oo hore laga raaciyo «degdeg».

f) Taararka Dawladda ee degdegga ah marka lagu daro kuwa Xoogga Dalka oo hore laga raaciyo «degdeg»

g) Taararka gaar ahaaneed ee degdegga ah oo hore laga raaciyo «degdeg».

h) Taararka Wargeysyada ee degdega ah oo hore laga raaciyo «degdeg».

i) Taararka saadaasha hawada, tusmo hawleedkeeduna yahay (OBS) waa in lagu qoro cinwaanka hortiisa.

j) Taar hawleedka lacagtooda la bixiyey iyo jawaabtooda oo hore laga raaciyo (ST).

k) Taararka gaar ahaaneed ee gudaha.
L) Taararka gaar ahaaneed ee gudaha.
m) Taararka Wargeysyada oo hore laga raaciyo (Prees).
N) Taararka hawleed oo hore laga raaciyo (S. G.)

QODOBKA 10AAD

QABASHADA TAARARKA

Taararka waa in lagu qoraa foomka Mod - 25 (T/IA), dhambaallada lagu qoro warqado kale waa in lagu xabageeyaa qaabka kor ku xusan, si loo isticmaali karo madaxyada khaanadaha foomka. Waa in la hubiyaa in tusmo hawleed walba lagu xadilay khaanadda foomka ee bannaan.

QODOBKA 11AAD

AFKA TAARARKA

a) Taararka ku qoran Somali iyo Carabi, ama saasaan Laatiin ah ayaa la oggolyahay.

b) Dirsadaha taar ku qoran af daahsoon, waa inuu keenaa furaha maldaha qoraalka oo dhan ama qayba ka mid ah saxiixa laga soo ururiyey. Haddii xafiiska dirayaa codsado. Arrintaasina ma khusayso taararka Dawladda.

QODOBKA 12AAD

TIRINTA EREYADA :

a) Eray kasta oo si caadi ah loo isticmaalo ama hal erey ahaan ugu jira abwaan la isku raacsan yahay oo afafka la oggolyahay kuna xusan qodobka (12a) midkood leeyahay waa in loo tiriyaa qadarka 15 xaraf ereygiiba, iyada oo lagu darayo hal erey 15kii xaraf ama 15 xaraf qaybtood oo siyaado ahba.

b) Kooxo ka koobma xarfo, lambarro, calaamado ama isku jirkood, waa in loo tiriyaa qadarka shantii xarafba erey laguna daro hal eray shantii xarafba, ama shanta qaybteed oo siyaado ahba.

QODOBKA 13AAD

TAARARKA WARGEYSYADA

a) Taararka Wargeysyadu waa taarar waxayna ka kooban yihiin xog iyo warar loogu talo-galay in lagu daabaco Wargeysyada iyo joornaalo kale oo wakhtiyo go'aan soo baxa ama laga sii daayo raadiyaha cod ahaan ama warfidinta raadiyaha la iska arko, waxaana shardi ah in aanay ku jirin qidcado, faafin ama isgaarsiin looga jeedo xiriir gaar ahaaneed, aanay aheyna iidheh ama isgaarsiin loo daabacayo si looga faafiyo raadiyaha ama TVba, haddii kharash laga qaaday iyo haddii kaleba.

b) Tirada ereyada ugu yar ee loo qiimayn karo taar Wargeyska caadiga ah waa 14 erey.

c) Taararka Wargeysyada caadiga ah qiimahoodu waa qiimaha taararka caadiga ah saddex daloolkiis (1/3).

d) Qiimaha ereyga laga qaadayo taararka wargeysyada degdegga ah waa inuu la mid noqdo qiimaha laga qaado eryga taarka caadiga ah ee gaar ahaaneed.

QODOBKA 14AAD

TAARAR WARGEYSYADA CAADIGA & DEGDEGGA AH

Taarar Wargeysyada waa la qaban karaa iyada oo aan qiimahooda qadiimaad loo bixin, waxaana shardi ah in dirsaduhu yahay wariye la aqoonsan yahay.

QODOBKA 15AAD

FOONOOGARAAMYADA

Foonoogaraamku waa taar lagu gudbiyo ama laga qabto xafiis taar iyada oo la adeegsanayo Teleefoon. Foonoogaraam-waxaa lagu qabtaa lagana diraa -

— Xarumaha Teleefoonka.
— Laamaha Xafiisyada Boostada iyo Taararka.
— Qofof am a Teleefoono gaar ahaaneed ama dawli ah.

QODOBKA 16AAD

QABASHADA FOONOOGARAAMYADA GAAR AHAANEED

Dadka way ka samaysan karaan foonoogaramyo gaar ahaaneed xarumaha Teleefoonka, haddii debaaji macquul ah ay u sii hormariyaan Xafiiska Taararka ee ku shuqul leh, inta aanay dhammaan deebaajigaasina taararka noocaas ah waxaa loo tixgelinayaa taarar gaar ahaaneed. Nuqulka sare ee risiidka taararka (T/9,), waxaa lagu lifaaqayaa xaashida taararka la bixiyey, (T/14), arag Qodobka (17).

QODOBKA 17AAD

DEEBAAJIGA GAAR AHAANTA LOO DHIGTO

Deebaajiga caddaanka ah ee foonoogaraamka gaar ahaaneed waxaa loo la isticmaalayaa si la mid ah nidaamka lagu soo qaaday Qodobka 16 ee ku saabsan deebaajiga wicidda fog.

QODOBKA 18AAD
FOONOOGARAMYADA DAWLADDA

foonoogaraamyada ka soo baxa xafiisyada Dawladda waxaa la qabanayaa saacadaha shaqada iyadoo la geeynaayo xafiisyada taararka ee ugu dhaw. Karaaniga qabanaya waa in la siiyo magac dhan iyo darajada dirsadaha. Marka la qabto dhambaalka ka dib ayaa taar ahaan loo dirayaa iyada oo loo qaadanayo taar Dawli ah kharashkana lagu qorayaa hay'adda Dawladda ee leh arag Qodobka 27

QODOBKA 19AAD
LAMBARINTA TAARARKA

Taararka la qabto waxaa la siin doonaa lamabrro isku xiga bishaas oo dhan. Waa inaan wax laga beddelin lamabrka xafiiska marka la diro bacdi, laakiin waxaa la siin doonaa lambarro kale oo isku xiga iyadoo la raacayo mudnaantooda gudbineed taasoo ujeeddo hubsiino leh.

QODOBKA 20AAD
TAARARKA LACAGTOODA LA QADIMO

Laba koobi oo ah risiidada buugga (T/9) ayaa laga sammeeya taarka lacagtiisa la qadimo, nuqulka hore waxaa la siin doonaa dirsadaha, risiidkuna waa in uu muujiyaa qadarka laga qaaday oo ah shilinka Soomaaliga ah, lambarka taarka, taariikhda, waqtiga la qabtey, meesha taarku u socdo iyo shaabadda taariikhda xafiiska qabtay.

Wax bedbedel ah lama oggola haddii khalad dhacana labada koobi waa in la tirtiraa ayna ku haraan buugga.

QODOBKA 21AAD
GUDBINTA DAKHLIGA TAARARKA

Gudbinta dakhliga taararka maalintii hore waa inaysan ka dambeyn 9.00 subaxnimo ee maalinta dam[illegible]

ullada haray ee (T/9) kaasoo ay tahay inay hubiyaan lacag hayayaasha.

QODOBKA 22AAD
GAYNTA TAARARKA LA QABTAY

Maamulayaasha boostada waa inay u geeyaan lacagta taararka laga qabtay Wakiilada Wasaaradda Maaliyadda ee Gobollada iyo Degmooyinka iyagoo qaadanayo qaab lacageedka (G1).

QODOBKA 23AAD
XAASHIDA TAARARKA LA BIXIYEY

Maamulayaasha boostada waa inay diyaariyaan foomka (T/14) oo uu si kooban ugu qoran yahay taar waliba, muujinayana Lambarka taarka tirada ereyada, lacagta laga qaaday iyo meesha uu u socdo. Liiska T/14 iyo nuqullada taararka iyo risiidka (G1) oo uu bixiyey Wakiilka Wasaaradda Maaliyadda waxaa loo diri doonaa Xubinta Kormeerka Taararka eeMuqdisho.

QODOBKA 24AAD
TAARARKA XISAABTA SOCOTA

Taararka ay dirsadaan hay'adaha Dawladda, ama Shirkadaha gaar ahaaneed waxaa loo aqbali karaa xisaab socota haddii ay dhigtaan lacag deebaaji ah oo horumaris ah.
Qiimaha taararka lagu diray xisaab socota waxaa la ururinayaa bil walba dhammaadkeeda. Kharash hawleed dheeraad ah ayaa lagu karaa qiimaha taararka xisaab socota ah marka la diyaarinayo qaansheegtooyinka.

QODOBKA 25AAD
QABASHADA TAARARKA XISAAB SOCOTA

Marka la qabanayo taararka xisaab socota (T/9) buugga [illegible]ah hay'adda Dawladeed iwm, ayaa loo di-

(T/9) kaasoo la raacin doono koobi.

Labada koobi ee (T/9) iyo nuqullada taararka waa in lagu lifaaqaa (T/14) kaasoo si gooni ah loogu diyaarin doono taararka daynka ah loona diro Xubinta Kormeerka Taararka.

QODOBKA 26AAD
TAARARKA DAWLADDA

Taararka ay dirsadaan Wasaaraduhu waa in ay wataan magaca kharashka bixiyaha, magac dhan ee sarkaalka saxeexaya taarka iyo haddii ay suuragal tahay shabadda unugga dirnaya taararka.

QODOBKA 27AAD
QABASHADA TAARARKA DAWLADDA

TAARARKA Dawladda waxaa la siin doonaa lambarro isku xiga ee buugga (22 TER). Tilmaamaha kooban ee taararka sida (tirada ereyada, meesha uu u socdo, magaca unugga Dawladda ee taarka dirsanaya..... iwm) ayaa waxaa lagu sugi doonaa buugga (22 TER) kaasoo yeelan doona koobi. Nuqulka asalka ah ee (22 TER) iyo koobiyada taararkaba waxaa loo diri doonaa Faraca xisaabaadka taararka.

QODOBKA 28AAD
TIRTIRIDDA TAARARKA

a) Dirsadaha taarku, marku keeno risiid caddeynaya aqoonsigiisa, wuu joojin karaa diridda taarka ama u gayntiisa.

b) Haddii taararka aan weli la dirin, waa la tirtiri karaa qiimaha taarkana waa celinnayaa. Risiidka iyo labada koobi ee taarka oo muujinaya : In markii dirsaduhu codsaday la tirtiray ayaa lo gudbin doonaa kormeerka taararka.

c) Kharashka tirtiridda oo laga eegay taariifada taararka ayaa laga qaadi doonaa. Taararka Dawladdana kharashkaas ma leh,

d) Haddii taarkii la diray, dirsaduhuna rabo inaan la gayn, codsigaasi wuxuu noqon doonaa mid uu kharash hawleedkiisa bixiyo. Markaas oo kale kharashyada taarka la celin maayo.

QODOBKA 29AAD

BIXINTA KHARASH HAWLADEEDKA (ST)

Taararka loo baahdo in la raad-raaco ama kabid la xiriirta taar la diray ama ku jira habraac gudbineed waxaa la diri karaa marka dirsaduhu ama loo diraha ama qof kale oo awood sharci lihi codsado.

QODOBKA 30AAD

QIIMAHA TAAR HAWLEEDKA

Kharashyada Taararka iyo haddii ay lagama maarmaan noqoto, qiimaha Jawaabta (R. S. T.) Taararka, waa in codsaduhu deebaaji ahaan u dhigaa. Qiimaha Taararkaasi waxay noqon doonaan tan sicirka caadiga ah, iyadoo ay jawaaba ugu yari tahay lix erey, waxaana lagu tiriyaa Taararka gaar ahaaneed.

QODOBKA 31AAD

TAARARKA JAWAABTOODA LA BIXIYEY

Jawaabta Taar kasta waa la qadimi karaa. Marka bixinta Jawaabta loo baahdo dirsaduhu waa in uu ku qoraa cinwaanka hortiisa tusmo hawleedkaas la qadimay, kaasoo haddii Taarku u socd cinwaan Soomaaliya gudaheeda ah ka kooban xuruufta (RP) oo ay la socoto tirada ereyada la bixiyey sida (RP 10 erey,) haddii la rabo in lagu diro qaybta Taarar degdegga ah tusmadu waxay ka kooban tahay xuruufta (RPD) oo ay la socoto tirada ereyada sida (RPD 10). Taararka dibedeed qadarka la bixiyey waxaa lagu tibaaxaa Gold Francs iyo sunuud sida (RP 16.50).

QODOBKA 32AAD
TAARARKA CINWAANADA BADAN

Taararka ku socda laba cinwaan ama ka badan oo uu hawlgeliyo hal xafiis wuxuu kharashka koobiga koowaad noqonayaa kan hal taar oo kale Kharashka koobiga labaad iyo kuwa kaleba waxaa laga eegi doonaa Taariifada Taararka, ilaa iyo 50ka erey ee ugu horreeya iyo 50% kharashka 50kii erey ee kuxiga ama intaas qaybteed.

QODOBKA 33AAD
GAYNTA TAARARKA

Taararka waxaa la geyn doonaa marba cinwaanka ay leeyihiin, ha ahaato aqal gaar ahaaneed, aqal xafiis ganacsi iwm, ee uu qofka Taarku u socdaa leeyahay ama meesha uu ku-meelgaar ahaan ugu noolyahay sida hoteel, markab, gegi dayuuradeed, ama fagaare Telegaraaf (TR) ama fagaare boosto (GPR) ama sanduuq boosto, ama Teleefoon (TF) ama Telekis (TIX).

QQODOBKA 34AAD
GAYN TAAR GAAR AHAANEED

a) Muhim ma aha in Taarka faraha laga saaro qofka uu u socday, Taararka waxaa loo dhiibi karaa qof kasta oo qaangaar ah oo caa'iladdiisa ka tirsan, ama qof kasta oo u shaqeeya, ama dadka guryahiisa ku nool ama martidiisa ama xafiiska soo dhowaynta hoteelka iyo wax la mid ah sida cinwaanka Taararka ku qoran

b) Taarka wata tusmo hawleedka (MP) looma dhiibi karo qofka aan Taarku u socon oo waa inuu gacan saar ahaado.

QODOBKA 35AAD
DIIWAAN-GELINTA GAYNTA

Dhammaan Taararka waa in lagu diiwaan-geliyaa xasuusdhowr khaas ah oo muujinanay Taariikhda, Lambarka Taararka, Cinwaanka, waqtiga la qabtay iyo waqtiga la geeyey. Gaynta waa in saxiix laga helaa.

QODOBKA 36AAD

CINWAAN LA DIIWAAN-GELIYAY

Cinwaan kooban oo ka diiwaan-gashan xafiiska Taararka uu u socdo ayaa la isticmaali karaa halkii laga isticmaali lahaa Cinwaanka dhan ee qofka u socdo Taarku. Markaas oo kale looma baahna sifnooyin gaar ahaaneed oo aan ahayn Cinwaanka la diiwaan geliyay oo uu wehliyo magaca Xafiiska Taarar gaynta.

QODOBKA 37AAD
KHARASHKA DIIWAAN-GELINTA

Kharshka sannadeed ee cinwaanada diiwaan gashan waxaa lagu muujinayaa Taariifada Taararka.

QODOBKA 38AAD
LIISKA CINWAANADA DIIWAAN-GASHAN

a) Xarunta Dhexe ee baarista Taararka wuxuu hadba soo saarayaa liis cusub muujinaya Cinwaano Telegaraafeedka diiwaan-gashan ee meelo kala duwan ee Soomaaliya gudaheeda oo Taararka lagu hagaajin karo. Waxaa kaloo liiska ku jira dhammaan Xafiisyada Telegaraafka iyo laamahooda meelaha aanay Xafiisyo Taarar iyo laamahood toona ahayn, laakin ah meelo Taararka lagu gayn karo Teleefoon (TF..) ama boosto (GP).

b) Maamulayaasha boostada waxaa laga doonayaa in ay u soo gudbiyaan Xarunta Baarista Taararka liis ay ku qoran yihiin cinwaanada ka diwaan gashan Xafiisyadooda Taararka

QODOBKA 39AAD
BEDKA GAYNTA TAARARKA

Xarunta Dhexe ee baarista Telegraafku wuxuu qeexayaa bedka gaynta Taararka oo Xafiisyada Telegaafka iyo laama-

hooda ee kharaj la'aanta ah. Bedkaas gaynta ee kharaj la'aanta ahi wuxuu noqon karaa masaafo gacankeedu yahay dhowr kiilometar taasoo ay ku kala duwanaan karaan xafiisyada iyo laamahooduba.

QODOBKA 40AAD

BEDKA GAYNTA WIXII KA BAXSAN

Taararka u socda meelo ka baxsan bedka qaynta waxay saami u heliyaan Kharash gaynta oo dheeraad ah (Protorage) taasoo laga eegayo taariifada Taararka.

QODOBKA 41AAD

BIXINTA KHARASHKA DHEERAADKA AH EE GAYNTA (PORO'TORAGE)

Gaynta Taararkaas waxaa u xilsaaran adeege khaas ah lana siin doono qadarka kharash-gayneedka dheeraadka ah (prtorage). Adeegaha Telegraafka ee geeya Taararka Kharashka dheeraadka leh (portorage) ayaa la siin karaa kharashkaas haddii uu Taarka geeyo saacadihiisa shaqo ee caadiga ah ka bacdi isagoo aan dib-u-dhac ku samaynayn Taararka ilaa waqtigaas.

QODOBKA 42AAD

SAACADAHA GAYNTA

Taararka degdegga ah waa in isla markiiba la geeyaa, loona yeelo adeege khaas ah haddii loo baahdo. Taararka caadiga ah oo u muuqda inay leeyihiin ahmiyad degdeg ah waa in loo tixgeliyaa sida kuwa degdegga ah.

Taararka caadiga ah ee la qabto wakhtiyada caadiga ah ee saacadaha gaynta Telegraafeed waa in sida ugu dhakhso badan oo suuragal ah loo geeyaa. Saacadaha shaqo waxaa sugaya nidaam xafiiseedka ay gaar ahaan kula shaqeeyaan Xafiis walba iyo marba mudnaantiisa.

QODOBKA 43AAD
GAYNTA SIXIDDU LA SOCOTO (CTF).

Marka la qabto Taarar wata tusmo hawleed ah (CTF.. ereyada), Xafiiska uu Taarku u socdaa waa inuu ku qoraa macnaha tusmo hawleedkan koobiguu bixinayo. Marka la helo sixidda Taar markii hore watay CTF, koobi saxan ee Taarkii hore waa in laga diyaariyaa laba nuqul. Nuqulka sare waxaa la siinayaa qofkii Taarku u socday iyadoo ay si cad ugu qoran tahay :- (Nuqul saxan). Koobigii Taarka iyo risiidhka qofka Taarku u socday iyo koobigii Taar hawleedkii sixidda waa in lagu lifaaqaa Taarkii hore.

QODOBKA 44AAD
GAYNTA TAARARKA JAWAABTOODA LA BIXIYEY

Marka la qabto taar Jawaabtiisa la bixiyey, xafiiska Taarka gaynaya wuxuu u gudbinayaa qofka Taarku u socdo xaashida lacag bixinta oo dhaqan gal ah muddo ku siman 3 bilood, si loogu isticmaalo dhammaan lacagtii ama qaarkeed ee Taar kasta. Xaashida lacag bixinta waxay muujinaysa qadarka lacageed oo ku qeexan shillinka Soomaaliga ah oo uu bixiyey dirsaduhu iyo tirada ereyada oo uu taarku koobayo, haddii uu taarku yahay mid gudaha ah ama dibeddaba.

QODOBKA 45AAD
GUDIDDA TAARARKA JAWAABTOODA LA BIXIYEY

Haddii qofka u socoda isticmaali waayo xaashida lacag bixinta qiimihiisa waxaa loo celin doonaa dirsadaha haddii uu soo codsado kuna soo celiyo xaashidii lacag bixinta muddo 4 bilood ah laga bilaabo Taariikhdii la bixiyey. Haddii kharashka jawaabtu ka yartahay lacagtii la bixiyey, haraagu haddii aanay ka yaray 5 shillin waa loo celin doonaa dirsadaha ama loo diraha markii uu ku soo codsado muddo 4 bilood gudaheed ah laga soo bilaabo taariikhdii la bixiyey xaashida lacag bixinta

QODOBKA 46AAD
XAFIISYADA GUDAYA LACAGTA

Dhammaan codsiyada gudidda kharashka jawaabta waa in lagu soo hagaajiyaa Xafiiska xaashida lacag bixinta dhiibay.

QAYBTA III
TELEKISKA
QODOBKA 47AAD
BEDKA ISUGUDBIYAHA TELEBRINTERKA

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay xadadi doontaa bedka isugudbiyaha Teleberinterada iyadoo tixgelinaysa duruufta bulsho iyo tan dhaqaaleba'qiyaasta hawlaha telekisku deeqi karaan iyo sicirka ay ku kici karto in bulshada loogu qalabeeyo hawlaha isgaarsiinta.

QODOBKA 48AAD
CODSIGA RAKIBAADDA TELEKISKA

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiintu waxay ogolaanaysaa codsiga Telekis rakibaadda qalabka Telekiska ee ku jira bedka isugudbiyaha kireestayaasha Teleberinterada ama fududaynta hawlaha Telekiska ee caalmiga ah.

QODBKA 49AAD
KIRADA SANNADEED

Kiraystuhu waa in uu qadimaa kharashka rakibaadda iyo kirada sannadeed ee qalabka telekiska.

QODOBKA 50AAD
HALBEEGGA WAQTIGA ISKU XIRNAASHAHA

Halbeegga waqtiga isku xirka Telekisku wuxuu noqonayaa muddo saddex daqiiqo ah ugu yaraan ama jabjab saddex daqiiqo.

QODOBKA 51AAD
QIIMAHA HALBEEGGA

Qiimaha halbeegga waa in laga eegaa Taariifada Telegaraafka.

QODOBKA 52AAD
TELEKISKA DADWEYNAHA

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waa in ay tixgelisaa baahida dadweynaha iyada oo u rakibaysa Telekis hawlaha dadweynaha lagu fuliyo, oo laga heli doono xafiisyada telegaraafka markay suuragal noqotaba.

QAYBTA IV
TELEEFOONKA
QODOBKA 53AAD
BEDKA ISKU GUDBINTA TELEEFOONKA

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiintu waxay xaddidda sohdinta la xiriirta codsiga heshiisyada ee rakibaadda Teleefoonada la kiraysto

QODOBKA 54AAD
KARASHKA RAKIBAADDA

Codsaduhu waa in uu bixiyaa qiimaha rakibaadda, markay lagama maarmaan noqotana kharashka laynka iyo kaawada (cable).

QODOBKA 55AAD
KIRADA BISHA

Kiraystaha Teleefoonku waa in uu ku bixiyaa qadimaad saddexdii biloodba kirada Teleefoonka ee bisha, kharashkaas oo laga eegaa Taariifada Teleefoonka.

QODOBKA 56AAD
QIIMAHA WACIDDA FOG

Xubinta xisaabaadka Teleefoonku waxay diyaariyaan qaansheegtooyin bishii ay ka doonayaan kiraystayaasha Teleefoonka ee wacidda gudaha yo dibeddaba.

QODOBKA 57AAD
HOGGAANKA TELEEFOONKA

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay daabacdaa sannad walba, haddii ay suuragal tahay, hoggaanka Teleefoonka oo muujinaaya magacyada, cinwaanada iyo lambarada Teleefoonada.

Hoggaanka Teleefoonkana waxaa laga iibiyaa kiraystayaasha Teleefoonada iyo cid kastoo ay khuseeyso.

QODOBKA 58AAD
DIIDMO CODSASHO

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay diidi kartaa oggolaanshaha codsi weydiistuhu ku doonaayo rikibaad Teleefoon markay sida hoos ku xusan arrintu tahay :-

a) meelaha dhis cusub, dib-u-dhis ama dayactir mash ruuc isgaarsiineed rakibaadiisu lagama maarmaan tahay, ayaan codsadaha loo oggolaan karin, marka laga eego dhinaca farsamada.

b) Kolka kireystuhu Teleefoon horay u dayacay ama aanu bixin karayn kharashka.

QODOBKA 59AAD
WACIDDA FOG EE GAARKA AH

Wacidda fog ee dalka gudihiisa ama tan caalamiga ah waxaa la gudbin karaa marka la bixiyo lacagta ku xaddidan Taariifada Teleefoonka, ama ay u taalo xisaabta curaarta ah, haddii aanay horeba u dhammaan.

QODOBKA 60AAD
LACAG-BIXINTA WAQTIGA WACIDDA

a) Marka lacag-bixinta la sameeyo waqtiga wacidda, karaaniga wuxuu samayn doonaa xaashida lacag qabashada ee hab xisaabeedka oo saddex nuqul ah, nuqulka sare waxaa la siinayaa wacaha.

b) Haddii wacaha lacag deebaaji ahi ay ka taallo :-

1. Lacagta deebaajiga ah ee wicidda fog ee Teleefoonka waxaa loogu qorayaa buugga xisaabta yoomiga ah, iyada oo si gaar ahaaneed loogu diiwaan gelinayo lacagta deebaajiga ah ee wacidda fog.

2. Xisaab soocan waa in loo sameeyaa debaaji kasta laguna qoraa foom khaas ah, oo qofka lacagta dhigtay mar walba hubin karo waqtiyada shaqada.

3. Laba nuqul ayaa laga samaynayaa wacidda fog ee laga bixiyey lacag oo debaaji ah, laguna qoraayo foom khaas ah. Nuqulka sare waxaa lagu lifaaqayaa xi-

QODOBKA 61AAD
TELEEFOONNADA DAWLADDA

Saraakiisha Dawladda looma oggola in ay waxyaalo gaar u ah ku isticmaalaan Teleefoonada xafiisyada Dawladda. Madaxda laamaha dáwladdu waa in ay soo caddeeyaan lambarada Teleefoonada iyo magacyada shaqaalaha hay'adahooda ee si gaar ahaaneed loogu oggolaaday wicidda fog ee la xiriirta baahida xafiisyadooda. Kharashka bileed waxaa loo gudbin doonaa bil kasta.

QODOBKA 62AAD
WACIDDA FOG EE DAWLADDA

a) Hawlaha xafiiska xiriirinta Teleefoonada waa in uu hubiyaa lambarada xafiisyada codsanayo wacidda fog in uu yahay kuwa liiska ku qoran ee lambarada loo shaciyeeyey wicidda fog leh.

b) Saraakiisha dawladda ee codsanaya wacidda fog waa in ay sheegaan magacyadooda, derejadooda iyo laamaha ay ka tirsan yihiin.

QODOBKA 63AAD
DIIWAAN-GELINTA WACIDDA

a) Hawlwadeenada xarunta xiriirinta Teleefoonadu waxay ku diiwaangelin doonaan astaamaha wacidda foom khaas ah, oo lambar taxan leh, oo laba nuqul leh. Marka wacidda la gudbiyo waxaa lagu qoraa isla foomkaa waqtiga bilowga wacidda iyo dhammaadkaba.

b) Wacidda fog ee dawladda waxaa lagu diiwaan gelin doonaa foom khaas ah, oo ay ku qoran tahay «Wacidda fog ee Dawladda».

c) Foomkaas oo kale waxa lagu diiwaan-gelinayaa wacidda fog ee dibedda ka timid.

QODOBKA 64AAD
XISAABAHA WACIDDA FOG

a) Nuqullada sare ee foomka xasuusta ah oo ay weheliyaan nuqullada hoose ee risiidka ee la siinayo wacaha (qodobka 63) ayaa lagu lifaaqayaa xaashida lacag bixinta yoomiga ah ee lacagta wacidda fog.

b) Lacagta caddanka ah ee laga qabto wacidda fog waa in rasiid loogu gudbiya madaxa boostada ama Wakiilada Wasaaradda Maaliyada ka jooga Gobollada iyo Degmooyinka iyo Xisaabiyaha Guud ee Dawladda Xamar.

c) Xaashida Xisaabaadka yoomiga ah iyo rasiidada ayaa loo dirayaa Xubinta Xisaabaadka Teleefoonnada.

QODOBKA 65AAD
MUDNAANTA WACIDDA

Wacidda Teleefoonka waxaa loo kala hor gudbinayaa sida soo socota :-

a) Wacidda dhiilada ah ee ku saabsan badbaadinta naf xagga badda, dhulka, cirka ama wacid degdeg ah oo la xiriirta Ururka Caafimaadka Adduunka looguna baaqayo cudurada sida degdegga ah u faafa.

b) Wacid hawleed degdeg ah.

c) Wacidda Dawladda ee degdegga ah.

d) Wacidda gaar ahaaneed ee degdegga ah

e) Wacidda dawliga ah ee caadiga ah.

f) Wacidda gaar ahaaneed ee caadiga ah

QODOBKA 66AAD
GUDBINTA WACIDDA

Mar haddii la gudbiyo wacidda oo lambarka la wacaayey laga hadlo, lacag laga qaadi maayo, haddii la waayo qofka la doonaayo.

QODOBKA 67AAD
LACAG CELIN

Haddii jawaab laga waayo Teleefoonka la wacay, lacagta laga qaaday ayaa loo celinayaa qofkii wacay ee rasiidka saxeexay. Labada nuqul ayaa lagu sugayaa «Lacag celinta jawaab la'aanta», waxaa lagu lifaaqayaa xaashida lacag-bixinta

QODOBKA 68AAD
HALBEEGGA QIIMAHA

Halbeegga qiimaha wacidda gaar ahaaneed ee caadiga ah ama degdegga ah waa ugu yaraan muddo saddex daqiiqo ah, ama jabjabka halbeegga.

QODOBKA 69AAD
WACIDDA DEGDEGGA AH

Qiimaha laga qaadayaa wacidda degdegga ah waa in laga dhigaa laba jibaarka qiimaha wacidda kharashka ah ee caadiga ah, isla muddadana ah.

QODOBKA 70AAD
BAABI'INTA WACIDDA

Wacuhu wuu baabi'in karaa balansigii wacidda isaga oo aan la qaan-dhabin.

— Haddii aan loo sheegin in loo gudbiyey.
— Ka bacdi haddii loo sheegay in wacidda loo gudbin doono, oo aan loo sheegin in Teleefoonkaasi lagu hadlayo ama aannu jawaabay.

QODOBKA 71AAD
RAKIBAADDA QALABKA DABIDDA TELEEFOONADA

Haddii kireystuhu ka dacwoodo wacida uusan raalli ka ahayn, Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay ku rakabi kartaa Teleefoonka kireystaha qalabka dabidda Teleefoonada si loo ogaado lambarka Teleefoonka ee wicidahaas aan loo baahneyn ay ka imaanayaan.

Haddaba dacwooyinka noocaas ah waa in la geeyaa Ciidanka Booliska lagana codsadaa rakibaada qalabka dabidda Teleefoonada. Markii lambarka Teleefoonka la dabay uu ku soo dhaco siriqda, warbixintaas Wasaaradda waxay u soo gudbin doontaa Ciidanka Booliska oo kali ah.

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta mas'uul kama aha [illegible] ee warbixintaas ka dhasha

QODOBKA 72AAD

U QOOLAANTA KIREYSTAHA TELEEFOONKA

Kireystaha Teleefoonka ee magaciisu diiwaan-gashan yahay oo kali ah ayaa u qoolan arrimaha soo socda :-

— Biilka ama kharashka Teleefoonka u gaarka ah.
— Dhaawaca qalabka Teleefoonka iyo wixii kale ee Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiintu leedahay lana xiriira rakibaada Teleefoonkiisa.
— Wixii dambi ah ee ka yimaada sticmaal xumada Teleefoonkiisa sida wicido aan raalli laga ahayn.

QODOBKA 73AAD

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta wuxuu soo saari karaa hab hawleed ku saabsan hawlaha isgaarsiinta ee la xiriira dhawridda xeerarka guud ee ku xusan Sharci Isgaarsiinta iyo Xeernidaamyaasha Isgaarsiinta.

Decree of the President of the Republic N. 42 on 7th Juun 1979 concerning Telecommunications Regulation

HAVING SEEN : The first, the second aand the third Charters of the Revolution of 21st October, 1969;

HAVING SEEN : Article 41 of the Telecommunications Law No. 1 of 22 December, 1975;

HAVING RECOGNIZED : The necessity of issuing Regulations for proper impie-metation of Telecommunications Law;

HAVING CONSIDERED : The proposal presented by the Ministry of Post and Telecommunications.

D E C R E E S

ARTICLE 1

The Telecommunication Regulations which is annexed hereto, is hereby approved ad shall form an intergral part of this decree.

ARTICLE 2

This Decree shall come into force on the date following its publication in the Official Bulletin.

Muqdisho, 7 Juny 79

Jaalle S/G Mohamed Siyaad Barre
President of Somali Democratic Republic

Jaalle Dr. Abdullaahi Ossoble Siyad
Ministry of Post & Telecommunications

CHAPTER I

ARTICLE 1

DEFINITION

a) Telecommunication :- Are any emmission, transmission or reception of signal codes, sounds or images by wire, radio or other electromagnetic system.

b) Telegraphy :- A system of Telecommunication for transmission of written matter by the use of signals.

c) Telephony :-A system of Telecommunication set up for the transmission of speech by electrical means.

d) Phototelegram:- Photoelectrical transmission system for point to point or air to ground transmmision of high-defus sion pectural information.

ARTICLE 2

Telecommunication services are monopoly of the Ministry of Posts & Telecommunications

ARTICLE 3

Except for the necessary of Milltary nature and internal security, installation and the operation of the Telecommunication companies belong exlusively to the Ministry of Posts and Telecommunications

ARTICLE 4

The Ministry of Posts and Telecommunications may give permission for the exclusive private use of Telecommunication provided that there are reasons of public interest or when there is international concurent obligation.

ARTICLE 5

Telecommunication services will be performed by telephone, telegraphy offices, call boxes existing or especially established for public utility.

ARTICLE 6

The Ministry of Post and Telecommunications reserves the right to refuse any transmission emmission or reception of signals, images and sound or intellegence of any nature by wire, radio visual or other elecromagnetic system which may appear dangerous to the security of state or which may be contrary to the Laws of the country, to public order or decency.

ARTICLE 7
LIABILITY

Except the refund of telegram charges or Telephone calls fees, the Ministry of Post and Telecommunications does not incur any liability of non delivery or delay of telegram, failure of connection of Telephone calls, or delay or failure of connection of Telex massages.

ARTICLE 8
TELECOMMUNICATION TARRIF

The Ministry of Posts and Telecommunications is authorized to issue Telecommunication services tarrif with consultation of Ministry of Finance.

CHAPTER II
PROVISIONS CONCERNING TELEGRAPH

ARTICLE 9
PRIORITY OF TRANSIMISSION

Telegrams are afforded priority when transmission in the following order :

a) Telegrams relating to safety of live at sea or in air. The word «Urgent» must be written before the address and urgent (SVH) in the service indication.
b) Urgent air navigation Telegram pref. (urgent)
c) Urgent service Telegrams prefix (Urgent)
d) Urgent meteorological Telegrams prefi (Urgent)
e) Air Navigation Telegrams prefix (Urgent)
f) Urgent official including Military telegrams prefix (d)
g) Urgent private telegrams prefix (Urgent)
h) Urgent Press Telegrams prefix (Urgent)
i) Meteorological Telegrams prefix (d) the service indication (OBS) must be written before the address and in the service indications.

j) Paid service advise and replies there to prefix (ST)
k) Foeign private Telegrams.
i) Inland private Telegrams.
m) Press Telegrams prefix press.
n) Letter Telegrams LT
o) Service Telegrams prefix S. G.

ARTICLE 10
ACCEPTANCE OF TELEGRAMS

Telegrams should be written on form MOD — 25 (T/IA), messages presented on other should be gunned on the said modl, so that the headings of the form can be utilized. Care should be taken to ensure that any service indications are transferred on thespace provided in the form.

ARTICLE 11
LANGUAGE OF TELEGRAM

a) Telegrams written in Somali and Arabic languages or in Latin character are admitted.

b) The sender of telegrams in secret language must produce the code from which the text or part of the text or the signature of the telegram is compiled if the office of origin asks him for it. This shall not apply to Government Telegrams.

ARTICLE 12
COUNTING OF WORDS

a) Each word in common use or appearing as one word in standard Dictionary of one of the admitted languages mentioned in article (12a); shall be counted at the rate of 15 letters to the word, plus one word for each 15 letters or fraction of 15 letters in excess.

b) Groups composed of letters, figures, signs or mixiture of these various elements shall be counted at the rate five characters to the word, plus one word for each five characters or fraction of five characters in excess.

ARTICLE 13
PRESS TELEGRAMS

a) Press Telegrams are telegrams, the text of which is made up of information and news for publication in newspapers and other periodical publications or for Radio sound or Television broadcasting Provided that they are not containing any passage, announcement or communication having the character of private correspondence nor any advertisement or communication in any publication, for radio broadcasting or for television whether or not a charge is made.

b) The minimum number of chargable words for ordinary press Telegrams shall be fourteen words.

c) Ordinary press Telegrams charges shall be reduced to (1/3) of ordinary Telegrams charges.

d) The cahrge per word to be collected for an urgent press Telegrams shall be the same as the charges per word collected for an ordinary private Telegrams.

ARTICLE 14
ORDINARY AND URGENT PRESS

Telegrams may be accepted without the advance payment of charges provided that the sender is an accredited correspondent.

ARTICLE 15
PHONOGRAMS

A Phonograme is a telegrame passed to from a Telegarph office by Telephone. Phonograms are accepted and sent to :-

— Telephone Posts.
— Post and Telegraph sub-offices
— Individuals or telephones either private or government

ARTICLE 16
ACCEPTANCE OF PRIVATE PHONOGRAMS

Private persons may originate Phonograms from Telephone Post if they have deposited reassonable sum before hand at the Telegraph office concerned and so long as their deposit is not exhausted, such Telegarams will be abstracted with private Telegrams. Top copy of Telegraph charges receipt, (T9),

ARTICLE 17
CASH DESPOSITED FOR PRIVATE

Phonograms will be dealt with similar to the procedures taken in article 16, concerning trunk calls deposit.

ARTICLE 18
OFFICIAL PHONOGRAMS

Phonograms originated by government officials will be accepted during office hours by the nearest Telegraph office. The receiving clerk will obtain the full name, and rank appointment of sender. These informations shall be recorded on the bottom of (Model — 25 (T/1A) on the spece reserved for each information. After acceptance the message will be transmitted as a telegram abstracted with official forwarded Telegrams and debited to the government unit concerned in the usual way see article 27

ARTICLE 19
NUMBERING OF TELEGRAMS

Telegrams accepted will be given consecutive number throughout the month, no alteration is to be made in the office number after its transmission, but additional consecutive number shall be given according to priority of transmission to serve checking purposes.

ARTICLE 20
CASH PAID TELEGRAMS

Two copies of receipts from book (T9) will be made out for cash paid of each Telegrame, original copy will be given to sender, the receipt must show the sum collected in Somali Shillings, number of Telegrams, date and time of handling in destination of Telegrame and date stamp of accepting office.

No alteration is allowed, if a mistake is made, the two copies must be cancelled and remain in the book.

ARTICLE 21
DELIVERY OF TELEGRAPH TAKINGS

Telegraph takings of the previous day will be delivered the next day not later than 0900 hours, delivery of cash will be against receipt according to remaining copies of (T9) which should be verified by the cashier.

ARTICLE 22
DISPOSAL OF TELEGRAPH TAKINGS

Post masters must deliver Telegraph takings to Ministry of Finance representative in provinces and districts against receipt of financial form (G1).

ARTICLE 23
PAID TELEGRAMS JOURNAL

Post masters are requested to prepare form (T14) (paid Telegrams journal) on which summery of each Telegram is endorsed showing : Ho, of message number of words, cash collected and destination. Telegrams Journal T14 together with copies of Telegrams and receipt (G1) received from Ministry of Finance representative shall be sent to Telegraph control section Mogadiscio.

ARTICLE 24
ON ACCOUNT TELEGRAMS

Telegrams sent by government agencies, or private companies may be accepted on account with the advance deposit of sum money. Charges of Telegrams senton account will be collected at the end of each month. Additional fees may be added to on account telegrams charges when preparing the bill of claim.

ARTICLE 25
ACCEPTANEE OF AN ACCOUNT TELEGRAMS

When accepting an account Telegrame separate (T9) (receipts book) for every, government agency, or Private Companies etc, shall be prepared after the words of Telegrame are co-unted, all the necessary details shall be endorsed in (T9) which will be issued with copy.

Both copies of (T9) together with the copies of the Telegrams should be attached to (T14) which will be prepared separately for an account Telegram and sent to Telegraph control section.

ARTICLE 26
OFFICIAL TELEGRAMS

Telegrams sent by government units must bear the name of chargeable unit, full name of the official signing the Telelegrame and if possible the stamp of the unit sending Tele-

ARTICLE 27
ACCEPTANCE OF OFFICIAL TELEGRAMS

Official Telegrams will be given consecutive number from book (22 TER). Summary details of Telegrams e.,g. (no of words, destination name of government unit sending the Telegrame.... etc) will be endorsed on book (22 TER) which will be prepared with copy. Original copy of (22 TER) together with copies of Telegrams will be sent to Telegraph control section fo the settlement of accounts.

ARTICLE 28
CANCELLATION OF TELEGRAMS

